# XEERKA

# CIQAABTA

# CIIDAMADA

# QALABKA SIDA

# XEERKA CIQAABTA CIIDAMADA QALABKA SIDA

TARTE PRIMA
CODICE PENALE MILITARRE DI PACE
LIBRO PRIMO
DEI REATI MILITERI IN GENERALE
TITOLO I
DELLA LEGGE PENALE MILLITARE

BUUGGA 1AAD:-

1- Sharci lambar 2 ee soo baxay 24/12/1963dii
2- Xeer lambar 2 ee soo baxay 31/03/ 1964tii

Qod.1aad XCCQS, Koodishahaan waxaa hoos yimaada ciidamada meleteriga iyo dadka qaanuun ahaan qaata magaca ciidamada qalabka sida:-

1-waxaa lagu fuliyaa ama lagu qaadaa ciidamada shaqada haya iyo kuwa loo aqoonsan yahay sidaas oo kale.

2- xeerku wuxuu qeexayaa xaalladaha ciidamada qalabka sida.

3- sidoo kale wuxuu qabanayaa qof kasta oo qaata hub sidoo kale ka soo horjeesta Qaranka soomaaliyeed iyo ciidamada qalabka sida (1)

Qod.2aad, XCCQS ciidamada qaranka waxaa hoos imaanaya ciidamada X.D.S. iyo kuwa ah ciidanka meleteriga oo xeer ahaan qaadanaya magaca ciidamada qalabka sida.

Qod.3aad, XCCQS ciidamada hoos yimaada meleteriga hubaysan haddii aan qaanuunku si kale u fasirin ciidamada shaqada qaranka ku jira, waxaa loo adeegsanayaa xeerka ciqaabta meleteriga gaar ahaan Saraakiisha iyo S/xigeenada laga bilaabo goorta loo magacaabay lana gaarsiiyey inuu ka tirsan yahay ciidamada qalabka sida, wuxuuna ka tirsanaan doonaa ciidamada qalabka sida ilaa laga saaro shaqada ciidamada qalabka sida.

(b) si gaar ahaan ciidamada kale ee qaranka goorta loo qaato shaqada qaranka ilaa laga ruqseeyo.

(2) ka maqnaanshada shaqada qofka ka tirsan ciidamada meleteriga sida fasax ahaan ama sabab caafimaad darro. ama baxsi dartiis, ama shaqo kale iyo sababo kale oo aan siyaabahaas ka fogeyn lagama maarmaayo in loo adeegsado xeerka ciqaabta ciidamada qalabka sida.

(3) arrimaha ka yimaada xaalladaha aan soo sheegnay gaarsiintooda qofka loo adeegsanayo waa sida kor lagu soo sheegay qodobka. 3aad.

Qod.4aad, XCCQS ciidamada loogu talo galay shaqada hubaysan sharuudaha xeerka ciqaabta meleteriga, waxaa loo adeegsadaa gudashada hawlaha ciidanka:-

(a) Saraakiisha dibada ka jooga hawlaha ciidanka ama laga hakiyey shaqada ama si walba arrintu ha ahaatee, waxay ahaan doonaan kuwa aan ka fasaxnayn hawlaha ciidamada inkastoo aysan shaqo joogta ah ka haynin ciidamada qaranka.

(b) ciidamada dibada ka jooga shaqada oo ku maqan fakadka ama soo xaadiri waaya goorta loo yeero ama fasax la'aan kaga maqan shaqada.

(c) Ciidamad fasaxa ku maqan oo soo dhamaysanayey ciqaab xirnaashaha ciidan bilow ah ama caadi loogu beddelay ciqaab caadi ah.

(d) Ciidamada fasax ku meel gaar ah ku maqan ee xeryaha ciidanka ku xiran, waxaa la marinayaa fal ciqaabeed waafaqsan garsoorka ciidamada qalabka sida.

(e) Meleteri kasta oo ku maqan shaqo ciidan si uu ugu shaqeeyo qaranka, waxaa loo dejiyey anshax marin ciidan.

Qod.5aad, XCCQS meleteriga dib loogu yeeraayo shaqada ciidamada qalabka sida ama fasax ahaa dib loogu yeero shaqada ciidamada, waxaa lagu dabaqayaa X.C.C.Q.S. ilaa ay ka dhaqan gasho ujeedadooda.

Qod.6aad, dadka ciidan ahaan shaqada meleteriga haya iyadoo la daba joogo xeerka c.q.s. u degsan, waxaa dhammaanaya ka mid ahaanshihii ciidanka.

(a) Saraakiisha meleteriga loo dhiibay warqadii ruqsada oo ay kaga dhamaatay ka mid ahaanshaha shaqada c.q.s.

(b) Ciidanka kale meleteriga oo laga saaray lana siiyey warqada shaqo ka tagista (ruqso) ayey hawshoodu uga eg tahay.

Qod.7aad, XCCQS, Ciidanka ama ciidan u yaal dadka ah (rayid) hayana shaqada C.Q.S. waxaa loo adeegsanayaa ciqaabta qaynuunka C.Q.S. kuwa ku qoran liiska ciidamada Q.S. marka laga eego xeerka C.Q.S.

Qod.8aad, Xccqs Dadka ku socdaala maraakiibta, gaadiidka gaashaaman iyo diyaaradaha C.Q.S. waxaa loo adeegsanayaa xeerka c.q.s.

1- Qof kasta oo raaca maraakiibta, diyaaradaha iyo baabuurta meleteriga meesha uu u socdo waa loo sheegayaa ilaa uu ka dego gaadiidka, haddii la waayo markabkii ama gaadiidkii uu raacay waa in la og yahay sida xaaladdiisu ay noqotay.
2- Sida uu qabo xeerka ciqaabta ciidamada meleteriga markab, diyaarad iyo gaadiid kale ay Ciidamadu kula wareegaan dagaal dartiis, waxaa loo magacaabayaa taliye ka tirsan C.Q.S.

Qod.9aad, XCCQS Xadeynta derejada kuwa la isku kahi karo dadka lagu qaado gaadiidka c.q.s. haddii laga fiirinaayo xeerka C.Q.S. kuwo isu eg cid kastoo dul saaran gaadiidka kor ku xusan waxaa loo qaadan karaa sidii iyagoo qaba derajada ay haystaan ciidanka X.D.S. ama kuwa gaadiidka ciidamada saran in ay la mid noqdaan.

Qod.10aad, Ciidamada u eg meleteriga oo fasaxa ah kuna qoran liiska rayidka , balse loo qaadan karo inaysan ka mid ahayn ciidamada .qalabka.sida, xaaladaha kor lagu soo sheegay. waxaa ka duwan qodobada kor ku xusan ciidamada fasaxa ku maqan. meleteriga fasaxa dheer galay, kuwa raaca meleteriga , kuwa ku qoran liiska dadka rayidka ah, maleteri ahaan u hubaysan, waxaa loo qaadanayaa ayna noqonayaan kuwo ka duwan ciidamada qalabka sida. Marka loo fiiriyo xeerka ciidamada qalabka sida ee qaranka soomaaliyeed.

Qod.11aad, XCCQS, Dadka aan ka tirsanayn ciidamada qalabka sida ee qaranka soomaaliyeed, waxaa hoos yimaada xeerka ciidamada qalabka sida, dadka aan ka mid ahayn ciidamada qalabka sida oo ku xadgudba qaanuunkaan ciidamada qalabka sida, kaasna la waafajiyo fal dembiyeedka c.q.s., ka sokow xaaladaha lagu soo sheegay xeerka ciidamada qalabka sida, dadka aan ka tirsanayn ciidamada qalabka sida ee ku xadgudba arrimo ka mid ah fal dembiyeedyada ku xusan qodobada 78-120-124-125-126-129-166-168, waxaa loo adeegsanayaa fal dembiyeedyada xeerka meleteriga oo beddelayo xeerka ciqaabta caadiga ah oo ka dhaxeeya ciidamada qalabka sida, sida uu qabo qod.55 x.c.c.q.s. si kastaba hahaatee arrintaani wuxuu garsooruhu awoodaa inuu wax ka dhimo ciqaabida.

Qod.12aad, <u>Fal dembiyeedyada lagu xadgudbo</u>:-

1- Fal dembiyeedyada lagu xadgudbo goorta shaqada lagu jiro ee dib laga ogaaday ama la go'aamiyey kadib markii la joojiyey arrimahaas.

2- Xeerka ciqaabta ciidamada qalabka sida waxaa loo adeegsanayaa markuu jiro fal dembiyeed meleteri oo lagu xadgudbay inta la hayo shaqada ciidamada qalabka sida xitaa haddii dib laga ogaado ama lagu xukumo inta eedaysane ku maqan yahay fasax ama banaanka ka joogo shaqada ciidamada qalabka sida.

Qod.13aad, tirtirida ama baabi'inta askar qorista aqoon darro darteed, hawl qabad la xiriira shaqada ciidamada qalabka sida, waxaa loo adeegsadaa dadka ka tirsan ciidamada qalabka sida xitaa marka ay arintu' joogto fal dembiyeed dhacay kadib markii lagu dhawaaqay tirtiridda qoristii ciidamada ama markii la hubiyey in aysan u qalmin hawlaha ciidanka guud ahaan fal kasta oo ku shaqeeya hawlaha ciidamada.

Qod.14aad, xcqs, <u>Fal dembiyeedyada lagu galo dalka dibadiisa meel ah</u>:-

1- Xeerka ciqaabta ciidamada qalabka sida, waxaa loo adeegsadaa dadka ka mid ah ciidamada ka hawlgeli kara xitaa haddii uu hawl ka hayo dalka dibadiisa oo uu shaqo u tago maalmo joog ama socod ku maro meel ay joogaan ciidamada qalabka sida iyadoo la dhowraayo qaanuunka heshiisyada dalka dibadiisa ku saabsan ee loogu dhaqmo nidaamka aduunka u degsan.

2- Ka sokow wixii aan kor ku soo sheegnay faqrada ku saabsan faldembiyeedyada lagu galo dalka dibadiisa dadka hoos imaanaya ciidamada qalabka sida, waxaa lagu ciqaabayaa qaanuunka sida uu qabo ee aan kor ku soo sheegnay qodobka 7aad 8aad codice penale meletare.

Qod.15aad, XCCQS, Nidaamka ku tilmaaman xeerka kale ee ciidamada qalabka sida loo adeegsado amaanka xeerka meleteriga, waxaa loo isticmaalaa xitaa nidaamka xeerka meleteriga xilliga dagaalka haday jiraan xeerar kale ee ciidamada qalabka sida, haddii aysan xeer ciqaabeed si kale qaanuunka u tilmaamin waa la adeegsanayaa xeerar kale.

Qod.16aad, XCCQS, Qaybta meleteriga madaxa 1aad kalabixinta ciqaabta meleteriga iyo ciqaabaha waaweyn ee meleteiga waa:-

(a) Dil qod.19 X.C.C.Q.S.

(b) Xabsi ciidan qod.20 X.C.C.Q.S.

(c) Ciqaabta ciidamada qalabka sida wuxuu u tilmaamayaa garsooraha fal dembiyeedyada ciqaabta loo adeegsado xabsi daa'in iyo xabsi qod.95-96 x.c.c.q.s.

Qod.17aad x.c.c.q.s. Magacyada qaybta ciqaabaha xabsiga meleteriga:-

(a) Magacyada ay qaataan X.C.C.Q.S. oo ah ciqaab xadidadan, ciqaab aan xadidnayn oo lala xiriirinaayo fal dembiyeedyada lagu tilmaamay farqada 1aad ee qodobka 91aad x.c.c.q.s, haba la haado xataa xabsi ciidan.

Qod.18aad, Xccqs Fal dembiyeedyada aan caadiga ahayn ee meleteriga waa:-

(a) Garaado ka jarid qod. 21 XCCQS.

(b) Dacwo wareejin qod. 22 XCCQS.

(c) Shaqo ka joojin qod. 23 XCCQS.

(d) Dallacaad ka joojin qod. 24 XCCQS.

Qod.19 x.c.cq.s, Ciqaabaha dilka ah ee meleteriga:- ciqaabta meleteriga ugu waaweyn

(1) Fal dembiyeed ciqaab dil ah, waxaa lagu hirgeliyaa toogasho safka ah waana in ay ahaataa meel meleteri qaas u ah qod.16aad x.c.c.q.s.

(2) fal dembiyeedyada ciqaabta dilka ah, waxaa lagu hirgelinayaa marka fal ciqaabeedku ujeedadiisu tahay xil ka qaadis iyo derejo ka qaadis.

Qod.20aad, XCCQS

1- Fal ciqaabeed xabsi meleteri ciidamada qalabka sida, wuxuu ka bilowdaa 1 bil ilaa 24 sano, waxaana lagu dhamaynayaa ciqaabta meelo loogu talo galay fulinteeda, ciqaabtaas oo ay weliba dheer tahay shaqo qasab ah, qodobka 16aad X.C.C.Q.S..

2- Saraakiisha aan ciqaabtu ka ridin derejada Garsooraha waxay xabsiyada ku dhamaysanayaan meel ka duwan kuwa kale.

Qod.21aad, XCCQS, Derejo ka dhigis (casilaad), casilaadu waxay ka imaan kartaa <u>qof kasta oo ciidanka ka mid ah oo xukun ku dhacay:-</u>

(a) Qof kasta oo ciidanka ka mid ah haddii aan sharcigu si kale u tilmaamin oo hayey shaqada ciidamada ama loo diray hawl gaar ah c.q.s.

(b) Billado qof leh ama qof beeshin ah (hawlgab) oo hore uga mid ahaan jiray c.q.s. waa laga casili karaa.

(2) sharciga ayaa xadidaya waqtiga xukunka ciqaabta ah ee dilka la raacinaayo casilaada derejada dhimista ah.

(3) Xukunka xabsi daa'inka ah ama xariga ah aan ka yarayn 5 sano wuxuu ku imaan karaa casilaada derejada iyo shaqada dembiga uu galay oo looga dhawaaqay qof hayey shaqada ciidanka ama hore looga eryay, waxay dhalinaysaa ama raacaya xukun casilaad derejo.

(4) Xukunka ku yimaada ciqaabta dilka ah iyo derejo ka qaadista ee qaybaha hore lagu soo sheegay waa la joojinayaa iyo wax kasta oo soo raaci lahaa xukankaas sida uu qabo qod.26aad xeerka C.S..

Qod.22aad, XCCQS, <u>DEREJO KA DHIMIS CIIDAN</u>:-

(1) Qof kasta oo ka mid ah ciidamada qalabka sida oo derejo leh waa laga dhimi karaa derejada sare ee uu markaas taagan yahay haddii lagu xukumo in hoos loo dejiyo ilaa laga gaarsiinaayo D/Le askari aan derejo lahayn.

(2) Xukun kasta waxaa raacaya derejo dhimis haddii aan sharcigu si kale u fasirin
(b)Saraakiisha & S/xigeenada haddii lagu xukumo xabsi ka sareeya 3 sano ah.
(c) Ciidamada kale haddii xukun 1 sano ka badan lagu xukumo.

Qod.23aad, <u>SHAQO KA JOOJIN SI KU MEEL GAAR AH</u>:-

(1) Shaqo ka joojin si ku meel gaar ah waxaa lagu dabaqayaa Saraakiisha, waxayna tahay ujeedadeedu ka joojin shaqo si ku meel gaar ah.

(2) marka laga reebo sida ku xusan qodobka la soo sheegay xukunka la saaro eedaysanaha meleteriga wuxuu keenayaa shaqo ka joojin inta ay socoto ciqaabtaas, qodobka.26aad x.c.s. ayaana loo raacinayaa dhanka qaanuunka kan ciidamada.

ɔd.24aad, Xccqs, LAALIDA DEREJADA S/XIGEENADA:-

1- waxaa lagu dabaqayaa S/xigeenka & Ciidaan ahaan waxayna ku jiraysaa xaalad si ku meel gaar ahaan looga qaadayo derejada ciidanka.
2- Xaaladaha ka baxsan qod 22aad x c.guud, xukunada meleteri ee ka sareeyo 10 sano (raclusione) waxaa la laalayaa derejada inta uu tirsanaayo xabsiga uu ku xukuman yahay (qod 26 x.c. guud).

ɩd.25aad, XCCQS, Ciqaabta la raacinaayo xukunada dembiyada X.C.guud, qaanuunka caadiga ah kunada lagu dhawaaqayo oo lidka ku ah ciidanka shaqada haya ama la ruqseeyay ee dembiyada ku san xeerka ciqaabta guud lana raaciyay ciqaab gaar ah, waxay keenaysaa:-

(a) Casilaad derejo haddii dembigaa ciqaabtiisu yahay Dil, xabsi daa'in ama xarig sida uu qabo xeerka ciqaabta guud, kaasoo ka istaajinaya hawlaha guud ee dadweynaha.

(b) Wixii ka duwan qaybta hore haday noqdaan dembiyada kama ahn oo lidka ku ah qaranimada ama dembiyada ku xusan qodobada 366,382,398,400,405,409,413,480,484,485,486,496,500,501 ,502 XCG, iyo been abuur lacageed haddii xukunku la raaciyay ilaalin gaar ah, markuu ciqaabta dhamaysto ama in lagceyo xarumaha dadka waalan amaba dibada lagu ilaaliyo.

(c) Shaqo ka joojin iyo garaado ka dhigista xeerkooda ku xusan qod.22,23,24 ee xukunka xabsiga sida ka muuqata qod.55-56 X.C.C.Q.S.

(2) Caddeynta caadaystaha dembiga oo waqti kasta lagu xukumay, askariga shaqada haya ama laga ruqseeyey sida uu qabo xeerka c.guud waxay keenaysaa in derejada laga xayuubiyo.

ɟ.26aad, XCCQS, BILAABASHADA CIQAABTA DULSAARKA AH:-

(1) Ciqaabta derejo dhimista ah iyo derejo ka qaadista waxay si toos ah u bilaabanaysaa marka xukunka ciqaabtu noqdo mid dhamaaday.

(2) shaqo ka joojinta & derejo ka joojin waxay bilaabanaysaa marka uu bilowdo fulinta xukunka guud.

l.27aad, XCCQS, Xaaladda sharci ee xukunsanaha ciqaabta dilka ah iyo derejo ka qaadista, unsanaha ciqaabta dilka ah iyo derejo ka qaadista wuxuu la meel yahay kan ku xukuman xabsi daa'in qaanuuniga ah ( qod 108 x.c.g).

.28aad, Xccqs Xukunada ku yimaada dembiyada laga galo hawlaha dadweynaha, haddii xukun ku ıado x.c.c.q.s. loo raaci mayo xaaladaha ku xusan qod.104 x.c.g.

Titoli11 Del Reato Melctari
Copo 1

Qod.29aad, XCCQS, Dembiyada ciidanka qalabka sida:-

(1) Fal dembiyeed kasta oo la xiriira xeerka ciidanka qalabka sida waa dembi ciidan.

(2) Dembi kasta oo ciidan oo ka dhasha hawl ciidan ama dhismihiisa qayb ka mid ah, waxaa loo aqoonsanayaa dembi xeerka ciqaabta guud & mid ciidan.

(3) Dembi kasta oo ku xusan xeerka ciqaabta guud oo uu galo qof ciidanka ka mid ah kuna galo hawsha ciidanka ama ciidan dhexdiisa ama xarumihiisa sabab shaqo awadeed asagoo awood sheeganaya mudada uu shaqada ku jiro.

(2) Dembi kasta oo ku xusan qodobada 282,312 x.c.g. dembiyadaas oo ah kuwa cadaaladda ka soo horjeeda oo uu galay qof ka mid ah ciidanka ama laga saaray shaqada dhammaanteed, waxaa awoodda qaadista dacwada iska leh Maxkamadda ciidamada qalabka sida, waxaana loo raacayaa sida uu qabo xeerka c.guud dembiyada ku xusan xeerkan, dembi kasta oo sharciga ciidamada qalabka sida ku xusan oo lagu tilmaamay qod 16aad x.c.c.q.s. waxaa loo aqoonsanayaa dembi.

Qod.30aad, XCCQS, XADGUDUB ASLUUB XUMO:- gef kasta oo lagu galo shaqada oo la xiriira asluubta ciidanka kana dhalanayso dembi, waxaa loo raacayaa xeer u gaar ah ama qaanuunka ciidanka oo uu soo saaray madaxweynaha jamhuuriyada, waxaana lagu ciqaabayaa arimaha ku xadidan.

Qod.31aad, XCCQS, WAAJIB FUDUDEYSASHO:- Askariga laga ogolaan maayo inuu fududeysto waajibaadka ciidanimo ee saran qod 5 X.C.S.

Qod.32aad, XCCQS, WAAJIB GUDASHO:-

(1) dunuubta ciidan ee goobaha sida ku xusan qod.33aad ee X.C.C.Q.S. waxaa loo raacayaa tilmaamaha soo socoda.

(2) Waajib gudasho ku timaada si sharci ah ama Amar madaxeed ama cidda awoodda u leh, waxay reebaysaa ciqaabta.

(3) Xaalad dembi haddii ay ka dhalato amar uu nin sare bixiyey ama qof awood u leh dembiga ka dhasha, waxaa ka jawaabaya ciddii amarka bixisay.

(4) sida ku xusan qaybaha sare, waxaa ka jawaabaya denbigaas askarigii xaaladda fuliyay haddii fulintaasi ay isu muujinayso dembi ku timaada.

Qod.33aad, XCCQS, ISticmaalka hubka loo ciqaabi mayo askariga gudanaya waajibkiisa shaqo haddii uu isticmaalo hub ama la amro inuu isticmaalo hub ama sabab ka timid dhismihiisa jirka asagoo iska

ebaya hajuun ama iska rixaya ishortaag, sharciga ayaa xadidaya amarka kale ee uu u fasaxan yahay icmaalka hubka sida ku xusan qod.35aad x.c.c.q.s.

od. 34aad XCCQS, DIFAACA NAFTA:-

1- Çiidamada ku sugan xaaladaha ku xusan qodobka 34aad Xccqs, waxaa loo raacayaa qaybta soo socta:-

2- Loo ciqaabi mayo qof ku gala dembi marka lagu qasbay oo ay ku timid inuu isaga reebo naftiisa ama dad kale hajuun ku socda oo xaqdaro ah, waase inay isu dhigmaan waxa lagu soo hajuumay iyo waxa uu isticmaalay.

3- La ciqaabi maayo askariga ku galay falka xaaladaha ku xusan qaybta 3aad iyo 4aad tiitolo 3aad ee buuga 2aad taas oo dani ku qasabtay ah.

(a) Iska difaacida hantidiisa kuwa burcada ah ee ku xusan qod. 201 Pis ama Boob (201 Tris) amaba afduubid nafeed oo ah burcadnimo boob sida ku xusan qod.486 X.C.S. amase burburin ee ku xusan qod.222-324 X.C.G.

(b) Ka hortiged fuliyayaasha Qaraxa jebinta, Gubida Guryaha, Warshadaha oo ay leeyihiin bulshada oo dhacaya habeenada amase guryo deegaan ah oo meelo garn ah ku yaala oo looga baqayo arimo nabadgalyada guud.

(4) Arrimaha falkoodu la xiriiro iska difaacida fuliyayaasha, Argagixisada, jebinta gubida guryaha ama meelaha kale ee la degan yahay sida ka muuqata xaaladaha ku tilmaaman qaybta b ee faqradaha hore, ciqaabta dilak ahayd iyo derajo ka qaadista la socotay waxaa lagu bedelayaa xarig aan ka yarayn 10 sano, haddii xabsi daa'in uu ahaa waxaa loogu bedelayaa 6 ilaa 20 sano oo xarig ah, ciqaabta kale wxaa la dhimayaa 3 meelood meel ama kala bar.

od.35aad XCCQS, Xaaladda hujuunka sida uu u yaqaano Xeerka c.c.q.s:- waxaa loogu magacdaraa ajuunka dilka, iskuday dilka, dil kas dhaaf ah, dhaawaca iyo gacan ka hadal dhaqaala dareynta ee ka maada iskuday kasta oo loo isticmaalo hub.

od.36aad, XCCQS, Arrimaha lagama maarmaanka ah ee ciidamada:- loo ciqaabi maayo askariga adduu ku gala falka xaalad dembi iyadoo ay khasab ku noqtay si uu u hor istaago shoobare, cinqilaab, urburin iyo boob sababahaan dartood asagoo ilaalinaya amaanka goobta markabka iyo diyaaradaha.

od.37aad XCCQS, ARIMO kama ah, marka xaaladi ku timaado arimaha ku xusan qodobka 32,33,34 axay reebaysaa ciqaabta u dambaysa ee qodobka 36aad, waxaana loo raacayaa kama ahaan, ayadoo la adidayo sharciga, amaradda madaxda sare ama awoodda dowladda ee bixisay amarkaas taasoo enaysa dembi kama ah sida uu qabo sharciga ama qod.37aad XCG.

Qod.38aad XCCQS, CIQAABTA ISKUDAY DILKA AH:-

(a) Dembiilaha geysta iskuday dil, waxaa lagu ciqaabayaa 20 sano ilaa 30 sano xabsi ah, haddii uu qaanuunku xadidayo ciqaab dil ah iyo derejo ka qaadis.
(b) Waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo aan ka yarayn 15 sano, haddii ciqaabtiisu ahayd dil toogasho ah ee xabadka loogu fuliyo
(c) Xabsi aan ka yarayn 12 sano, haddii dembigu keenaayey xabsi daa'in

(1) Arimaha kale ciqaabteedu waxay noqonaysaa mid laga dhimayo 3 meelood ama laba meelood meel ahaan sida uu qabo (qod.123 XCS).

CAPO II

Qod. 39aad. XCCQS, Xaaladaha cusleeya dembiga ciidamada qalabka Sida:-

Xaaladaha Cusleeya Dembiga Guud oo ku xusan xeerka ciqaabta qod.39 x.c.s, waxaa dembiga ciidamada cusleeya marka ay soo baxaan culeyso gaar ah, sida xaaladaha soo socoda:-

(a) Inuu falka u sameeyey mar ay soo wajahaday khatar uu isaga difaacayo waajib sharci ah oo isaga saaran sida ku xusan qod.36 X.C.S.

(b) Asagoo askariga dembiilaha ah uu huwaday derejo uusan lahayn ama uu bixiyey amar uusan awood u lahayn.

(c) Haduu ku galay dembiga hubka ciidanka markuu shaqo ciidan ku jiray markab dushiisa ama diyaarad.

(d) Hadduu falka ku galay 3 ama ka badan ciidan ah hortood, taasoo ay ka dhalatay goobta ama ka kici kartay qas iyo qalaanqal.

(e) Hadduu askarigu dembiga ku galay wadanka dibadiisa 4/2 asagoo hawl u joogay weliba lebisnaa dharka ciidamada.

Qod.40aad XCCQS, Xaaladaha dembiga fududeeya:- 1- ee guud ee ku xusan qod.40 x.c. marka laga reebo qodobka soo socda oo fududeeya xaaladaha gaarka ah ee soo socda:-

(a) Haddii uu dembigu ku galay asagoo waajib ciidan gudanaya.

(b) Haddii dembigu galay asagoo aan shaqada ciidanka hayn 30 maalmood in ka badan, taasoo noqonaysa mid ka reebaysa dembi ciidan.

(c) Haddii uu dembigu ku galay si aysan la dhacsanayn madaxdiisa asagoo waajib gudanaayay.

(2) ciqaabta waa la dhimayaa haddii dembiiluhu yahay askari aqlaaq wanaagsan ama bilad leh.

d.41aad, CXCCQS, Daandaansi:- haddii askarigu falka ku galo caro darteed iyadoo ay ka hor timid alad sharci darro ah oo dhibtay qod 40/p xcs waxay noqonaysaa xaaladaha dhimista ciqaabta marka raaco sharciga qod.160,149,388 X.C.

d.42aad, XCCQS, Kordhinta ciqaabta x.c.c.q.s:- marka ay jirto hal xaalad oo dembiga cusleeya, rka ay jirto xaaladaha dembiga cusleeya iyo kordhinta ciqaabta sharcigu ma cadaynaayo xaaladahaan kale, waxaa la eegayaa 3/1 kordhin, ciqaabta dilka ah derejadana laga qaadayo waxay beddelaysaa aabta 20 ilaa30 sano xarig ah ee ciqaabtu ay ahayd in lagu xukumo fal dembiyeedkaas waxaa la mid ciqaabta xariga ku meel gaarka ah ee la dabaqayo si raadku ugu dhasho kordhinta kama badnaan rto 30 sano

d.43aad, XCCQS, Hoos u dhigista ciqaabta marka ay jirto xaalad dembiga fududeeya, yareynta aabta ama hoos u dhigida ciqaabta sharcigu ma qeexayo, laakiin waxaa la raacayaa qodobada soo da:-

(a) Dembiga dilka ah oo ay la socoto derejo ka qaadista waxaa lagu beddelayaa 20 ilaa 30 sano xarig ah.

(b) Dembiga dilka ah xabadka loogu dhufanayo rasaasta waxaa loogu beddelayaa xarig meleteri 20 ilaa 30 sano ah.

(c) dembiga ciqaabta xabsi daa'inka ah waxaa lagu beddelayaa xarig 20 ilaa 24 sano ah.

(d) Ciqaabta kale waxaa lagu dhimayaa cabir aan dhaafi Karin 3/1 sano.

d.44aad, XCCQS, Xadka uu yeelanayo kordhinta ama hoos u dhigista ciqaabta marka ay jiraan xaalado badan oo kordhin lagama yarayn karo:-

1- Marka ay jiraan xaalado badan oo kordhin kara ama yarayn kara si loo qeexo xadka kordhinta, ama hoos u dhigida ciqaabta waxaa la dabaqayaa qodobada xeerka ciqaabta guud.
2- Ciqaabta meleteriga ee la dabaqayo raadadka ka dhasha kordhin ma dhaafi karaan 30 sano xarig ah.

(a) 15 sano xarig ah, haddii dembigaasi sharcigu uu u dejiyey ciqaabta dilka ah oo ay la socotay derejo ka qaadista.

(b) 15 sano oo xarig meleteri ah, haddii dembigaasi sharcigu uu ku xukumaayo ciqaabtiisuna tahay mid dil ah fulintuna tahay xabadka in rasaas looga dhufto

## Madaxa III 3aad

d.45aad, XCCQS, Dembiyo kala gedisan:- dembiilaha gala falal badan oo midkood keeni kara ciqaab ah oo in xabadka laga toogto ah derejadana laga qaado, waa dil toogasho ah iyo derejada oo laga ado, kuwa kalena waa la joojinayaa.

Qod.46aad, XCCQS, Gelid dembiyo xabsi daa'in ah:- dembiilaha geystay dembiyo mid kasta uu keenayo xabsi daa'in, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in iyo xabsi sheelo maalintii ah oo aan ka yarayn 1 sano kana badnayn 5 sano.

Qod.47aad, XCCQS, wada gelid dembi iyo xarig muhiim ah oo ciidan:- marka la wada galo dembiyo ciqaabtoodu ay tahay xarig, waxaa raacaya hal meel xarig jamaciisu yahay sida soo socota:-

(a) Haddii xukunku yahay mid keenaya derejo ka qaadis, waxaa lagu kordhinayaa inta lagu xukumay oo waqti ah xarig la mid ah oo ciidan oo la xiriira dembiyadii uu galay.

(b) Haddii xukunku uusan keeneyn derejo ka qaadis, waxaa xariga loo raacinayaa inta lagu xukumay in la mid ah dembiyada uu galay aawadeed.

Qod.48, XCCQS, Qiyaasta lagu siyaadin karo ciqaabta hadii dembiyo badan la galo:- ciqaabta la saarayo waa mida qodobka hore iyo mida ku xusan qod.133 xc lagama sara marin karo 4/1 dembiyada ugu culus oo la wada galay, waxayna noqon karaan kuwa keenaya 30 sano xarig ah iyo mid ciidan.

CAPO IV

Qod.49aad, xccqs, Dembi caadayste:- dembi caadeystenimada iyo mida ciidanka, garsooruhu hadduusan arag wax ka duwan dembiyaduna isku mid yihiin wuxuu awood u leeyahay inuu ka dhaafo dembi caadaystenimada ka muuqata xeerka ciqaabta guud marka laga hadlayo si gaar ah dembi ciidan.

Qod.50aad, XCCQS, Xaaladaha cusleeya dembiga:-

(1) Marka ay dembigu dad badan oo ciidamada ah galaan, ciqaabta la saari lahaa waa la kordhinayaa, haddii ay ku timaado xaaladaha ku xusan qodobada 72-73 iyo qaybta 2aad qod. 74xccqs, haddii uu dembiga la galay nin sare mid ka darajo hooseeya.

(2) Xukunkaas ciqaabtiisa xariga ah, waxaa raacaya derejo ka dhigis midka sare kaasoo wajahaysa ka dhimis derejo uu watay.

Qod.51aad, XCCQS, Xaaladaha dembiga fududeeya ciqaabta la saarayo ee ciidan, waxay noqon kartaa mid la dhimay:-

(a) Haddii qofka derejada hoose leh uu ku riixay dembiga mid ka sareeya.

(b) Haddii askarigu fulinta dembigaas wax micno lahayn uu ku lahaa sida ku xusan qodobka kore.

TITOLO V

Qod.52aad, XCCQS, Xabsi ku haynta ku meel gaarka ah ee asluubeed:- waxay u dhigantaa xarig ku meel gaar ah, xabsi ku haynta loo amray hab asluubeed ee madaxda ciidanka iyadoo qofku dacwad ku socoto, ciqaabteeda waxay la mid tahay xabsi ku hayn loo aqoonsanayo inuu xirnaa inta aan lagu dhawaaqin xukunkiisa dhamaaday.

Qod.53aad, xccqs, Daalinta fulinta xukunada ciidamada ee xariga ah oo lagu fuliyo goobaha ciidamada:-

(1) Ilaalinta xukunada ciidan ee xariga ah, waxaa masuul ka ah Xeer iaalinta ciidamada qalabka sida.

(2) Xeerka ciidamada ee lagu soo saaray Dekereeto Madaxweyne, waxay tilmaamaysaa goobaha ciidan ee xukunada lagu fulinayo iyo qaabka loo fulinayo ciqaabta ciidan ee xariga ah iyo sida loo ilaanayo.

Qod.54aad, XCCQS, Fulinta xukunada guud ee la saaro ciidamada qalabka sida ee shaqeeya:- fulinta xukunada ciqaabta ee la saaro ciidamada C.Q.S. shaqada haya oo la xiriira xeerka Ciqaabta guud, waxaa loo raacinayaa sida soo socota:-

(a) Ciqaabta dilka ah, waxaa loo fulinayaa dhabar ka toogasho iyadoo derejada laga qaadayo.

(b) ciqaabta xabsi daa'inka ah iyo xariga keenaya in laga mabnuuco hawlaha bulshada, waxaa loo fulinayaa si guud derejo ka qaadis xukunsanaha iyadoo la raacayo xeerarka qaanuunka ciidamada.

(c) ciqaabta xariga ah oo aan keenaynin ka mabnuucida hawlaha bulshada, waxaa loogu beddelayaa xarig ciidan oo la mid ah, xitaa haddii uu ka yar yahay 1 bil.

(d) ciqaabta ganaaxa ah oo raacda xukunada, waxaa lagu beddelayaa xabsi ciidan oo aan ka badnaan karin 3 sano iyadoo maalintii loogu dhufanayo 25 shilin soomaali ah lacagta ganaaxa ah.

(e) Ciqaabta xariga ah, waxaa lagu beddelayaa xabsi ciidan oo u dhigma 1 maalin 2dii maalmoodba.

(f) Qasiraada ciqaabta ah, waxaa lagu beddelayaa marka ay xukunka raacdo xabsi ciidan oo aan 1 sano ka badnayn iyadoo maalintiiba loogu dhufanayo 25 shilin.

Qod. 55aad. XCCQS, Fulinta xukunada ciqaabeed ee ciidamada oo ku dhacda dad aan ciidanka ka mid ahayn ama kuwa lumiyey ciidanimada, laakiin hayey hawl Ciidan.

1- Sida ku xusan qodobka 13aad XCCQS ee fulinta Xukunada Ciidammada waxaa loo dhawrayaa sida soo socota.

(a) Ciqaabta dilka ah, waxaa loo raacayaa sida u qoraayo qod.19 xccqs.

(b) Ciqaabta xariga ah, waxaa loo raacayaa waqtiga xabsigiisa ciidan lagu xukumay.

2- Habkaan xeerka ah, waxaa loo fulinayaa xukun ciidan xataa qofku hadduu ka tagay ciidamada, kuwa ciidan ahaan u dhisan oo hay'adaha shibilka ah oo ciidan ahaan u habaysan iyo qof kasta oo banaanka ka ah ciidamada Q.S.

TIITOLO VI

Qod.56aad, Xccqs,

1- Qodobada xeerka ciqaabta ee ku saabsan baabi'inta ciqaabta dembiga iyo ciqaabta sida lagu dabaqayo anmaha ku saabsan ciqaabta meleteriga waxaa loo eegayaa ciqaabta xataa dunuubaha meleteriga, waxaa loo adeegsanayaa is bedelka ku qoran qodobada soo socda.

2- Raadadka ka dhashay ee lagu tilmaamay farqada la soo dhaafay ciqaabaha dhimashada ee lagu xusay shuruucda ciqaabta c.q.s. iyo ciqaabaha xariga meleteriga iyo ciqaabaha dembiyada xabsiga meleteriga, waxaa cabir looga qaadanayaa dunuubta ciqaabaha dilka ah iyo ciqaabaha xariga ah ee ku qeexan xeerka guud ee soomaaliyeed.

Qod.57aad, xccqs, Laalida Shuruudaha ku xiran ee ciqaabta:-

Laalida shuruudeed ee ciqaabta waxay ka istaagaysaa ama laga joojinayaa ciqaabaha meleteriga ee soo raaca shaqada in laga laalo, micinaha inuu dib ugu laabto shaqadiisii iyo derejadiisii uu ciidamada ku lahaa.

Qod.58aad, xccqs, Xoriyad u celin shuruud ku xiran tahay:-

(1) Kan ku xukuman ciqaab meleteri oo xarig ah xilli ka badan 3 sano, kaasoo tirsaday dhamaystay ciqaabtii uu ku xukunaa kala bar ama 3 marka loo qaybiyo 4 meelood, haddii uu yahay caadeyste dembi xaaladkasta oo aan ka yarayn 3 sano, kaasoo muujiyey si joogto ah aqlaaq wanaagsan waa loo ogolaan karaa si sharuud ku xiran tahay in xoriyadiis loo celiyo haddii ciqaabta u hartay aysan ka badnayn 3 sano.

(2) Raadadka ka dhasha dib ula noqoshada xoriyad u celinta shuruuda ku xiran, waxaa nadaaminaya qawaaniinta guud ciqaabta.

Qod.59aad, Xccqs:-

(1) Dib u soo noolaynta awaamiirta qodobada qawaaniinta guud wax dhib ah uma geysanayso in derejada loo daayo xukunsanaha dhamaystay ciqaabta.

(2) Marka loo fiiriyo qodobada qawaaniinta ciqaabta guud qofka Booskiisa lagu celiyo, sharciga meleteriga ee soo raaca raadkasta oo ciqaab meleteri ah, waxay la baaba'aysaa dib u soo noolaynta loo sameeyey habkii uu ugu talo galay shuruudaha ciqaabta meleteriga.

(3) Xukunada dib u soo nooleynta ee la bixiyey sida ku xusan qodobka la soo dhaafay, waxaa dib looga noqon karaa si sharci ah xaaladaha ku xusan qodobka 154 ee Xcg.

Qod.60aad, Xccqs, Raadka ka dhalanaya cafiska ciqaabaha meleteriga iyo shaqo ku celinta c.q.s xiriirna la leh weynta ka dhalata xubinnimada c.q.s:-

(1) Marka laga reebo haddii dekereetada si kale u tilmaamayso, cafinta la cafinaayo ma u soo çelınayso derajadıı uu ku waayey raad ka dhashay xukunkii la xukumay.

(2) Marka laga reebo haddii aan sharcigu si kale u tilmaamin dib u soo celinta hawsha ciidanka raadka ka dhashay xukunka.

TITOLO VII

od.61aad, xccqs, Qaanuunka guud ee maamulka amniga:-

(1) Amarada sharciga ciqaabta guud oo la xiriira hab maamulka oo la xiriira nabadgelyada, waxaa la dhowrayaa xataa xeerka ciqaabta ciidamada, wixii ka baxsan arimaha soo socoda.

(2) Sida ka muuqata qaybta hore ciqaabta dilka ah ee ku timaada xeerarka c.q.s. iyo kuwa xariga ciidan ah, waxay la mid noqonayaan 2duba ciqaabta dilka ah iyo mida xariga ee uu qoraayo xeerka ciqaabta.

od.62aad, xccqs, Diidid deganaansho:-

ofka lagu xukumay dembiga lidka ku ah qayaano qaran difaaca dalka, waxaa loo diidi karaa inuu ganaado degmooyinka ama gobolada, garsooraha ku tilmaamay xukunkiisa iyadoo la raacayo xeerk qaabta guud.

od.63aad, xccqs, Hakinta fulinta Talaabooyinka Amniga :-

(1) Mudada shaqada ciidamada waa la laalayaa talaabooyinka amniga amarada fulinta x.c.guud iyo mida xeerka ciidamada, haddiise qofka xaaladiisu aysan ku sugnayn goob caafimaad ama xabsi waali ama meel si gaar ah loogu daaweeyo amaba aan asaga lala wareegin.

(3) Xukunada dib u soo nooleynta ee la bixiyey sida ku xusan qodobka la soo dhaafay, waxaa dib looga noqon karaa si sharci ah xaaladaha ku xusan qodobka 154 ee Xcg.

Qod.60aad, Xccqs, Raadka ka dhalanaya cafiska ciqaabaha meleteriga iyo shaqo ku celinta c.q.s xiriirna la leh weynta ka dhalata xubinnimada c.q.s:-

(1) Marka laga reebo haddii dekereetada si kale u tilmaamayso, cafinta la cafinaayo ma u soo çelinayso derajadii uu ku waayey raad ka dhashay xukunkii la xukumay.

(2) Marka laga reebo haddii aan sharcigu si kale u tilmaamin dib u soo celinta hawsha ciidanka raadka ka dhashay xukunka.

TITOLO VII

od.61aad, xccqs, Qaanuunka guud ee maamulka amniga:-

(1) Amarada sharciga ciqaabta guud oo la xiriira hab maamulka oo la xiriira nabadgelyada, waxaa la dhowrayaa xataa xeerka ciqaabta ciidamada, wixii ka baxsan arimaha soo socoda.

(2) Sida ka muuqata qaybta hore ciqaabta dilka ah ee ku timaada xeerarka c.q.s. iyo kuwa xariga ciidan ah, waxay la mid noqonayaan 2duba ciqaabta dilka ah iyo mida xariga ee uu qoraayo xeerka ciqaabta.

od.62aad, xccqs, Diidid deganaansho:-

ofka lagu xukumay dembiga lidka ku ah qayaano qaran difaaca dalka, waxaa loo diidi karaa inuu ganaado degmooyinka ama gobolada, garsooraha ku tilmaamay xukunkiisa iyadoo la raacayo xeerk qaabta guud.

od.63aad, xccqs, Hakinta fulinta Talaabooyinka Amniga :-

(1) Mudada shaqada ciidamada waa la laalayaa talaabooyinka amniga amarada fulinta x.c.guud iyo mida xeerka ciidamada, haddiise qofka xaaladiisu aysan ku sugnayn goob caafimaad ama xabsi waali ama meel si gaar ah loogu daaweeyo amaba aan asaga lala wareegin.

LIPARO 2

Dembiyada gaarka ah ee ciidamada

Titolo 1

Dembiyada lidka ku ah qaranimada difaaca ciidanka

CAPO 1

Qaran dumis

Qod.64aad, xccqs, Qaran Dumisnimo weyn:-

(1) Qofka ciidanka ah ee ku kaca dembiyada lidka ku ah qaranka soomaaliyeed ee ku xusan qododobada 184-217-218-222-225 ee x.c, waxaa lagu ciqaabayaa sida ay qorayaan qodobadaas sharciga. waxaana loo raacinayaa ciqaabta dilka ah derejo ka qaadid iyo ciqaab dil ah. ama xabsi daa'in ciqaabta xariga ah, waxaa loogu kordhinayaa 3/1.

(2) Waxaa lagu ciqaabayaa dil, derejo ka qaadid ciidan, qofkii gala dembiyada ku xusan qod.185-221 x.c keliya marka uu qiyaaneeyo ciidanka ama dowladda uu hub kala soo horjeesta, ama uu ka mid noqdo kooxo hubaysan oo dowladda hub kala soo horjeesta.

Qod.65aad, XCCQS, Ku dhiiri gelin qiyaano Qaran iyo ka mid ahaansho kooxo hubaysan:- waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta iyadoo lagu kordhinaayo ciqaabta xariga ah 1/1 ama 2/1.

(a) Askariga gala inuu dhiiri geliyo ama ku biira si uu uga soo qayb noqdo dembiyada ku xusan qodobka hore.

(b) Askariga gala dembiyada ku xusan qodobka hore, dhaqdhaqaajiya, abaabula ama abuura kooxo hubaysan ama ka mid noqda.

Qod.66aad. XCCQS, Aflagaado Madaxweyne:- Askariga Aflagaadeeya sharafta Madaxweynaha iyo Dowladdiisa, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xarig ah ilaa 15 sano xarig ah.

Qod.67aad, xccqs, Aflagaado Qaranka soomaaliyeed:-
Askariga si cad u aflagaadeeya Qaranimada iyo dowladnimada soomaaliyeed, calanka, calaamada qaranka, hay'adaha qaranka iyo ciidamada qalabka sida, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo gaaraya 2 ilaa 7 sano.

Qod.68aad, XCCQS, U basaasid Dowladdo Shisheeye:-

(1) Askarikasta ee u basaasa hay'ado ajanabi ah waqtiga Dagaalka ay kula jiraan Dalka soomaaliya isagoo la xiriira ciidamo shisheeye, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo aan ka yarayn 15 sano.

(2) haddii balan qaadka hawsha uu jiro aqbalaadiisa, laakiin aanu aqbalin la shaqayntooda, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 10 sano.

Qod.69aad, xccqs, Qaadasho, Baabi'in, Been abuurid, Xadid, Dukumiinti ama wax la xiriira ciidanka oo ku saabsan difaaca ciidanka qaranka:-

Askariga kuligeed ama qayb ka mid ah qaata, burburiya, been abuura, xadda, lumiya dukumiinti muddo gaaban, ama wax kale oo ku saabsan ciidanka lana xiriira ku tala galka difaaca ciidanka Qaranka oo ahaan lahayd sir ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 10 sano.

(1) hadii arintaasi ay wax u dhimayso difaac Ciidanka, Qaranka, waxaa lagu ciqaabayaa Dil iyo derejada in laga qaado.

CAPO 2

Qod.70aad, xccqs, Soo bandhigid sir ciidan sababo basaasnimo awgeed:- Askariga faafiya oo u gudbiya Dowlad cadow ah xaaladaha ciidanka iyo difaaca Qaranka oo ahaan lahaa sir, waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derajada oo laga qaado.

Qod.71aad, xccqs, U Heshiin ciidan in ay sameeyaan faafin sirta c.q.s. Sababo basaasid aawadeed:-

(1) Haddii 2 ama ka badan ciidan ah ay isku raacaan in ay galaan dembiyada ku xusan qodobka hore midkastoo iyaga ka mid ah. waxaa lagu ciqaabayaa haduusan dembigu dhicin xarig gaaraya 5 sano ilaa 15 sano.

(2) Madaxda abaabusha kuwa isku duway, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka yarayn 15 sano.

Qod 72aad, xccqs, Gudbin war sir ah sababo Basaasnimo ah awgeed.:-

(1) Askariga u gudbiya dowlad cadow ah xaaladaha ciidanka la xiriira ama difaaca Qaranka oo ahaan lahaa sir, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 20 sano.

(2) haddii ay fusho arintaasi oo la xiirta difaaca ciidamada Qaranka Soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis.

Qod.73aad, xccqs, Gudbin arimo sir ah iyadoo aan loola jeedin sababo jaajuusnimo.:-

(1) Askariga faafiya amar la,aan xaaladaha ku xusan qodobka hore asagoo aan amar ka haysan Madaxda awoodda u leh ee ururiya arimahaas, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 10 sano xarig ah.

(2) Haddii talaabooyinkaas sare ku xusan waxyeelo uga timaada difaaca Qaranka ee ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano xarig ah.

Qod.74aad xccqs, Basaasid Xeryaha Ciidamada Gelid sharci darro ah, sawirasho, dhexgelid goobaha ciidamada sababo Basaasnimo awgeed:-

(1) waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 5 ilaa 10 sano.

(a) Sabab la'aan ku gala asagoo aan fasax haysan sawir ka sameeya (arts) ka sameeyo (Iskidsia )oo la xiriira xeryaha ciidamada oo la xiriira dhinaca difaaca Ciidanka.

(b) Qofkii gala arimaha ku qoran qaybta (a) si uu u helo war ku saabsan xaalado ciidan si qiyaana ahna ugu gudbo goobaha dhulka ciidan, biyaha iyo hawada kuwaas oo mabnuuc ka ah in lagu xadgudbo sababo ciidan Qaran darteed.

(c) Ruuxa lagu qabto goobaha asagoo haysta sabab la'aan qalab lagu fulin karo arimaha ku qoran xarafka (a).

(d) qofka lagu qabto sharci la'aan waraaqo, qoraalo, sawiro gacameedyo ,maab iyo aalado wax lagu sawiro iyo waxkasta oo la xiriira xoogga diyaargarowga ciidanka Qaranka.

(2) Gelida sharci darada ah ama qiyaanada ah ee goobahaas Ciidan, Askarigii gala waxaa lagu ciqabayaa 2 ilaa 5 sano xarig ah.

(3) Arimaha ka duwan xaladahaas askariga, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ah asagoo galay oo keliya iyadoo aan baahi jirin ama aan fasax u haysan goobahaas oo loo mabnuucay sabaha ciidanka Qaranka darteed.

Qod.75aad. Xccqs, Faafin Xaalado sir ah, iyadoo aan loola jeedin Basaasnimo:-

(1) Marka laga soo tago qod.70aad Askariga faafiya xaalado la xiriira ciidanka hawlgalkiisa ama difaaciisa oo sharci ahaan sir ahaa , waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo aan ka yarayn 5 sano.

(2) Haddii xaaladaasi ay ka shifanto hawlgalka difaaca ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 20 sano.

(3) Haddii xaaladu u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqabayaa 6 bil ilaa 2 sano xabsi ciidan ah, xaaladaha qaybta 1aad, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano ilaa 15 sano xaaladaha ku xusan qaybta 2aad

## Xaaladaha dembiyada cusleeya

Qod.76aad. Xccqs, Dembiilaha ku kaca arimaha ku xusan qodobka hore xafiis ahaan ama shaqo ahaan ee faafiya xaaladaha sababkasta ha u faafiyee ciqaabtiisa waa la kordhinayaa.

Qod.77aad. Xccqs, Faafin arimo Qarsoodi ah:- sida ku xusan qodobada aan hore u soo marnay iyo xaaladaha ku xusan isla qodobadaas oo la xiriira arimaha qarsoodiga ah, loona baahnaa in la dhowro kana reeban hay'adaha awooda u leh, waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis, waxaana lagu bedeli karaa xarig aan ka yarayn 20 sano oo laga dhimi karo3/1.

Qod.78aad. Xccqs, Faafin Aimo aan qarsoodi ahayn:- Askariga faafiya ama warbixin ka siiya daladdo shisheeye xaaladda ciidanka Qaranka diyaar garowgiisa difaaca ciidanka oo ka duwan wax yaabihii qarsoodiga ahaa, waxaa lagu ciqaabayaa haadii aan arintaas aanay ka dhalan dhaawac soo gaara abaabulka ama difaaca ciidanka xarig ciidan oo dhan 5 sano.

Qod.79aad. Xccqs, Askariga haya arimaha sirta ah ee lagu soo sheegay qodobada hore, waxaa lagu ciqaabayaa sida ku xusan qodobada sare haddii sirta uu hayey ka baxsato ama faafto.

Qod.80aad. Xccqs, Gacansiin Dowladda Soomaaliyeed:- Arimaha ku xusan qodobada sare ma reebayso ciqaabta haddii eedaysanaha doonayo inuu gacan ku siiyo dowladda soomaaliyeed arimahaas si uu sumcadeeda kor ugu qaado, laakiin ciqaabtu waa la dhimayaa.

Qod. 81aad. Xccqs, U fududeyn kama ah:-

(1) Askartiga sababa shaqo ama xafiis uu hayey shay ama dukumiinti la doonayey in la xafido ama goobo ciidan oo la ilaalinaayey, suurageliyey kama ahaan in la soo fuliyo arimaha ku xusan qodobada 69,70aad,73,74,75 iyo 77, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xabsi ah (202 CP).

(2) Haddii arimaha sare ku xusan ay ka soo gaarto wax yeelo difaaca ciidanka iyo ku talo galkiisa, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 15 sano xarig ah.

Qod.82aad. Xccqs, Dhiirigelin ama balan qaadid:- Askariga ku dhiiri geliya kuwa kale in ay galaan dembiyada ku xusan qodobada 68- 75 ama wax uun u balan qaada si dembiyada loo galo, waxaa lagu ciqaabayaa haduusan fulin kicintaas iyo balan qaadkaas lana aqbalin, haddii la aqbalase balan qaadka iyo kicinta, laakiin uusan falku dhicin:-

(a) Waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano ilaa 12 sano xarig ah, haddii dembigaasi keenayo Ddil & derejo ka qaadid.

(b) Qaybaha kale waxaa loo raacayaa qodobka uu galay sida uu yahay oo laga dhimayo 2/1 ama 2/1.

Qod.83aad. Xccqs, Qoraal kula xiriirid dowlad shisheeye sababo basaasnimo ciidan awgeed:- Askariga la yeesha xiriir qoraaleed dowlad shisheeye si loo fuliyo falka ku xusan qod.67-70-71-72- xccqs ee dhaqdhaqaajiya hawlahaas, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka yarayn 10 sano.

Qod.84aad. Xccqs, War-Gelin La'aan:-

(1) Askariga ogaada xaaladaha ku xusan qodobada aan soo sheegnay ee ciqaabteeda ciidan ay gaarayso mid aan ka yarayn 5 sano ama wax ka sii culus oo ciqaab ah oo aan si degdeg ah u soo war-gelin madaxdiisa, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan 3 bilood ilaa 2 sano.

(2) Hadduu Ssarkaal yahay dembiiluhu waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 3 sano.

Qod.85aad. Xccqs, La Xiriirid dowlad aan saaxiib nahay:- ciqaabta ku xusan qod.68aad waxaa loo raacayaa dembiga haddii lala galo dowlad aan saxiib nahay oo is bahaysi dagaal naga dhaxeeyo.

Qod.86aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga fududeeya:- ciqaabaadka ku xusan dembiyada lagu soo cadeeyey qaybtaan iyo qaybihii ka horeeyey ciqaabtooda waa la dhimayaa, iyadoo loo eegayo sida xaaladu tahay iyo nooca ay yihiin.iyo qaabka ay u dhaceen ficiladooda, khasaaraha ay dhaliyeen ama khatarka ka timid haddii ay tahay mid yar.

TITOLO II

Qod.87aad. Xccqs, Ficil Hujuunid ah ee Dowlad Shisheeye:-

(1) Taliyaha amar la'aan Dowladiisa, iyadoo aan baahiyu jirin, weerara Dowlad shisheeye, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 3 sano.

(2) Haddii weerarada uu dhib ku soo gaaro Dowladda Soomaaliyeed ama dad muwaadiniin ah oo dhulkaas deggan oo khatari uga timaada aar gudasho ah xarigu wuxuu noqon karaa 2 sano ilaa 8 sano, haddii cilaaqaadka diblomaasiga ah uu gooyo ama weerar uga yimaado wadanka, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo gaaraya 5 ilaa 10 sano.

(3) Ficiladaas haddii ay ka dhalato khatar dagaal, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo 10 sano ah.

(4) Haddii ficiladaas uu dagaal ka yimaado, dagaalkaasna keeno gubasho iyo soo gelid dalka dhimasho qof ama dad badan, waxaa lagu ciqaabayaa dil xabadka laga tooganayo.

Qod.88aad. Xccqs, Fal kama ah:- Arimaha ku xusan qodkii hore haddii taliyaha ciidanku si kama ah wax ugu dhacaan hawlihii loo fasaxay ama baahiyu keentay ciqaabta dilka ah, waxaa lagu beddelayaa xarig ciidan oo dhan 5 sano, ciqaabaadka kale waxaa la dhimayaa 1/2 ama 2 maaleed meel.

Qod.89aad. Xccqs, Lumin Ama Qabsasho Markab Ama Diyaarad Ciidammada:-

(1) Taliyaha ciidanka maraakiibta ama dayuuradaha oo lumiya ama laga qabsado 1 Marakab ama 1 Diyaarad ama in ka badan oo asaga hoos yimaada, waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejada oo laga qaado.

(2) ciqaabta waxaa kaloo la saarayaa

(a) Taliyaha lumiya Markab ama Diyaarad u hareeraysan.

(b) cidkasta oo ciidanka ka mid ah oo falkaas lug ku yeelata, waxaa loo raacayaa isla ciqaabtaas.

(3) Haddii ay jiraan arimo gaar ah iyo xaalado fududeeya dembiga, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 7 sano.

qod. 90aad. Xccqs, Lumin Kama ah, Qabsasho kama ah Markab ama Diyaarad:-

(1) Arimaha ku xusan qodobka hore haday u dhacaan sababo kama ah, taliyaha ciidanka Markabka, sabab ciidan kale ka timid aawadeed kuwaa oo markabka la qabsaday saamaa ama midka lumay, waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano xarig ah.

(2) Haddii arimaha ku xusan qaybta hore ay yeeshaan xaalado fududeeya dembiga mas'uuliyada waxaa lagu ciqaabay xarig ciidan oo dhan 5 sano.

(3) Isla qaybtaas waxaa mutaysanaya Taliyaha ciidamada dayuuradaha oo gudan waayey hawshiisa ama cid kale oo la saran ay gudan waysay hawsheeda sababo ka yimid caajisnimo, taxdarxumo, dhowris la'aan sharciga, qaanuunka amarada iyo asluubta ee gala arimaha ku xusan qodobka sare.

Qod. 91aad. Xccqs, Khasaareyn ama Dhaawacid Markab ama Dayaarad:-

(1) Taliyaha Markab khasaariya ama dhib gaarsiiya qalabka iyo Taliyaha Dayaarada oo sidaas oo kale sameeya, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 8 sano, haddii ay ka dhashaan baaba'a Markab ama dayaarad, waxaa la xirayaa xabsi dhan 15 sano.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofkasta oo ciidanka ka mid ah oo khasaaro gaarsiiya Markab ama dayaarad uu saran yahay.

(3) Haddii ay yimaadaan xaaladaha fududeeya dembiga ee dembiilaha, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 5 sano.

Qod.92aad. Xccqs, Khasaareyn burburin kama ah oo ku timaada Markab ama dayaarad ciidan:-

(1) Marka ay timaado xaaladaas qodobka hore sabab kama ah awgeed, taliyaha markabka ama ciidankiisa qof ka mid ah, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano xabsi ah.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa yeelanaya taliyaha diyaarada ama qof ka mid ah ciidamadiisa saran, haddii ay ku kacaan caajisnimo, taxadarnimo xumo, dhowris la'aan sharciga, xeerka, amarada iyo asluubta sida ku xusan qodkii hore.

Qod.93aad. Xccqs, U fududeyn kama ah:- haddii ay u dhacaan xaaladaha ku xusan qod.89-91 xccqs oo si kama ahaan loogu fududeeyay, askariga ka masuiulka ah ilaalinta iyo xafidaada arimaha kor lagu soo sheegay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 ilaa 5 sano.

Qod.94aad. Xccqs, Waajib gudasho la'aan iyo keenid khasaaraha gubashada ama burburka:-

1- Taliyaha xarun ciidan, markab, diyaarad ama noockasta oo dhismo ah dab ka kacay goobahaas ama burburid, khuusid iyo waxkasta oo khasaare keeni kara oo aan ku dhaqaaqin inuu yareeyo khasaaraha ama badbaadiyo goobta, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xabsi ah.

Qod.95aad. Xccqs, Ka tegid ama iska dhaafid Taliye, Xaalad khatar ah:-

(1) Taliyaha waqti kasta oo khatari jirto cudur daar la'aan ka taga hoggaamintiisa ama iska dhaqaaqa, waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano xarig ah.

(2) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod.96aad. Xccqs, Ku xadgub waajibka taliyaha noqon lahaa kan ugu dambeeya oo goobta ka taga, dayaarada ama markabka waqtiga halistu timaado:-

(1) Taliyaha waqtiga khatarta ah ama khasaaraynta markabka, dayaarada ama goobta lagu aaminay madaxnimadiisa oo aan noqon kan ugu dambeeya ee goobta ka taga markabka ama dayaarada, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 sano.

(2) haddii ay suurtagal ahayd inuu badbaadiyo markabka ama dayuurada ama goobta, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo aan ka yarayn 15 sano.

(3) Haddii xaaladaas ay ka dhalato dhimasho ku timaada ciidanka hawsha haycy ciqaabtu waxay noqonaysaa Dil toogasho ah xabadka.

(4) Xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadid.

Qod.97aad. Xccqs, U gargaarid la'aan ama gacansiin la'aan waqti khatar ah:-

(1) Taliyaha ciidanka oo sabab la'aan ugu gargaari waaya ama gacan u siin waaya ciidan kale oo u baahnaa wax la qabashadiisa khatarna haysatay, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xabsi ah.

(2) Ciqaabtaasi waxay fuulaysaa oo kale taliyaha markabka ama maraakiibta badan ee ciidan ama hal dayaarad ama diyaarado badan, kaasoo ka gaabiya arimaha ku xusan qaybta hore gacan siin waaya marakab ama dayaarad xataa hadaysan ahayn kuwo qaran asaguna awooday.

(3) Xukunkaas waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod.98aad. Xccqs, Awood maroorsi Taliyenimo:-

(1) Askariga sharci la'aan la wareega taliyenimada, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano ilaa 15 sano xarig ciidan ah.

(2) Taliyaha ka leexda amarada madaxdiisa ciqaabta waa loo kordhinayaa, waxaana loogu darayaa 3/1 ama kala bar.

(3) Haddii xaaladaasi ka dhacdo markab dushiis ama dayaarad ciqaabtu waa la kordhinayaa .

(4) Xaaladaha kale haday la xiriiraan hawlgalo ciidan oo khasaareyn ka timaada ciqaabtiisu waxay noqonaysaa dil toogasho oo xabadka ah.

Qod.99aad. Xccqs, Dhaqaajin ciidan oo sharci darro ah:-

Taliyaha aan haysan fasax gaar ah ama hawl qaas ah oo loo xilsaaray iyadoo aan baahiyu jirin, ciidan dhaqaajiya, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 ilaa 7 sano.

Qod.100aad. Xccqs, Waqti lumin ama furid la'aan goob xiran:-

(1) Taliyaha ciidan ee ku qaba amar inuu furo goob xiran waqti xadidan ee fura waqti ka duwan kii loo qabtay ama furi waaya goobtaas, waxaa lagu ciqaabayaa haddii ay ka timaado hawl xumo shaqadiisaas xarig ciidan oo dhan 5 sano.

(2) Haddii arintaasi kama u dhacdo, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah.

Qod.101aad. Xccqs, Fulin La'aan Amar Khaas ah:-

(1) Taliyaha ciidan oo sabab la'aan fulin waaya hawl loo xil saaray, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xarig ah.

(2) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

(3) Haddii arintaas ay ku dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 sano.

Sezione II

Qod.102aad. Xccqs, Ka Tegid goob, ku xadgub amar, Askariga loo xil saaray shaqo ilaaliye:-

(1) Askariga u xil saarnaa ilaaliye, dhowre ama dhegeyste goob shaqo oo ka taga ama ku xadgudba amarkii la siiyey, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 3 sano xabsi ah.

(2) Xariga ciidan wuxuu noqonayaa 1 sano ilaa 5 sano haddii uu falku u dhaco sida soo socota.

(a) Haddii goobta laga tagay tahay diyaaradaha, maqaasiinada, kaydka hubka, risaasta iyo qalabka wax guba ama miinooyinka.

(b) Haddii ay tahay markab dushiis ama dayaarad iyo meelkasta oo khatar culus ay ka imaan karto.

(c) Si kastaba haddii xaaladaas ay ka timaado khasaaro culus, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 7 sano ilaa 15 sano.

Qod.103aad. Xccqs, Askariga Ilaalada U Taagan Ama Eegmada Ama Dhegeysi Ee Ka Hurda Shaqada:-

(1) Askariga isagoo ilaalo ah ama eege ama dhegeyste ahi waqtiyada lagu soo sheegay qaybta 2aad qodobkii hore iska hurda, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xarig ah.

(2) Haddii arintaas ay ka dhalato khasaaro weyn, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano xarig ciidan ah.

Qod.104aad. Xccqs, Ka tegid goob hawleed, khilaafid askariga waardiyaha ah ama shaqada haya:-

(1) Marka laga soo tago labadii qodob ee hore Askariga ka taga goobta uu ilaaliyaha ka yahay ama uu shaqada ka hayo ama cilaaqa awaamiirtii uu qabay, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xarig ciidan ah.

(2) Hadii dembiiluhu yahay taliyaha qaybta ciidan ama askari loo xil saaray hawl gaar ah, madaxa ilaaliyayaasha ama shaqo ciidan hubaysan ciqaabta waa la kordhinayaa.

Qod. 105aad. Xccqs, Ka tegid ciidan guuraya ama si kama ah uga lunto jahada:-

(1) Taliyaha u xil saamaa inuu la socodo col geedi ah oo ka taga, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 5 sano xabsi ah.

(2) Haddii asagu si kama ah uga leexdo ciidanka oo dhan ama qayb ka mid ah, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano xabsi ah.

Qod. 106aad, xccqs, Ku xadgub amar khaas ah oo askariga ilaalada ah hawl gaar ah loogu cayimay:-

Askariga u xil saamaa ilaalin shay gaar ah oo xadda, dafa, qariya, firdhiya kana dhiga wax aan waxba anfacayn ama qayb ka mid ah isagoo khilaafaya amarkii la siiyey, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 2 sano.

Qod.107aad. Xccqs, Ka maqnaansho goob shaqo:-

Askarjgha cudur daar la'aan ka maqnaada goobta shaqada si uu hawshiisa u guto sida uu yahay amarka ama soo gaari waaya goobta shaqada waqtiyada ay khatartu jirto, waxaa lagu ciqabayaa 6 bilood xabsi ciidan ah.

Qod. 108aad. Xccqs, Ka leexasho qayb ka mid ah ciidanka ama ka maqnaansho kulanka ciidanka:-

(1) Ciidanka socodaalka ah ama shaqo kale haya, taliyaha qayb ka mida ah ciidankaas oo ka leexda qaybtiisa iyadoo dan ka xoog badan ay ku khasabtay ama sabab macquul ah inuu ka leexdo ama la soo fayli waayo qaybtiisii sida ugu dhaqsaha badan, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 3 sano.

(2) Haddii kama ahaan arintaasi u dhacdo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 sano.
(3) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya Askarikasta oo gala falka kor lagu soo sheegay

Qod.109aad. Xccqs, Dhawris la'aan amaro la bixiyey ee ciidan:-

(1) Sarkaalka u xil saran hawlgelid ciidan iyo shaqo gaar ah oo aan dhawrin hawshiisa uu u xilsaarnaa sabab la'aan, waxaa lagu ciqaabayaa haddii ay xumayso faa'idadii laga heli lahaa hawlgalka ama hoggaaminta shaqada ciidan xabsi ciidan oo dhan 3 sano.

(2) Xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadid.

(3) Haddii arintaasi u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 6 bilood.

Qod.110aad. Xccqs, Askariga ilaaliyaha ka ah ee si kama ah ku sii daaya qof xirnaa ama maxbuus:-

(1) Askariga u xil saarnaa ilaalinta xataa hadday tahay ku meel gaar qof xiran ama maxbuus garsuge u ah sharciga ciidanka fal dembi, kaasoo si kama ah u fakiya, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ciidan ah.

Qod.111ad. Xccqs, Faafin sir aqbaar qarsoodiya:-

(1) Haddii aysan xaaladdu ka koobmin mid dembigeedu culus yahay, Askariga faafiya qabar shaqo asluub la xiirarta ciidanka oo uu ku ogaaday xafiiskiisa, shaqadiisa ama si kale taasoo ahaan lahayd sir ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 6 bil ilaa 3 sano.

(2) Qabarku hadduusan sir ahayn, laakiin uu leeyahay qarsoodi oo ay mabnuuceen faafintiisa madaxda awooda u leh, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi 2 sano ah.

(3) Hadii arintu u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 112aad, xccqs, Ku Xadgub, Qarsasho, Gudbin Dukumiinti iyo Faafin waxa ku qoran:-

(1) Askariga si xadgudub ah u fura qaata, been abuura ama aan gudbin qoraal ama boosto noockasta ay tahay oo loo xil saaray inuu geeyo, kaasoo faafiya waxa ku qoran teleefon ahaan raadiyo ahaan taasoo uu ku ogaado hawsha xafiiskiisa, waxaa lagu ciqabayaa xarig ciidan oo dhan 5 sano.

(2) isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya askariga u xil saran isgaarsiinta taararka, raadiyaha iyo teleefonada hadduu koobi ka sameeyo qiyaano ahaan ama wax ka bedela amarkii ku qornaa dukumiintiga shaqada.

(3) Askariga si kama ah u xafidi waaya gaarsiin waaya halkii ay sharci ahaan ku socotay, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano.

Qod.113aad, xccqs, Ku Xadgudub Xadid Dukumiinti Ciidan Ciddii u Xilsaarnayd Boosto Isgaarsiinta Iyo Teleefoonka Ciidanka:-

(1) Askariga u xil saran shaqada boostada taararka iyo teleefoonada asagoo awood maroorsi samaynaya ku xadgudba wax yaabo ku qoran warqadaha xiran ama qalab kale oo xiran xada si uu uga helo faa'iido u gaar ah wax yaabaha xiran dhamaan ama qayb ka mid ah burburiya, baabi'iya, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan sharcigu si kale u sheegin xarig ciidan oo dhan 6 bilood ilaa 3 sano.

(2) Haddii dembiiluhu cudurdaar la'aan faafiyo dhamaan ama qayb ka mid ah waxa ku qoran dukumiintigaas ama xirmooyinka xiran, haddii aan dembi weyn ka dhicin xarig ciidan oo dhan 6 bilood ilaa 5 sano.

(3) Tilmaamaha ku xusan qaybta hore, waxaa lagu ciqaabayaa xataa askariga u xil saran qabashada dukumiintiga hadduu asagu iska furto dukumiintiga kor lagu sheegay ciqaabtaas waa laga dhimayaa.

(4) Tilmaamaha waxaa loola jeedaa waraaqaha boostada, taararka iyo teleefoonada warka la isku gaarsiiyo.

Qod.114aad, xccqs, Faafin wax ku qoran warqadaha isgaarsiinta, askariga qabilsan shaqada boostada, taararka iyo teleefoonada ciidanka:-

(1) Askariga shaqadiisu tahay boostada, taararka, teleefoonada ciidanka oo hela qabar shaqadiisa darteed ku qoran waraaqaha furtana ama telgaraam ama teleefon ku faafiya waxa ku qoran dukumiintigaas sharci la'aan hadduusan ahayn qofka ay u socotay ama u gudbiya ruux ka duwan qofkaas ama asagu dhaxda kala baxa war isgaarsiinta socota, waxaa lagu ciqabayaa xabsi ciidan 6 bilood ilaa 3 sanadood.

Qod. 115aad, xccqs, Xaaladaha dembiga cusleeya:- sida ku xusan 3da qodob ee hore haddii falkaas dhib ka yimaado ciqaabta waa la cusleynayaa.

Qod. 116aad, xccqs, Siin la.aan raashin ciidamada:-

(1) Askariga hawshiisu tahay inuu ciidamada saad gaarsiiyo, cunno ama wax kale oo shaqada ciidanka looga baahan yahay oo ka baaqsada arintaas, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 sano ilaa 5 sano.

(2). haddii arintaasi u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano.

Qod. 117aad, xccqs, Kala Furfurid Sharci Darro Ah:-

(1) Askariga kala daadiya hawsha asaga oo aan loo fasaxin, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xarig ah.

(2) arintaasi haddii ay u dhacdo si hajuun ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 1 sano ilaa 5 sano.

Qod.118aad, xccqs, Awood Sheegasho:-

(1) Askariga u xil saran nidaaminta qalabka ama shaqada ee diida ama ka taga asagoo ku xadgudbaaya amaradii ama u awood sheegta wixii sharcigu u xadiday ama qaanuunka, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan dembigaas uusan ka dhalan mid ka weyn xarig ciidan oo dhan 3 sano.

(2) Haddii falkaas awood sheegashada ah uu ku yimaado hajuun, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 10 sano.

(3) Haddii meesha falku ka dhacay ay tahay deegaan ciidan ee ruuxa falka geystay uu ku dhibaayo ciidan kale si uu faa'iido gaar ah uga helo arintaas waxay noqonaysaa keliya ilaa 3 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 119aad xccqs, Ku Xadgudb Ku Qaadid Qalab Ganacsi iyo Rakaab:-

(1) Askariga si sharci darro ah ugu qaada ama ogolaado in loogu qaado badeeco rakaab, gaadiidka, maraakiibta iyo diyaaradaha ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 2 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 120aad, xccqs, Ku Xadgub garaashka ciidanka iyo shaqaalaha ciidanka:-

(1) Askariga qaabilsan hawlaha garaashka ama shaqooyin kale oo ciidan oo khilaafa awaamiirta ka tiil iyo amarada ay ka bixiyeen madaxda sare oo si gaar ah uga shaqaysta asaga ama dad kale ugu shaqeeya, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 2 sano.

Sezione IV

Qod. 121aad, Xccqs, Muujin Aqlaaq Xumo:-

(1) Askariga waqtiga duufaanta, qarqashada iyo gubashada waqtikasta oo khatar jirta muujiya aqlaaq xumo. Argagax, iska horkeen iyo is khilaaf haddii falkaasi uu keenayo khatar ku timaada nabadgalyada goobta ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 5 ilaa 6 sano.

(2) Xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadid.

Qod. 122aad, Xccqs, Ka Hortegid La'aan Dembi Ciidan:-

(1) Marka laga soo tago arimaha ku xusan qaybta 2aad ee qod.20 Xccqs, Askariga cabsi darteed ama fulin la'aan darteed, u hor istaagi waaya dembiyada lidka ku ah Qaranka, difaaca ciidanka, afgembi iyo is ururssho lagu gelaayo hortiisa.

(a) Xarig aan ka yarayn 10 sano haddii dembigaas ciqaabtiisu keenayso dil ama derejo ka qaadis ama xabsi daa',in.

(b) Qaybaha kale waxay ciqaabtu noqonaysaa mida dembigaasi yahay oo laga dhimay bar.

(2) Haddii dembiiluhu yahay ninka ugu derejo sareeya ciidanka ama uu la siman yahay derejada, laakiin madaxtinimada asagu hayo, waxaa lagu ciqaabayaa dembiga qodobka uu galay, garsooraha ciqaabaya waa dhimi karaa.

(3) Sida ku qoran qaybaha hore caddeynta dembiyada laga soo sheegay ciqaabtoodu waa kuwa sare ku xusan, iyadoo ayna khuseyn kuwa falkaas madaxda ka ah, kuwa abuura iyo kuwa u ololeeya arimahaas.

Sezion V

Qod. 123aad, xccqs, Dhalashada dembiga arrimaha cusleeya:-

(1) Askariga shaqada haya ama loo xil saaray hawl oo lagu qabto saqrad toos ah ama kama ah, taasoo uu ku lumiyey garashadiisii si uu hawsha u qabto, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano xarig ah.
(2) Haddii falka uu galay taliyaha ama madaxa ilaaliyayaasha, waxaa lagu ciqabayaa ilaa 3 sano xarig ah.

(3) Isla amaradaas waxaa lagu ciqabayaa hadduu galay shaqada waqti gaaban asagoo lumiyey garashada saabab ka timid muqaadaraadka.

QOD. 124AAD, XCCQS, Awood Sheegasho Amar:-

(1) Askari kasta oo maroosada amarada, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 2 sano xarig ah.

(2) Haddii dembigaas lagu galo arimaha ku xusan qaybta 2aad qodobka 102 Xccqs, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 2 ilaa 7 sano.

(3) Hadii arimaha lagu fuliyo hub ama 3 qof wax ka badan oo isu timid oo khasaaro ka dhasha ciqaabtu waa la kordhinayaa.

Qod. 125aad, xccqs, Is Hortaag Handaad, Aflagaadeyn Ilaaliye, Eege Iyo Dhegeyste:-

(1) Askariga dhawri waaya amarada ilaaliyaha eegaha dhegeystaha oo fulinaya amarada la siiyey, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ciidan ah.

(2) Askariga handada ama aflagaadeeya ilaaliyaha, dhegsytaha iyo eegaha, waxaa lagu ciqabayaa 1 sano ilaa 3 sano.

Qod. 126aad, xccqs, Haajuumid waardiye, eege iyo dhegesyte:-

(1) Askariga hujuuma waardiye, ilaaliye, eege ama dhegeyste, waxaa lagu ciqabayaa xabsi dhan 1 sano ilaa 5 sano.

(2) hHddii hujuunku loo isticmaalo hub ama dad badan oo isu yimid, waxaa lagu ciqabayaa 3 sano ilaa 7 sano xarig ah..

Qod. 127aad, xccqs, Ka hor imaasho ciidamada qalabka sida:-

(1) Askariga hujuuma, handada ama hor istaaga ciidamada qalabka sida oo waajib gudanaya, waxaa lagu ciqabayaa xabsi dhan 6 bilood ilaa 5 sano.

(2) Haddii hujuunka iyo handadaada loo isticmaalo hub falkaasna lagu galo dad badan ciqaabtu waa la kordhinayaa.

(3) Haddii hujuunka iyo handadaada ay fuliyaan 5 qof iyo wax ka badan oo isu yimid iyagoo isticmaalaya hub xataa midkood ha isticmaalee, haddii ay noqdaan dad ka badan 10 qofood oo isu yimid xataa hub la'aan, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 7 sano.

Qod. 128aad, XCCQS, ARRIMAHA DEMBIGA CUSLEEYA:-

(1) Xaaladaha ku xusan qodobada 126-127 haddii hujuunku ay ka dhalato dil, dil kasdhaaf ah, waxaa lagu ciqabayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta, xarigiisana waa la dheereynayaa iyadoo la siyaadinayo.

Qod. 129aad, xccqs, Ishortaag Qof Sida Amaro Ciidan:-

(1) Askariga hujuuma, qiyaaneeya askari ama qof kale oo saran diyaarad ama gaadiid oo loo dhiibay amaro shaqada ciidanka la xiriira ama ka xada amaradaas ama u diida inuu gaarsiiyo meeshii loogu talo galay, waxaa lagu ciqabayaa 2 sano ilaa 7 sano xabsi ah.

Qod. 130aad, XCCQS, Handaad nin ka derejo hooseeya iyadoo lagu qasbaayo waajibka wax ka baxsan:-

(1) Taliyaha handada nin ka derejo hooseeya si uu ugu qasbo ama uu fuliyo waajib sharciga ka duwan ama uu isaga daayo arin hawshiisa la xiriirta, waxaa lagu ciqabayaa xabsi ciidan oo dhan 6 bilood ilaa 5 sano.

Qod. 131aad, xccqs, Fal Dembiyeed Ka Fogaansho Shaqo:-

(1) Askariga ka mid ah ciidamada oo ka taga shaqada amar la'aan kana maqnaada hawsha hal maalin, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 6 bilood xabsi ciidan ah.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya askariga iska maqnaa oo sabab la'aan u baaqday maalintii xigtay soo istaagay.

(3) Qodobadaan ma quseeyaan haddii xaaladda askariga tahay baxsi.

Qod. 132aad, xccqs, Ka Baxsasho Shaqo:-

(a) Qofka gala dembiyada baxsashada ah, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ama 2 sano xabsi ciidan ah.

(b) Askariga isagoo shaqada ciidanka ku jira iska taga fasax la'aan maqnaadana 5 beri oo is xigta.

C) Askariga shaqada haya ee ka fogaada goobta hawsha oo aan imaan 5 maalmood oo isku xigta.

Qod. 133aad, XCCQS, Baxsasho Degdeg ah:-

(1) Waxaa loo aqoonsanayaa baxsasho degdeg ah:-

(a) Askariga ka mid ahaa ciidan hawl loo diray ama safar ahaa ama dulsaarnaa markab iyo diyaarad oo laga waayey goobta hawsha markii uu ambabaxay ciidanka markabka ama dayaarada.

(b) Askariga fakada asagoo dhamaysanaayey xarig ciidan.

(c) Askariga u xirnaa dembi ciidan garsuge ahaa ee baxsada si aan dembi ciidan loogu qaadin.

(d) askariga fasax la'aan ka hawlgala markab ciidan shisheeye, diyaarad ciidan shisheeye.

(e) askariga ka taga shaqada asagoo qof kale isku soo beddelay.

(2) Ka tegida shaqada, waxaa lagu ciqabayaa xabsi 1 sano ilaa 3 sano, arimaha ku xusan xarafka (a) & (b) & (c), waa 2 sano ilaa 5 sano xabsi ah, hadduu galo xarafka ku xusan (d) waa 5 sano ilaa 7 sano xarig ah, haduu galo arimaha ku xusan xarafka (e) waa 5 ilaa 7 sano xarghi ciidan ah.

(3) Arimaha ku xusan xarfaha (b) & (c) loo raaci maayo waxyaabaha ku qoran qodobka 305 xc.

Qod. 134aad, xccqs, <u>Ugudbid Dal Shisheeye Oo Heshiis Lala Galo</u>:-

(1) Sida ku xusan qodobada hore, waxaa lagu siyaadinayaa ciqaabta 3/1 ama kala bar, haddii askarigu shaqada ka tago galana dal shisheeye.

(2) Ciqaabta ku xusan qodobada hore waa la kordhinayaa haddii askariga si toos ah u fakaday dadka fakaday 3 ama wax ka badan yihiin.

(3) Arrimaha ku xusan qaybta hore kordhinta ciqaabta waxaa ay ku dhacaysaa kuwa abuuray ama isku duba riday baxsiga.

<u>Sezion III</u>

Qod. 135aad, xccqs, <u>Arrimaha dembiga ka dhasho iyo waxa lagu ciqaabo</u>:-

(1) Askariga looga yeero hawlaha ciidanka si uu u guto waajib shaqo oo uu ka nastay ee imaan waaya sabab la'aan 5 maalmood oo is xigta waqtigii loo qabtay, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 2 sano xabsi ciidan ah.

(2) Isla ciqaabtaas, waxaa muteysanaya kii hore loo ruqseeyey oo loogu yeeray shaqada ciidanka sabab la'aana ku maqnaada 3 maalmood oo is xigta markii la wacay kadib

(3) Haddii u yeeridu ay tahay mid la xiriirta tababar ciidan ee imaan waaya sabab la'aan 8 maalmood gudahood markii la wacay, waxaa lagu ciqbayaa 6 bilood xabsi ciidan ah.

Qod. 136aad. Xccqs, <u>Arrimaha dembiga cusleeya ee la xiriira u gudbid dal shisheeye</u>:-

Sida ku xusan 2da qaybood ee hore ee qodobka la soo dhaafay, askariga ka dhuunta waajibka ciidan ee dalka dibadiisa u baxsada ciqaabta waa loo kordhinayaa.

Qod. 137aad. Xccqs, <u>Askarigas la wacay ee qof kale isku soo bedela</u>:-

Askariga loogu yeeray shaqada ciidanka sida ku xusan qodobka hore iyo sida ku cad qodobka 135 xccqs ee imaan waaya iskuna bedela qof kale, waxaa loo aqoonsanayaa mid maqan, waxaana lagu ciqabayaa qodobada aan sare ku soo sheegnay oo lagu kordhiyey 3/1 ama kala bar.

<u>Sezione IV</u>

Qod. 138aad. Xccqs, Arimaha dembiga cusleeya ama fududeeya ee la xiriira maqnaanshaha sida <u>ku xusan qod. Sezione 2aad & 3aad</u>.:-

(a) Haddii maqnaanshaha ay ka badato 6 bilood ciqaabta waxaa lagu kordhinayaa 1/2 .

(b) Haddii waqtiga maqnaanshuhu uusan ka badnayn 1 cisho ciqaabta waa la dhimayaa 3/1 ama kala bar.

Qod. 139aad. Xccqs, Qofkii isku beddela askariga fakaday ama magnaaday ee loo yeeray:-

Sida ku xusan xarafka (e) qod.133 iyo 137 isku beddela askariga fakaday, maqnaaday ama loo yeeray, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku xusan qodobada sare waana la dhimi karaa qaar.

Qod. 140aad. Xccqs, Derejo ka dhimis ciqaabta qodobka sare ku xusan:_ waxay keenayaan marka loo eego qod. 135 derejo dhimis.

Capo IV

Qod. 141aad. Xccqs, Iska dhigid curyaan si uu uga goovo joogto ahaan shaqada waajibka ciidanka:-

(1) Askariga iska dhiga si joogto ah mid hawl gab ah si uusan u gudan waajibaadkii sharcigu saaray xataa haduu ahaa mid raalinimadiisa shaqada ku qortay oo iska dhiga curyaan, hawlgab noockasta ha ku timaado inuusan awoodin qabashada shaqada , waxaa lagu ciqaabayaa 6 ilaa 15 sano xarig ciidan ah.

(2) Haddii falku yahay mid iskuday ah, waxaa loo raacayaa qod.38 xccqs iyadoo xarigiisuna loo bedelaayo mid ciidan.

Qod. 142aad. Xccqs, Iska dhigid curyaan waqti kooban si uu shaqada ciidanka ugu goovo:-

(1) Askariga ka dhuunta waqti kooban waajibkiisa shaqo ee saamaa oo sharcigu faraayey isu bedela raadsada hawlgabnimo aan joogto ahayn oo noockasta ah oo aan shaqada qaban, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xabsi ciidan ah.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya askariga u googooya shaqada qaaska ah ee loo xil saaray ama mida ciidanka guud ama mid farsamo oo loogu xulay awood ahaan oo iska dhiga curyaan ama si kale uusan ku qaban karin shaqada si uu hawshaas uga gaabiyo.

(3) Haddii dhibka uu is gaarsiiyey ay ka dhalato inuusan awoodin qabashada shaqada ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 7 sano xabsi ah.

Qod. 143aad. Xccqs, Iska dhigid curyaan:-

(1) Askariga iska dhiga curyaan si uu ugu qaldo madaxdiisa sare ee ciidamada, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xarig ah, haddii iska dhigidaas ay tahay mid shaqada loogu goynaayo keliya, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ah., haddii shaqo qaas ah oo ciidan gaar ah leeyahay ama mid farsamo ciqaabta waa la kordhinayaa.

Qod. 144. Xccqs, Arimo qoraal lagu galo marka shaqada ciidanka laga tago kadib:-

(1) Qodobada aan soo dhaafnay ayaa loo raacayaa qofka samaysta qoraal been abuur ah marka uu shaqada ka tago kadib.

(a) Asagoo ujeedadiisu tahay inuu ka dhuunto dib ugu yeerista ciidanka.

(b) inuu iska dhigo intuu shaqada dibada ka ahaa mid aan awood ahaan ama caafimaad ahaan shaqayn karin.

Qod. 145aad. Xccqs, Iska dhigid hawlgab si looga dhuunto shaqo gaar ah:-

(1) Sida aan ku soo sheegnay qodobada hore askariga ka dhuunta isagoo iska dhigaya hawlgab, jiroole, curyaan ama mid madaxa ka jiran si uusan u gudan waajibka ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 6 bilood xabsi ciidan ah.

(2) Haddii iska dhigidiisa ay wax u dhinto shaqada ciidamada, waxaa loo raacayaa sida ku xusan qod.142 xccqs.

Qod. 146aad. Xccqs, Xaaladaha Dembiga Cusleeya:-

(1) Haddii dad badan ay isla galaan dembiyada ku xusan qaybtan waa la kordhinayaa.

(2) Saraakiisha guud, dhaqaatiirta iyo qofkasta oo shaqo caafimaad ka shaqeeya ee gala dembiyada ku xusan qaybtaan ciqaabta xariga ah, waxaa loogu darayaa kala bar 1/2.

(3) Ciqaabta waxaa lagu darayaa sharaf ka qaadid hadduu Sarkaal yahay.

Qod. 147aad. Xccqs,-Ciqaabta Ciidanka ee xukunada la raaciyo:- sida ku xusan qodobada aan sare ku soo sheegnay haddii aan ciqaabta la raacin derejo ka qaadis qasab waaye in la raaciyo sharaf ka qaadis.

## CAPO V

Qod. 148aad. Xccqs, Burburin, baabi'in hubka ciidanka qalabka sida:-

(1) Askariga baabi'iya, burburiya ama qariba, kana dhiga dhamaantood ama qayb ka mid ah hubka ciidanka iyo risaasta dagaalka ama qalabka kasta kuwo aan wax anfacayn, kuwaasoo ciidanka loogu dhiibay shaqadooda gaarka ah, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 4 sano xarig ah.

Qod. 149aad. Xccqs, Jarjarid dharka iyo qalabka ciidanaka:-

(1) Askariga jarjara, baabi'iya, googooya ama ka dhiga wax aan waxba anfacaynin dharkiisa iyo qalabka kale ciidan oo la siiyey, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 6 bilood.

Qod. 150aaqd. Xccqs, libsasho dharka ciidanka qalabka sida, qofkasta oo gata qalab, dhar, gaadiid iyo waxkasta oo ciidamadu leeyihiin haddduusan muujin in ay si sharci ah ku soo galeen, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku xusan qodobada sare.

CAPO NI

qod. 151aad. Xccqs, Baabi'in Qaribaad Hawsha Ciidanka:-

(1) Askariga marka laga soo tago arimaha ku xusan qodobada 89-92 baabi'iya kana dhiga wax aan wax anfacayn dhamaantood ama qayb ka mid ah, xataa hadii ay tahay waqti yar, maraakiibta, diyaaradaha, gaadiidka, jidadka, warshadaha, kaydadka iyo meelkasta oo ciidamadu leeyihiin, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 8 sano.

(2) Haddii ay arintaasi la xiriirto curyaamin qaran, waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis.

(3) Haddii ay arintaasi u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan ilaa 5 sano.

Qod. 152aad. Xccqs, Khasaareyn xarumaha ciidanka marka laga soo tago xaaladaha ku xusan labada qod. ee hore:- Askariga gaarsiiya khasaare dhismayaasha ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xarig ciidan ah.

Qod. 153aad. Xccqs, Baabi'in Waxyaabaha dhaqdhaqaaqa ee ciidanka.:-

(1) Askariga marka laga soo tago arimaha ku xusan qodobada 148-149 baabi'iya, firdhiya ka dhiga waxaan waxba anfacin dhamaantood ama qayb ka mid ah qalab, hub, risaas iyo wax kale oo dhaqdhaqaaqa oo ciidanka leeyahay, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 4 sano xarig ah.

(2) Hadii falkaas ka dhaco markab ciidan dushiis ama diyaarad, ciqaabtu waxay noqonaysaa 2 sano ilaa 5 sano, waxaana la gaarsiin karaa ciqaabtaas 15 sano, haddii uu ka dhasho khasaare gaara markabka ama diyaarada oo ay shaqadii la qaban kari waayaan.

Qod. 154aad. Xccqs, Xaaladaha kamada ah:- sida ku xusan qodobada 152-153-162-163 haddii si kama ah lagu galo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 6 bilood.

Qod. 155aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga cusleeya iyo kuwa fududeeya oo la xiriira inta khasaaruhu la eg yahay:-

(1) Sida ku qoran qodobada 152-153, waxaan lagu ciqaabayaa, ciqaab aan ka yarayn 5 sano xabsi ah, haddii uu falku ka dhasho khasaare mug leh ciqaabta waa la kordhinayaa, haddii khasaaruhu aad u yar yahay oo dhibkuna yahay mid fudud.

Qod.156aad.xccqs, Dilid, dhaqaale xumeyn xoolaha looga baahan yahay ciidamada qalakka sida:-

(1) Askariga iyada oo aan baahi jirin dila, hawlgab ka dhiga oo khasaareeye xayawaan ama xoolo loogu talo galay shaqada c.q.s. dowladda, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan 4 ilaa 6 sano.

QOD. 157AAD. XCCQS, ANSHAXA CIIDAMADA QALABKA SIDA:-

(1) Askari kasta oo diida in uu fuliyo amarka Madaxdiisu siiday dib u dhiga, hakiya oo la xiriira shaqada waa maxkamad meleteri, waxaana lagu ciqabayaa 1 ilaa 5 sano

Qod. 158aad, xccqs, Haddii 4 askari ama wax ka badan oo ciidanka qalabka sida ah ay diidaan amarka madaxdooda iyadoo lagu jiro shaqada ama hakiya, dib u dhiga fulinta amarkaas:-

Hadii ay qaataan hub oo ay diidaan in ay ka noqdaan, qaladaadkaas ninkii abaabulay oo qorsheeyey isla markaana hoggaaminaayey waxaa lagu xukumayaa xabsi dhan 15 sano iyo derejo dhigis.

Qod. 159aad, xccqs, 4 Askari Iyo wixii ka badan haddii ay qoraan dacwad lid ku ah madaxdooda diidaana amarka madaxdooda:-

(1) Kii abaabulay, kii qorsheeyey, kii hoggaaminaayey, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 5 sano xarig meleteri ah.

(2) Hadii dembiga ay galaan tiro badan oo ciidan ah ama sababta loo galay ay tahay mid ujeedo gaar ah loo galay ama jawiga goobta dembiga ay tahay Markab dushiis, diyaarad dusheed waa la kordhinayaa 3/1 ama 2 meel haddii amarka ka noqoshada dembiga ay qaataan waa la dhimayaa xukunka ciqaabta ah.

Qod.160aad, xccqs, Qodobada 158-159 xccqs wixii ka baxsan ka caraysiin cadaalad daro:-

Haddii askariga lagu qasbo inuu dembi galo cadaalad xumo ay sameeyeen madaxdiisa xukunka ciqaabta waa is bedelaysaa waa la dhimayaa, waxaana lagu ciqaabayaa 3 meelood 1 meel ama ciqaab nuskeed.

Qod. 161 xccqs Askariga ka war hela ogaada dembiyada ku xusan 158- 159 in ay dhacayaan kana baaqsada inuu madaxdiisa u sheego waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano, haddii ninka warbixinta keeni waayey uu yahay Sarkaal ciqaabtu waa kordhaysaa waana ilaa 2 sano xarig ah.

Qod. 162aad, xccqs Marka 4 askari iyo wax ka badan ay ku heshiyaan in ay galaan dembiyada ku xusan qodobada sare:-

(1) Inta heshiiska ka qayb gashay waxaa lagu xukumayaa 3/1 ama ciqaabta barkeed, xitaa haddii uusan dhicin dembigu.

Qod. 163aad, xccqs Marka ay askar badan ku heshiiyaan in ay galaan dembi khatar gelin kara nabadgalyada markab, diyaarad ama goob difaac iyagoo horjoogsanaya awooda Taliyaha arintaas darteed, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 2 sano xabsi ciidan ahila 5 sano xabsi Ciidan ah.

Qod.164aad, Xccqs Marka 10 askari iyo ka badan ay ku heshiiyaan dacwad wadajir ah xitaa haddii ay u soo gudbiyaan si gooni gooni ah, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xarig ah, haddii dacwo ay soo gudbiyaan 4 askari iyo wixii ka badan dacwadaas oo ah mid shaaca laga qaaday ciqaabteedu waa 6 bilood ilaa 3 sano xarig ah.

Qod.165 xccqs Kuwa ka noqday heshiiska intuusan dhicin dembigu ama ka hortagay inuu dhaco dembigaas, kuwaas lama ciqaabayo.

Qod.166aad, Xccqs Askariga ku kaca ficilo niyadjab ku ah ciidanka taasoo keenaysa in ciidanka aysan shaqada qaban ama ay gudan waayaan shaqo gaar ahaaneed oo loo xil saaray, waxaa lagu ciqabaayaa 2 sano xabsi ah.

Qod.167aad. Xccqs, Shoobare qaylo kicin ah:-

(1) Askariga meel dad badan joogaan ka kiciya buuq iyo qaylo dhaan, waxaa lagu ciqabayaa haddii aysan keenayn dembi ka weyn xabsi dhan 1 sano.

Qod. 168aad, xccqs, Ururin sharci darro ah, qoraalo iyo caddeeymo ciidan:-

(1) Askariga aruuriya qoraalo wadajir ah iyo cabashooyin oo la xiriira hawlaha ciidanka ama asluubta saxiixana, waxaa lagu ciqabayaa xabsi ciidan oo dhan 6 bilood xarig ciidan ah.

(2) Isla ciqaabtaas, waxaa muteysanaya askariga isugu yeera ciidanka ururiya si sharci daro ah ama shiriya kana qayb gala.

Qod. 169aad. Xccqs, Ogolaansho qoraalo sharci darro ah ama caddeymo:-

Haddii ciidan badan ay isku raacaan qoraalo ama cadeymo la xiriira cabashadooda x.og ciidan ah midkastoo iyaga ka mid ah, wuxuu muteysanayaa xarig ciidan oo dhan 6 bilood.

Qod. 170aad. Xccqs, <u>Ka hor imaansho hujuun</u>:-

(1) Askarigã weerara ruux madaxdiisa ah, waxaa lagu ciqaabayaa Dil iyo derejo ka qaadis, haddii weerarka uu ka dhasho dhimasho ama iskuday dil, xataa kas dhaaf ha ahaado.

(2) Haddii weerarkaas uu ka dhasho dhaawac aad u culus ama mid culus, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis, haddii ruuxa la weeraray uu yahay Sarkaal, xabsi gaaraya 7 ilaa 15 sano, haddii ruuxa la weeraray uusan ahayn Sarkaal.

(3) Marka laga soo tago 2da qaybood ee hore askariga weerara ruux madaxdiisa ah, ciqaabtiisu kama yaraan karto 5 sano, haddii ruuxa la weeraray uu yahay sarkaal, isla ciqaabtaas 3 ilaa 10 sano xabsi ah, hadii qofka la weeraray uusan ahayn sarkaal.

Qod. 171aad. Xccqs, Arrimaha dembiga cusleeya sida ku qoran qodobadii hore:-

Haddii la aflagaadeeyo Taliyaha fadhiga ama madax kale ama askari shaqo u taagan ciqaabta waa la dhimayaa.

Qod. 172aad. Xccqs, Arrimaha dembiga fududeeya oo ku yimaada arrimo ka baxsan shaqada ciidanka & Asluubta:-

(1) Sida ku xusan qodobka 170 xccqs, haddii lagu galo dembiga arrimo ka baxsan shaqada ciidanka iyo asluubta meel aysan joogin ciidan badan ama aan la saarnayn markab ama diyaarad, ciqaabtii dilka ahayd iyo derejo ka qaadistii waxaa lagu bedelayaa 24 ilaa 30 sano xarig ah, ciqaabaadka kale waxaa laga dhimayaa kala bar.

(2) Xeerkaan hore loo raaci maayo haddii falku yahay dil sida uu qabo xeerka ciqaabta oo ku xukumaaya dil.

Qod. 173aad. Xccqs, <u>U Hogaansanaan la'aan, Aflagaadeyn iyo Handadaad</u>:-

(1) Askariga handada madaxdiisa asagoo taagan ama sharaftiisa wax u dhima haybada ruux madax ah asagoo hor taagan, waxaa lagu ciqabayaa xabsi dhan 3 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah, haddii ruuxa madaxda yahay Sarkaal 1 sano ilaa 5 sano, haddii ruuxa madaxda ah uusan hayn Sarkaal.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya Askariga falkaas ku gala isgaarsiin, telogaraam, teleefon iyo qoraalada ama sawirada tooska ugu socda madaxda.

Qod. 174aad. Xccqs, <u>Arrimaha dembiga cusleeya</u>:-

(1) Ciqaabaadka ku xusan qodobka hore waa la kordhinayaa

(a) Haddii handadaada ay ku timaado in ruuxa madaxda ah uusan gudan waajib saarnaa ama la gabsiiyo hawl uu qaban lahaa, taasoo ku keenta hawlqabad la'aan ruuxa madaxda ah.

(b) Qofka la aflagaadeeyey hadduu yahay taliyaha xerada ama madaxa ilaalada.

(c) Haddii falkaasi uu leeyahay tilmaamaha ku xusan qodobka 266 XC.

(2) Haday ka dhalato xaaladaha ka muuqda qaybta 2aad ee isla qod. 266, waxaa lagu ciqabayaa xabsi dhan 5 sano ilaa 20 sano xarig ciidan ah, haddii ruuxa madaxda Aflagaadeeyey uu yahay Sarkaal 3 ilaa 15 sano, haddii ruuxa Aflagaadeedey uusan sarkaal ahayn.

Qod. 175aad. Xccqs, Handadaad ama cay madaxeed oo goobta ka maqan:-

Sida ku xusan 2 qodob ee hore, haddii dembigaas la galo ruuxa madaxda ah oo meesha ka maqan, laakiin ay joogaan ciidamo fara badan eedaysanaha, waxaa lagu xukumayaa 6 bilood ilaa 3 sano, hadii uu yahay ruuxa madaxda ah Sarkaal 6 bilood xabsi, haduusan ahayn Sarkaal.

Qod. 176aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga fududeeya wax yaabo ka baxsan shaqada ciidanka:-

Marka laga soo tago 3da qodob ee hore, haddii falka lagu galo arin ka baxsan shaqada ciidanka iyo asluubta iyadoo aysan goobta joogin ciidan shaqo ama aan la saarnayn Markab iyo Diyaarad, ciqaabtu waa la dhimayaa.

Qod. 177aad. Xccqs, Hawsha uu hayo qofka madaxda ah sida ku xusan qod. Sare, qof kasta oo leh xaalado ciidan oo ku gefa ruux madax ah asagoo fulinaya shaqadiisa arimo siyaasadeed, maamul iyo sharci oo ruuxaas madaxda ahi ka shaqeeyo.

Qod. 178aad. Xccqs, Dembi ka raadin ruux madax ah:-

Sida lagu soo sheegay qodobadii hore, haddii dembigu ka dhasho ciidan iyo gef ruuxa madaxda ah ka yimid oo isla markiiba laga jawaabay, ciqaabta dilka iyo derjo ka qaadista, waxaa loo bedelayaa xarig dhan 20 sano, dembiyada kuwaas ka duwan ciqaabta kala bar ayaa la dhimayaa.

Qod. 179aad. Xccqs, Hajuumid qof derejo hooseeya:-

(1) Askariga hujuuma mid ka derejo hooseeya, waxaa lagu ciqabayaa xarig ciidan oo dhan 6 bilood ilaa 5 sano.

(2) Haddii hajuumkaas uu ka dhasho dil, iskuday dil, dhaawac aad u culus iyo dhaawac fudud, waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta xariga ku meelgaarka ah waa loo dheeraynayaa.

Qod. 180aad. Xccqs, Handaad, Aflagaadeyn qof derejo hooseeya,:-

1. Askariga handada qof ka derejo hooseeya asagoo jooga ama sharaftiisa wax u dhima qof ka derejo hooseeya, waxaa lagu ciqabayaa 6 bilood ilaa 5 sano xarig ah.
2. Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya askariga arintaas ku gala isgaarsiin taaraarka, teleefoonada, qoraalada iyo sawirada qof derejada hoose loola jeedo.

3. Ciqaabta xariga ah waxay noqonaysaa ilaa 3 sano xabsi ciidan, haddii lagu galay falka sida ku xusan qod.266 xc oo ah mid culus.

Qod. 181aad. Xccqs, Arrimaha dembiga fududeeya ee ka baxsan shaqada ciidamada iyo asluubta:-

(1) Sida ku xusan qaybta 1aad qod. 179 xccqs iyo qod. 180 xccqs, haddii hajuumka handadaad iyo Aflagaadada ay ku timaado arimo ka baxsan shaqada ciidanka iyo asluubta xariga ciqaabta ah waa la dhimayaa 3/1 ama kala bar.

Qod. 182aad. Xccqs, Kicin:-

Haddii arimaha ku xusan qodobadii aan soo dhaafnay ay ka dhashaan ciidan labadaas qofka derejada hoose uu kadib falkaas geysto ciqaabtii dilka ahayd, waxaa loogu bedelayaa 20 sano xabsi ciidan ah, ciqaabtii xabsi daa'inka ahayd waxaa loogu bedelayaa 15 sano xabsi ciidan ah, dembiyada kale ciqabtoodu waa la dhimayaa.

Qod. 183aad. Xccqs, Awood sheegasho sabab sharafeed aawadeed:-

(1) Sida ku xusan qaybta 3aad iyo 4aad ee xeerka, haddii lagu galo sabab sharafeed sida ka muuqata qod. 443 xc, ciqaabta waa loo raacayaa isla qodobkaas, xarigana waxaa lagu bedelayaa xarig ciidan.

Qod. 184aad. Xccqs,Ujahayn dembi ciidan in la galo:-

(1) Hadii aan sharcigu si kale u aqoon askariga u jaheeya mid ama ka badan oo ciidan ah in ay galaan dembi ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa haddii dembigaas la gelin ama la galay 5 sano xabsi ah, ciqaabtaas waxaa la dul saari karaa kala bar ciqaab ah inta sharcigu u qoray.

(2) haddii kan wax diradiray uu yahay madax waxaa loo raacayaa derejada oo laga dhimo.

Qod. 185aad. Xccqs, Ku hagid ciidan amardiido:-

(1) Askariga gala inuu ku hago dembiyo ama ku hago amardiido sida ku xusan qod.209 x.c. ayaa loo raacayaa, waxaana xabsiga loogu kordhinayaa 3/1, ciqaabta waxaa raacaya derejo ka qaadis ama derejo ka dhimis.

(2) Haddii kan wax diradiray uu yahay madax waxaa loo raacinayaa derajada oo laga dhimo.

Qod. aad. Xccqs, Xatooyo xoolo ciidan:-

Askariga qaabilsan maamulka shaqada ama taliyaha sabab hawshiisa iyo xafiiskiisa la xiriirta ku haya lacag ama qalab kale oo ciidanku leeyahay oo iska qaata ama lunsada si gaar ah ama dad kale siiya, waxaa lagu ciqaabayaa 2 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 187aad. Xccqs, Maamul xumo dano ciidan:-

(1) Askariga u xil saaran maamulka ama taliska oo iska qaata ama lunsada qof ahaan ama cid kale oo lumiya lacag iyo qalab ciidan ee asaga lagu ogaa sabab shaqo iyo mid xafiis darteed, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano ilaa 8 sano xarig ciidan ah.

Qod. 188aad. Xccqs, Xatooyo ama maamul xumo boostaalaha ka timaada:-

(1) Askariga u xil saran inuu soo qaado boostada ee iska qaata waraaqaha ama qalabka kale boostadu keento sida ka muuqata 2da qodob ee hore iska qaata lunsada ama cid kale uga faa'iideeya iyadoo ku khasaarayo ciidanku wax qiima leh iyo ashiyaa shaqadiisa darteed loogu ogaa, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku xusan 2da qodob ee hore.

qod. 189aad. Xccqs, Xatooyo ciidan oo meelo kale si khalad ah uga timid:-

(1) Askariga u xil saran hawsha maamulka ama taliska oo shaqadiisa aawadeed meel aan haboonayn mariya ama si khalad ah u isticmaala lacag ama qalab ciidamadu leeyihiin, waxaa lagu ciqabayaa 2 sano ilaa 3 sano xarig ah.

Qod. 190aad.xccqs, Xaaladaha dembiyada la raaciyo:- ciqaabta ku xusan qodobada hore, haddii aysan keenin derejo ka qaadis, waxay keenaysaa derejo dhimis.

Qod. 191aad. Xccqs, Been abuur waraaq fasax ah iwm:-

Askariga wax ka bedela dhamaanteed ama qayb ka mid ah warqada fasaxa ah ama ogolaasho ama dibad u bixid ah ama ku soo bedelid ah ama ku dhex socosho meelo gaar ah (xeryaha) ama waraaqaha isbitaalka lagu galo ama looga soo baxo, ku been abuura ama wax ka bedela, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 sano xabsi ciidan ah, isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya askariga been abuura dukumiinti fasax ah ama wax ka bedela oo ciidamo kale laga soo siiyey.

Qod. 192aad. Xccqs, Maroorsasho derejo & calaamado ciidan:-

Askariga qaata si sharci daro ah lana taga meelaha dadweynaha derejo, calaamado iyo billado ciidan oo shacigu u xadeeyey arimo gaar ah asagu uusan lahayn, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 6 bilood xarig ciidan ah.

Qod. 193aad. Xccqs,

(1) Askariga gaarsiiya jaareexo haddii aanay ka imaan dhaawac jirka ama maskaxda ah, waxaa lagu ciqabayaa ilaa 6 bilood xabsi ciidan ah.

(2) Xaaladahaas loo raaci maayo haddii sharcigu uu u yaqaano hujuun oo falku ku dhisan yahay ama ay meesha ku jirto arimaha dembiga cusleeya ama dembi kale.

Qod. 194aad. Xccqs, dhaawac fudud:-

Askariga gaarsiiya Askari kale dhaawac fudud oo jirkiisa xanuujiya ama maskaxda, waxaa lagu ciqaabayaa hadduusan la socon dembi kale culus 2 ilaa 3 sano xarig ah.

Qod. 195aad. Xccqs, Dhaawac culus iyo mid aad u culus:-

(1) Haddii dhaawac loo geystay askari uu mid kale u geystay uu culus yahay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 2 sano ilaa 7 sano.

(2) Haddii dhaawacu yahay mid aad u culus, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 5 ilaa 12 sano.

Qod. 196aad. Xccqs, Xaaladaha Dembiga Fududeeya:-

Haddii arimaha 3da qodob ee hore lagu soo sheegay xaaladuna ay tahay arin sharafta qofka la xiriirta sida uu tilmaamayo qod. 443 xc, waxaa loo raacayaa falkaas sida ku qoran x.c. xariga eedaysanaha waxaa lagu bedelayaa xarig ciidan.

Qod. 197aad. Xccqs, Aflagaado:-

(1) Askariga Aflagaadeeya askari kale sharaftiisa & haybadiisa wax u dhima asagoo hor taagan waxaa lagu ciqabayaa haddii aan dembi culus ka dhalan ilaa 1 sano xabsi ah.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya isgaarsiinta, telegaraamka, teleefoonada, qoraalada iyo sawirada tooska ugu socoda qofka la aflagaadeeyey.

(3) Ciqaabtu waxay noqonaysaa ilaa 2 sano xabsi ah,.haddii falkaasi uu yimaado xaaladaha ku xusan qaybta 2aad qodobka 451 XCG.

Qod. 198aad. Xccqs, Sharaf ka qaadis:-

(1) Askariga marka laga soo tago qodobka hore sharaftiisa meel uga dhaca askari kale, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan dembi culus ka dhalan 1 sano xabsi ciidan ah.

(2) Ciqaabta waa loo laba jibaari karaa, haddii xaaladu u dhacdo xarfaha (a) (b) (c) (d) .qaybta 2aad qodobka 451 x.c.

(3) ciqaabtu waxay noqonaysaa 6 bilood ilaa 3 sano, haddii sharaf ka qaadida lagu sameeyey qoraal ama faafin rasmi ah.

QOD. 199AAD. XCCQS, KICIN IYO ISDHAAFSI:-

(1) Xaaladaha ku xusan qodobka 197 xccqs, haddii aflagaadada la is dhaafsaday garsooruhu wuxuu ku dhawaaqi karaa in aan dembi dhicin lana ciqaabi karin mid ama labadaba.

(2) la ciqaabi maayo qofka falkaas ku gala xaaladaha ku xusan qod. 197-198 xccqs.carro loo geystay aawadeed oo ai xaqdaro ah ugu dhacday.

QOD. 200AAD. XCCQS, HANDADAAD:-

(1) Askariga handada askari kale si xaqdaro ah, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan dembi culus ka dhalan xabsi dhan 2 bilood.

(2) Handadaadu haddii ay tahay mid culus, waxaa lagu ciqaabi karaa 6 bilood xabsi ciidan ah.

(3) Haddii handadaadu u dhacdo sida ku qoran 266 Xcg, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 1 sano.

QOD. 201AAD. XCCQS, TUUGO CIIDAN:-

(1) Askariga goobaha ciidanka dhexdooda ka xada shay askari kale leeyahay si uu ugu faa'iideysto.

(2) ama cid kale uga faa'iideeyo, waxaa lagu ciqabayaa xabsi ciidan oo dhan 2 bil ilaa 2 sano.

(3) Haddii waxa la xaday ay yihiin wax maanulka ciidanku leeyahay, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 1 ilaa 5 sano.

(4) Xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

(5) Sida sharciga ciqaabta ee ciidamada u yaqaano goobaha Ciidamada waxaa loola jeedaa xeryaha, maraakiibta, diyaaradaha, warshadaha iyo meelkasta oo ciidanku leeyahay xataa waqti gaaban ha deganaadee shaqo darteed.

QOD. 202AAD. XCCQS, XAALADAHA DEMBIGA CUSLEEYA:-

(1) Ciqaabtu waxay noqonaysaa 1 ilaa 5 sano, haddii la helo xaaladaha ku xusan qaybta 1aad ee qodobkii hore 2 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah, haddii arintu u dhacdo sida ku xusan qaybta 2aad ee isla qodobkii hore.

(a) Haddii dembiiluhu xoog isticmaalo waxkasta ha ku hubaysnaadee.

(b) Hadii uu dembiiluhu hub iyo waxa qarxa wato uusan isticmaalinba.

(c) Haddii shaygu uu dafay ama goostay kana qaatay qofkii sitay.

(d) Haddii falka ay geysteen 3 qof iyo wixii ka badan ama qof is qarxinaya.

(2) Haddii ay ka muuqato falkaas dembi xaaladaha lagu tilmaamay qodobadii hore iyo qodobada 39 xcg iyo 39 xccqs, ciqaabtu waxay noqonaysaa 2 ilaa 8 sano , waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah, haddii dembiga loo galo sida ku xusan qaybta 2aad ee qodobkaan.

(3) Xukunka haddii uu raaci waayo derejo ka qaadis, waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

QOD. 203AAD. XCCQS, TUUGO LOO GEYSTO NIN MADAX AH:-

(1) Askariga u shaqeeya ninka madaxda ah meelkasta oo qaata qalab taliyuhu leeyahay si uu uga faa'iido ama dad kale uga faa'iideeyo 2 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah

(2) Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya haddii uu ka xado guriga taliyaha kii u shaqaynaayey dad kula noolaa taliyaha.

(3) Hadii ay meesha ka soo baxdo xaaladaha ku xusan qaybta 1aad ee qodobkii hore, ciqaabtu waxay noqonaysaa 3 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

(4) Hadii falkaasi uu u dhaco sida ku tilmaaman qaybta hore ee qodobkii hore ama xaaladaha qod. 39 xeerka ciqaabta guud iyo qod. 39 x.c.c.q.s.ciqaabtu waxay noqonaysaa 4 ilaa 12 sano xabsi ciidan ah.

(5) Hadii xukunka aan la raacin derejo ka qaadis, waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

QOD. 204AAD. XCCQS, Xatooyo, Isticmaalid Wax Qiimo Yar Dhar & Maacuun:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 6 bilood oo xabsi ciidan ah.

(a) Haddii eedaysanuhu uu u qaatay inuu muddo yar isticmaalo waxa uu xaday islamarkaa uu si degdeg ah meeshii ugu soo celiyo.

(b) Haddii falku uu u galay qalab qiimo yar asagana baahi culus ku qasabtay inuu xado.

(c) Haduu dembiga ku galay dhar ama maacuun ciidan asagoo ugu qaldantay kuwiisa.

2) Arimahaan lagu dhaqmaayo haddii xaalku ku yimaado sida ku xusan xarfaha (a) (b) (c) ee qaybta 1aad qod.202

QOD. 205AAD. CXCCQS, QAYAANO (TURUFO):-

(1) Askariga si isdaba marin ah iyo qiyaano wax ku qaata ama dad kale wax uga qaada kuna wax yeeleeya qof kale oo ciidanka ka mid ah, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 3 sano xarig ah.

(2) Ciqaabtu waxay noqonaysaa 1 ilaa 5 sano oo xabsi ah.

(a) Haddii dhibku ku dhaco maamulka ciidanka iyadoo lagu qaldaayo shaqada.

(b) Haddii qofka la qiyaanay loo soo maray cabsi gelin ama wax khatar keeni kara maskaxda loogu shubay si uusan u gudan waajibka shaqo.

(3) Ciqaabtu waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

QOD. 206AAD. XCCQS, AMAANO LUNSASHO:-

(1) Askariga qaada ama cid kale u qaada lacag ama alaab asaga lagu ogaa oo ciidanku leeyahay, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xarig ah.

(2) Hadii uu falka ku galo qalab ciidanka oo uu hayay oo asaga lagu ogaa ciqaabtu waa la kordhinayaa.

(3) Hadii waxa uu lunsaday ay yihiin dharka & maacuum qasdigiisuna uu ahaa isticmaal ama doqonnimo, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood oo xarig ciidan ah.

(4) Sida ku xusan qaybta hore & qaybta 2aad ee qodobkaan ciqaabta waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

QOD. 207AAD. XCCQS, Lunsasho Wax La Soo Helay Ama Si Khalad ah Loogu Keenay:-

(1) Waxaa lagu ciqabayaa 6 bilood xarig ah.

(a) Askariga ka hela goobaha ciidanka lacag ama alaab luntay ee iska qaata asagoo aan u gudbin madaxdiisa 24 saac gudahood.

(b) Askariga haduu iska qaato wax qof kale oo ciidanka ah leeyahay ama ciidanku leeyahay oo si khalad ah u soo saaray asagoo kama ahaan.

(2) Hadii eedaysanuhu garanayo qofka iska leh waxa lumay ee uu iska qaato, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano xarig ah.

Qod. 208aad. Xccqs, GADASHO ALAAB TUUGO AH:-

(1) Marka laga soo tago qofka dembiga galay askariga gata ama cid kale u gada, qabta, qariya lacag ama alaab ka timid dembikasta oo ciidan ee iibsada, qabta ama qariya, waxaa lagu ciqabayaa 2 sano xarig ah.

(2) Haddii lacagta ama qalabka dembi ciidan ku yimaado waxay keenaysaa xarig dhererkiisu yahay ilaa 5 sano, haddiise dembigu aad u culus yahay, waxaa la xirayaa 6 sano.

(3) Arimaha qodobkaan waxaa loo raacayaa loona ciqaabayaa hadii eedaysanuhu dembiga galay uu lunsaday lacagta iyo alaabta uu yahay mid aan la eedayn karin ama la ciqaabi karin.

(4) Xukunka haddii aanay raacin derejo ka qaadis waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

PART SOCONDA
CODICE PENALE MELITARE DI GUERRA
LIBRO 1
DELLLA LEGGE PENALE MITITARE DI GUERRA
IN GENERALE

TITOLO 1

Della Legge Penale Militare di Guiuerra e della sua applicazione

QOD. 209AAD. XCCQS, DHISMAHA SHARCIGA CIIDAMADA WAQTIGA DAGAALKA:-

(1) Sharciga ciqaabta ciidamada ee dagaalka wuxuu ka koobmaa Xeerkan iyo Xeer kasta oo gaar ah oo go'aan leh qaab sharci oo lagu ciqaabo ciidamada waqtiga dagaalka.

Qod. 210aad. Xccqs, Faafinta sharciga dagaalka marka ciidanku ka hawlgalayo dibada:-

(1) Sharciga dagaalka ee loo dejiyey marka ciidanku ka hawlgalayo dal dibada ah, waxaa lagu faafinayaa sida sharcigu qabo xeer gaar ah oo uu soo habeeyey taliyaha ciidamada haddii sharcigu si kale u fasirin.

Qod. 211aad. Xccqs, Xeerka ciidamada waqtiga dagaalka ee ku xadidan waqtiga:-

(1) Xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga dagaalka waxaa loo raacayaa fal dembiyeedka ku xusan asaga oo la galay kuligood ama qayb ka mid ah mudada dowladdu ku dhawaaqdo dagaal ama ay joojiso.

Qod. 212aad. Xccqs, Xeerka ciidamada dagaalka ee goobaha:-

(1) Xeerka ciqaabta ciidamada ee dagaalka waxaa loo raacayaa dembiyada ku xusan goobaha gaarka ah ee dagaalku ka socdo, kuwaas waxaa loola jeedaa. Goobaha dagaalka.

Qod. 213aad. Xccqs, Aqoonsiga meleteriga, Xeerka ciqaabta ciidamada ee dagaalka waxaa hoos imaanaya:-

(a) Qofka ka mid ah ciidanka X.D.S. iyo qofkasta oo u habaysan qaab ciidan.

(b) Magaca ciidamada qalabka sida waxaa qaadanaya X.D.S. iyo ciidankasta oo leh qaab dhismeedka ciidamada.

Qod 214aad. Xccqs, Maxaabiista dagaalka oo ay hayaan ciidanka soomaalidu:-

(1) Maxaabiista dagaalka oo ay gacanta ku hayaan ciidanka soomaaliya, waxay hoos tagayaan xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga dagaalka ee lagu dhaqo ciidamada soomaaliya haddii aysan ka reebayn xeer gaar ah heshiisyada caalamiga ah.

Qod. 215aad. Xccqs, Dembiyada ay galaan cadowga sharciyada loo isticmaalo dagaalka:-

(1) Sida ku xusan qaybta 4aad ee sharciga dembiyada laga galo sharciga iyo fulintiisa, waxaa lagu ciqaabayaa ciidanka cadowga iyo qofkasta oo ka mid ah kaaliyayaasha cadowga ee ka soo horjeeda qaranka soomnaaliyeed ama loo geysto qof soomaali ah ama dowlad cilaaqaad naga dhaxeeyo.

Qod. 216aad. Xccqs, Dadka ka baxsan ciidamada qalabka sida:-

(1) Sida lagu cadeeyey sharciga ciqaabta ciidamada ee dagaalka xataa waxaa lagu qaadayaa dadka ka baxsan ciidamada ee gala qodobada ku xusan 217,323,324,325,326 iyo 327 xcqs, ciidamada is bahaysiga dagaal aan la leenahay, sida uu u yaqaano sharciga ciqaabta ee dagaalka dembiyada ay galaan ciidanka soomaaliya iyo kuwa aan is bahaysiga la leenahay iyo kuwa ay ayagu iska galaan waxaa loo aqoonsanayaa in laga galay ciidamada qalabka sida ee soomaaliya, ayadoo ay khasab ku tahay dalkaas kale inuu dhowro.

(2) sida uu qabo sharcigaan waxaa loo yaqaanaa is bahaysi cidkasta oo gacan nagu siisa dagaalka.

Qod. 217aad. Xccqs, Dembiyada maxaabiista soomaalida ay galaan oo ay u geystaan maxaabiis kale ee soomaali ah oo dalka dibadiisa ku xiran:-

(1) Haddii aan sharcigu si kale u sheegin marka la raaco qodobada hore ee xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga dagaalka maxaabiista soomaalida ee u xiran cadowga haddii midkood mid kale dhib u geysto, waxaa loo aqoonsanayaa dembi dagaal xataa arintu haka dhacdo dibada, waxaa lagu ciqaabayaa sharciga u yaala ciidamada q.s. soomaaliya.

Qod.218 XCCQS. Dembiyada ay galeen Maxaabiista Dagaalka lagu qabto:-

Haddii aan Qodobka kan ka horeeya uusan si ka duwan u sheegin sharciga Ciqaabta Ciidammada Q.Sida waxaa lagu qaadi karaa ninkasta oo ka tirsan Ciidamada Q.Sida ee Soomaaliya oo maxaabiis ahaan cadowgu u qabteen xataa dembigu haddii uu yahay mid ka dhacay dal ajanabi ah.

Qod. 219aad. Xccqs, Awooda nidaam u samaynta ciidammada.:-

(1) Taliyaha sare ee ciidanka ayaa awood u leh inuu nidaam sharci u sameeyo ciidamada asagoo raacaya xeerka habka ciqaabta garsoorka ciidamada.

Qod. 220aad. Xccqs, Waqtiga khatarta ay taagan tahay ee ka timid dibada dalka:-

(1) Marka khatar dibadeed timaado oo soo handadaysa dalka qayb ka mid, taliyaha deegaanka ee ciidamada q.s. awood u leh inuu ku dhawaaqo xaalad dagaal sida uu u fasaxayo qodobkii hore

Qod. 221aad. Xccqs, Qabsasho ciidan & Qalab cadow:-

(1) Marka ay dhacdo in la qabto qalab cadow dalka gudahiisa ama dibadiisa sabab dagaal aawadeed ama sabab kale taliyaha colka wata wuxuu awood u leeyahay haday ku khasabto inuu xaalad dagaal ku dhawaaqo.

Qod. 222aad. Xccqs, Marka ay khasab tahay in lagu dhawaaqo Xaalad Dagaal:-

(1) Xaaladaha lagu dhawaaqayo oo ku xusan qodobada hore waxay leeyihiin qiimo sharci ah oo ku eg taliskaas ku dhawaaqay iyo goobta Dagaalka uu joogo oo dibada ka ah ciidamada guurguura ama kuwa meel degan.

(2) Xaallada Dagaalka oo Taliyahaasi ku dhawaaqay waxay leedahay qiimo sharci ah oo taabanaya dadweynaha degan dhulka la soo weeraray oo ah inay dhowraan una hoggaansamaan.

(3) Ku dhuwaaqida xaalladaas waa la faafinayaa.

(4) Ku dhawaaqida arintaas waa khasab haddii aan wax iska beddelin xaallada.

(5) Waa la joojinayaa qaanuun kale ee sharci marka ay gudboonaato xaalladaan ama xaalladaha ku xusan qodobka 219 Xccqs.

Qod. 223aad. Xccqs, Hakin.:-

Hakintu ma joojinayso in la isticmaalo xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga Dagaalka iyo xeerka Garsoorka haddii aan lagu soo saarin dekereeto madaxweyne oo midaa ka duwan.

Qod. 224aad, xccqs. Joojin sharciga ciqaabta C.Q.S. waqtiga Dagaalka:-

Joojinta Dagaalka wuxuu hakinayaa sharciga ciqaabta ciidamada qalabka sida waqtiga Dagaalka ee goobaha Dagaalka, haddii aan sharcigu si kale u fasirin.

Qod.225aad, xccqs, Dib u soo nooleyn sharciga ciidamada waqtiga Dagaalka:-

(1) Dembiyada lagu xusay sharciga ciqaabta ciidamada ee waqtiga dagaalka oo la galay mudadii dagaalku socoday, waxaa loo raacayaa markasta isla xeerka kor lagu soo sheegay xataa haddii la soo oogay dacwadaas Dagaalka kadib, xataa haddii sharciga ciqaabta ciidamada waqtiga Nabada iyo xeerka guud ciqaabta aysan dembi u aqoon falkaas.

Qod.226aad. Xccqs, Maxaabiista Dagaalka ee Gacanta Ugu Jirta Qaranka:-

(1) Xataa kadib Dagaalka markuu istaago maxaabiista cadowga ee la hayo waxaa lagu dhaqayaa sharciga ciidamada ee waqtiga Dagaalka ilaa dalkoodii loogu celinayo.

(2) Hadii xaaladaha maxaabiista dagaalka ay ku sugan yihiin kuwo dembiyo gudaha ah galay mudadii ay xirnaayeen, waxaa lagu ciqaabayaa isla sharcigaan ayadoo la raacayo xeerarka caalamiga ah.

LIBRO SOCODO

Dei reti e delle pene Militari in generale

TITOLO I

Disposizioni generali

Qod.227aad, Xccqs, Goobta lagu fuliyo Xukunka Dilka ah waqtiga Dagaalka:

Ciqaabta dilka ah waxaa lagu fulinayaa halka Maxkamaddu kula dhawaaqdo xukunka, haddii aan sharciga si kale u tilmaamin.

Qod. 228aad, xccqs, Dhimista ciqaabta culus oo loo eegayo dhaawaca ama billado ciidanka:-

Haddii uu soo gaaro dhaawaca culus eedaysanaha waqtiga dagaalka ama uu lahaa billado sharafeed ciidan ee dagaal ciqaabta uu ku mutaysan lahaa dembiga uu galay, waxaa loo dhimi karaa sida soo socota:-

(a) Ciqaabta dilka ah iyo xabsi daa'in, waxaa loogu bedelayaa 10 ilaa 20 sano xabsi ah.

(b) Ciqaabta dilka ah ee xabadka laga tooganayo 6 ilaa 15 sano xarig ah.

(c) Ciqaabaha kale, waxaa laga dhimayaa 3/1 ama 2 meel ciqaabta.

Qod. 229aad. Xccqs, Ku Dhawaaqida Xukunka:-

Haddii aan Garsooruhu si kale u isticmaalin xukunnada dilk ah ama xabsi daa'inka ah ee maxkamadda c.q.s. ee dagaalka oo la xiriiro dembiyada basaasnimada u adeegsiga cadowga, u baxsashada cadowga, waxaa lagu faafinayaa iyadoo lagu dhijinaayo goobaha ciidamada sida uu tilmaamayo Xccqs xataa degmada ciidanka deggan yahay waa lagu dhejinayaa.

Qod. 230aad, Xccqs, Dallacaada waqtiga Dagaalka iyo abaal marinteeda:-

(1) Askariga la siiyo qiimaha ciidan ee hawl qabadka dagaalka, dallacaad, billado, dembiga waa laga cafin karaa iyadoo uusan dhammaan waqtiga xukunka.

Qod. 231aad. Cxccqs, Ka Qayb qaadashada dagaalka si daacadnimo ah, sharafta ciidamada aan abaal marinta qodobka sare lagu soo sheegay oo si daacadnimo ah amaan uga qayb qaata hawlaha dagaalka ayagana, waxaa loo ogol yahay in xukunkooda laga jaro halkii sanaba 3 bilood ama marka hore ee xukunka u bilaabanaayo.

Qod. 232aad. Xccqs, waxaa ka reeban dembi ka dhaafida dagaalka in dembiga laga dhaafo ama laga dhimo askarta ku xukuman dembiyada basaasnimada, ku biirida cadowga, baxsashada, kicinta ciidanka iyo curyaamiintooda waqtiga dagaalka socodo kuna gala dembiyadaas.

Qod. 233aad. Xccqs, Fulinta xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga nabadda kordhinta ciqaabta:-

(1) Sida ku xusan sharcigaan iyo midka xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga nabadda oo la xiriira dembiyada ciidan ciqaabta xariga ah ee uu qorayo xeerka ciidamada waqtiga nabadda, waxaa lagu kordhinayaa 3/2 ama 3/1 haddii dembigu culus yahay, haddii kordhinta sharcigani si gaar ah u tilmaamin.

Qod. 234aad. Xccqs, Dembiyada lidka ku ah Taliyaha guud:-

(1) Askariga iskudaya inuu naftiisa wax u dhimo, deganaan shadiisa iyo xoriyadiisa taliyaha guud ee ciidamada, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejada oo laga qaado.

(2) falalka kale ee intaas ka baxsan, waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga nabadda oo xarigiisa lagu kordhinayo kala bar inta xukunkaas yahay.

Qod. 235aad. Xccqs, ka tegid ciidanka & cadow la safasho, askariga dagaalka la gala qaranka asagoo ka fakaday ciidankiisii maraakiibta ama dayuuradaha, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah & derejo ka qaadis.

Qod.236aad. Xccqs, Gacansiin Cadowga:- inuu gacansiiyo cadowga iyo la hawlgelid cadow ama curyaaminta hawlgalada ciidamada qaranka soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

Qod.237aad. Xccqs, Curyaamin hawlaha ciidamada:- askariga marka laga sootago qodobada hore hor joogsada ama qasa fulinta diyaar garowga difaaca ciidamada, waxaa lagu ciqabayaa, haddii ay ka timaado awood xumi hawlaha dagaalka ciidamada soomaaliya xarig aan ka yarayn 10 sano.

Qod. 238aad. Xccqs, U hawl gelida cadowga duuliyenimo, wadid markab ama wax kale:- muwaadinka ama qofkasta oo dowladda u shaqeeya ee ogolaada inuu u duuliyo diyaarad ama markab u wado ama si kasta u soo hoggaamiya cadowga, waxaa lagu ciqabayaa dhabar ka toogasho dil ah.

Qod. 239aad. Xccqs, U Basaasid, La Xiriirid Cadowga:-

(1) Askariga gacansiiya cadowga una basaasa, lana xiriira, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis buuxda.

(2) haddii basaasida iyo la xiriirida aysan dhib geysan ciqaabaataas waa la dhimi karaa.

(3) haddii la xiriirto balan qaad shaqo ee cadowga oo aan weli la aqbalin, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 15 sano xabsi meleteri ah.

Qod. 240aad. U sahlid kama ah:- askariga si kama ah u suurageliyo fulinta dembiyada ku xusan qaybta 1aad qodobka hore, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan falkaas khasaare ka dhalan, xaalad siyaasadeed ama mid ciidan ee qaranka soomaaliyeed xabsi dhan 3 ilaa 10 sano.

Qod. 241aad. Xccqs, La xiriirid sharci darro ah cadowga iyadoo aan loola jeedin gacansiin:- askariga gacansiiya cadowga asagoo aan uga dan lahayn gacansiinta lana xiriiray fasax la'aan kuna gefay xeerarka iyo awaamiirta madaxda isgaarsiin ama qoraala kale, hadday mid ama wax ka badan ee ciidamada cadowga ah ama shacbiga goobaha cadowgu haysto deggan, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 7 sano, haddii ruuxaasi uu arimahaasi uu caadaystay ama ay soo baxaan arrimo khatar ah ciqaabtu kama yaraan karto 10 sano xarig ah.

Qod. 242aad. Xccqs, Warbixin dagaal oo qiyaano ah ama ka beensheegid ah:-

(1) Askariga u xil saran hawlgelin oo keena warbixin been ah, waxaa lagu ciqabayaa haddii aan dembi ka culus ka dhalan ee dhaawacayo hawlaha ciidamada dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

(2) hadii si kama ah warbixintiisa qaldanayd ama beentaasi ka timid curyaaminta ku xusan qaybta hore ee qaybtaan waa 3 ilaa 15 sano xarig ciidan ah.

(3) haddii aysan ka imaan curyaamin, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 5 sano xarig ah.

Qod. 243aad, xccqs, Gacansiinta cadowga, u sawirada arrimaha deegaanka, siyaasadda iyo dhulka jamhuurioyada soomaaliya oo cadowgu qabsaday ama soo galay cidkastoo gacan ku siisa sawirada siyaasada dhulka la qabsaday ama la soo galay ama dhaawacaysa sharafta iyo haybada qaranka soomaaliyeed, waxaa lagu ciqabayaa xabsi dhan 10 ilaa 20 sano.

Qod. 244aad. Xccqs, Basaas ciidan waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis:-

(1) Askariga u gargaara cadowga oo u uruuriya ama iskudaya inuu aruuriyo dukumiinti ama qalab iyo aqbaar halis gelin karta amaanka goobaha xeryaha, jidadka maraakiibta ciidanka, gaadiidka, diyaaradaha ciidanka iyo kuwa xamuulka ah iyo meelkasta ciidanku leeyahay goobaha lagu kulmo, saldhigyada ciidamada qalabka sida, kuwa badda, cirka iyo goobaha ciidamada qaranka xitaa hadii uusan cadow soo gelin.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya, askariga ururiya dukumiinti, qalab iyo aqbaaraad uu gacan ku siinayo cadowga oo gala goobaha ciidamada oo lagu soo sheegay farqada 1aad ee qodobkan.

Qod. 245aad, xccqs, Askariga gala goobaha danaha ciidan asagoo is maldahaya:-

(1) Askariga gala asagoo is maldahaya meel ka mid ah goobaha lagu soo sheegay qodobka kore, waxaa lagu ciqabayaa xabsi daa'in.

(2) dembiilaha haday cadaato is maldahintiisa inuu lahaa qasad ka duwan u adeegida cadowga ciqaabtiisu waxay noqonaysaa 1 ilaa 4 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 246aad, xccqs. Askari cadow oo is maldahaya ee gala goobaha danaha ciidanka:-

(1) Askariga ciidamada cadowga iyo qofkasta oo u shaqeeya cadowga oo gala asagoo is maldahaya meel ka mid ah goobaha lagu tilmaamay qaybta 1aad qod.244aad xccqs, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah.

(2) hadii dembiiluhu uu soo lebisto dharka ciidanka xds, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo dhabarka looga dhufanayo.

Qod. 247aad. Xccqs, Gansiinrsiin ama cid kale oo u shaqaysa cadowga, waxaa lagu ciqabayaa dil & derejo ka qaadis.

Qod. 248aad. X-- Qof laga helay goobaha ciidan ee la fulinayo hawl ciidan:-

(1) Qofkasta oo laga helo waqtiga dagaalka asagoo jooga goobaha ciidanka ama ciidanka dhexdooda cudurdaar la'aan, waxaa lagu ciqabayaa 6 bilood ilaa 3 sano xarig ah.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofka fasax la'aan ku raaca hawlgalada ciidanka.

od. 249aad.ccqs, Faafin, soo bandhigid iyo qaybin wax ciidan:-

ofkasta oo aan ka haysan fasax madaxda ciidanka ee tusa ; faafiya, iibiya, qaybiya sawiro, sawiro cameedyo & maabab la xiriira ciidanka ama talo galkiisa, diyaar garowgiisa difaaca ciidanka ama eelaha ay ku sugan yihiin ciidanka qaranka soomaaliyeed iyo xulufadooda, waxaa lagu ciqaabayaa day ka dhalato khasaare sida uu qoraayo qaybta 1aad qod. 244 xccqs.

od. 250aad. Xccqs, qaadasho ama isticmaalid makiinadaha wax lagu sawiro, cidkasta oo fasax la'aan dhex qaadata ama sawirta hawlgalada ciidanka ama ku dhex sidata makiinada wax lagu sawiro oo ockasta ah, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 sano xabsi ah.

od. 251aad. Xccqs, U sheegid sir ciidan cadowga:-

(1) Askariga u sheega sir ciidan cadowga ama qayb ka mid ah sirta, xaaladaha ciidamada qalabka sida, kuwa dhulka, badda, cirka ama fulin hawlgal goobaha tilmaamaha waxkasta oo xaaladahooda ah, goobaha shidaalka, meelaha hubka iyo risaasta lagu keydiyo, cunada iyo lacagta garansiiya cadowga dukumiinti iyo qalab warbixin khatar ah keeni kara sida ku xusan

qaybta 1aad qod.244 xccqs oo ah gacansiin cadow iyo curyaamin ciidamada qaranka soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

(2) haddii falkaas aysan ka dhalan ka faa'iideysasho iyo curyaaminta ku xusan qodobkii hore, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in.

Qod. 252aad. Xccqs, Faafin xaalado sir ah oo aan loola jeedin gacansiin cadow:-

(1) Askariga faafiya asagoo aan uga jeedin inuu gacansiiyo cadowga asagoo aan fasax ka haysan madaxda xaq u leh aqbaar la xiriirta diyaar garowga ciidanka ama difaaca ciidamada qaranka soomaaliyeed oo loogu talo galay qarsoodi ama si gaar ah u urursada, waxaa lagu ciqabayaa xabsi aan ka yarayn ilaa 5 sano xabsi ciidan ah.

(2) hadii arintaa ay ka dhalato dhibaato wax yeelaysa diyaar garowga ciidanka iyo difaaca ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah xabadka looga fulinaayo.

Qod. 253aad. Xccqs, Ka shafid sir ciidan oo aan cadowga gacan lagu siin:-

(1) Askariga asagoo aan cadowga gacansiineyn faafiya, kashifa, dukumiinti, qalab iyo warbixin la xiriirta ciidanka diyaar garowgiisa iyo difaaciisa oo ahaan lahaa sir ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano xargi ah.

(2) hadii dembiiluhu ahaa mid ku ogaaday arintaas sabab la xiriirta xafiiskiisa, shaqadiisa ama hayay dukumiinti iyo qalab aalad, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan 15 sano ah.

(3) haddii arintaasi ay dhaawacdo diyaar garowga ama difaaca ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah.

Qod. 254aad. Xccqs, Askariga haya qabarka lagu soo sheegay qod. Hore ciqaabta ku qoran, waxaa lagu qaadayaa askariga hayay xaaladahaas qalabka ah iyo dukumiintiga asaga lagu ogaa.

Qod. 255aad. Xccqs, Ka dirid iyo balan qaad basaasnimo iyo faafin sirta ciidanka:-

(1) Askariga ku dhiiri geliya dad kale inay ku kacaan dembiyada ku xusan qod. 244,247 iyo 251 asagoo u balan qaadaya inay falkaas galaan, waxaa lagu ciqaabayaa ku dhiiri gelintiisa keliya xabsi dhan 15 sano.

(2) hadii ku dhiirigelinta ama balan qaadka uu noqdo midka ku xusan qod. 253 ciqaabtiisu waxay noqonaysaa 5 ilaa 15 sano

Qod. 256aad. Xccqs, U fududeyn kama ah:-

(1) Askariga sababa xafiiskiisa ama hawshiisa u xil saaraa xafidida iyo haynta waxyaabayha ku xusan qod. 244, 251, 252 iyo 253 xccqs oo sabab asaga ka timid ay u baxdo sirtaas asagoo ay si kama ah farihiisa uga baxday, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 10 sano xarig ah.

Qod. 257aad. Xccqs, Urursasho arimo qarsoodi ah:-

(1) Marka laga soo tago qodobka 244 cidkasta oo urursata aqbaaraadka la xiriira ciidanka hawlgalkiisa, difaaciisa meelaha uu deggan yahay, dhaqdhaqaaqiisa, asluubtiisa, hawlgalkiisa iyo wax kale oo aan sir ahayn, laakiin qarsoodi ahaa oo ay ahayd mabnuuc in la faafiyo, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan dembi culus ka dhalan meeshaas 2 ilaa 10 sano xargi ah.

Qod. 258aad. Xccqs, Faafin qabar qarsoodi ah:-

(1) Cidkasta oo soo bandhigta ama faafisa arimaha ku xusan qod. Hore, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 5 ilaa 20 sano xaxbsi ciidan ah.

(2) haddii arintu ay ku saabsan tahay diyaar garowga iyo difaaca ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 15 sano.

Qod. 259aad. Xccqs, U sahlid kama ah, cidkasta oo sabab xafiis ama shaqo u haysay aqbaaraadka ku xusan qod. 257 oo si sahal ah u fududeysa kama ahaan fulinta dembigaas, waxaa lagu ciqabayaa xarig dhan 6 bilood ilaa 5 sano

Qod. 260aad. Xccqs. Faafin xaalado gaar ah oo dano ciidan ah:- waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 2 sano ilaa 6 sano xarig ah, cidkasta oo faafisa arimaha ku xusan qod. 258 faafisa, daabacda ama si kasta ha u soo bandhigtee arin aysan fasaxin dowladdu ama taliyaha ciidamada.

(a) Tirada dhaawaca, dhimashada iyo inta la qabsaday.

(b) urursashada magacyada madaxda ciidanka.

(c) dhaqdhaqaaqa hawlgalka ciidanka dhulka, badda, cirka.

(d) ujeedooyinka la xiriira hawlgalka iyo socoshada dagaalka guud ahaan.

Qod. 261aad. Xccqs, faafin qabar ka duwan kii runta ahaa:-

(1) Cidkasta dad badan oo meel isugu yimid ama meelo kala duwan jooga uga waranta arimaha ku xusan qod. 257,260 aqbaar ka duwan mida dhabta ah gaar ahaan siisa dadweynaha, dowladda iyo taliyaha ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 3 sano xarig ah.

(2) haddii falku loola jeedo in qalqal lagu geliyo deganaanshaha dadweynaha laguna dhaawacayo danaha guud ciqaabtu waxay noqonaysaa 1 ilaa 5 sano xarig ah.

Qod. 262aad. Xccqs, Faafin warbeen ah oo wax loogu dhimaayo nabadgalyada guud ama dano gaar ah:-

(1) Marka laga soo tago xaaladaha ku xusan qod.208 xc. Cidkasta oo faafisa arimo la xiriira nabadgalayada guud dhaqaalaha qaranka iyo dano gaar ah qabar ka duwan kii runta ahaa kaasoo wax u dhimi kara nabadgalyada guud ama dhibaatayn kara dano gaar ah, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 3 sano xarig ah.

(2) ciqaabtu waxay noqonaysaa xarig ciidan oo dhan 1 ilaa 5 sano haddii loola jeeday in qalqal lagu geliyo nabadgalyada guud danaha gaarka ah.

Qod. 263aad, xccqs, Waraaqo ugu gudbin iyo qoraalo:- cidkasta oo goobaha dagaalka ka soo dirta waraaqo ama qoraale goobaha dagaalka meelkasta ha ku hagaajisa aqbaaraadka lagu tilmaamay qod. 257-260- 262, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 264aad. Xccqs, Xaaladaha hawlgalka ciidanka ee dowladaha nala jooga:- sida ku xusan qodobada hore qofka tilmaama arin ku saabsan hawlgal ciidan oo ay fulinayso dowladda soomaaliyeed una sheega dowladaha nala jooga xitaa hadii aysan cadow ahayn.

Qod. 265aad. Xccqs, Faafin dood ama qoraalo kicin ah:- cid kasta oo waqtiga dagaalka faafisa doodo ama qoraalo kicin ah oo la xiriira hawlgalka ciidanka iyo sida dagaalka u socodo, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 2 sano xabsi ah.

Qod. 266aad. Xccqs, Dembiyada lagu galo meel ka baxsan goobaha dagaalka:- marka laga soo tago xaaladaha ku xusan qod. 263 iyo qaybaha ka horeeya, waxaa lagu ciqaabayaa sida qodobada ku xusan xitaa hadduu dembigu ku galay meel aan dagaal ka socon.

Qod. 267aad. Xccqs, Gacansiin Dowladda Soomaaliyeed:-

(1) Dembiyada ku xusan madaxyada hore ciqaabta ka reebi maayaan hadduu falkaas u sameeyo inuu gacan ku siiyo dowladda soomaaliyeed.

(2) hase yeeshee waa la dhimi karaa ciqaabta.

Qod. 268aad. Xcqs, Gudbin la'aan warbixin:-

(1) Askariga ogaada khatar la xiriirta dembiyada lagu xusay madaxyada hore oo sharcigu tilmaamayo inay xarig ciidan tahay oo aan ka yarayn 5 sano ka badan oo aan si degdeg ah warbixin uga siin madaxdiisa, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 6 biloodc ilaa 3 sano xabsi ciidan ah.

(2) hadduu sarkaal yahay ninka galay dembiga, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan oo dhan 2 ilaa 4 sano.

Qod. 269aad. Xccqs, Dhibaateyn ciidamo aan isbahaysi leenahay:- ciqaabta ku xusan qod.235 xccqs, waxaa loo raacayaa haddii dembiga laga galay dowlad isbahaysi dalka soomaaliyeed.

Qod. 270aad. Xccqs, Fal dembiyeed iyo ciqaabtiis:-

(1) Cidkasta oo ku hoggaamisa, askariga inuu ka soo jeesto dhinaca cadowga ama ay ka muuqato inuu ku faraxsan yahay falkaas, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofkasta oo cadowga u qora ciidan ama hubeeya si loogala soo horjeesto qaranka soomaaliyeed, xitaa haddii qofkaasi uu yahay ruux aan ka mid ahayn ciidamada qaranka soomaaliyeed.

Qod. 271aad. Xccqs, Arin toos ah oo dhalisa hakin ama joojim hawlaha Nabadda &Dagaalka:-

(1) Cid kasta oo ku khasabta dowladda soomaaliyeed inay joojiso dagaalka ama ay hakiso nabadda, waxaa lagu ciqaabayaa hadii aan dembi ka weyn ka dhalan 10 sano xabsi ah.

(2) hadii falkaas uu galo ruux ciidan ah ciqaabtu kama yaraan karto ilaa 15 sano xabsi ciidan ah.

(3) hadii ay falkaas isu kaashadaan dad badan oo ciidanka ka mid, waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis.

Qod. 272aad. Xccqs, Ku Sharaf Jebin Dagaal:-

(1) Marka laga soo tago xaaladaha ku xusan qod. 208 ccc qofkasta oo yasa dagaalka si cadaan ah ama muujiya ceebeyn hadal ah oo looga soo horjeedo xaaladaha dagaalka iyo qaab socodkiisa ama lagu aflagaadaynaayo ciidanka q.s. & kuwa ka tirsan, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xarig ah.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaaya kan falkaas u soo mara si sharaf jebin ah, hadal ah, yasid ah, asagoo qoraalo u gudbinaya ciidamo kale meelkasta ha joogaane.

(3) haddii dembiiluhu yahay sarkaal ciqaabtu waa la kordhinayaa.

Qod. 273aad. Xccqs, Gudbin la'aan qoraalo ama faafin cadowgu sameeyay:- waxaa lagu ciqaabayaa xarig ciidan oo dhan 1 sano ilaa 5 sano xabsi ciidan ah, cidkasta oo hesha qoraalo ama faafin daabacan ama gacan lagu qoray ama wax kale oo cadowgu ka tegay oo soo gaaray gacantiisa oo aan si degdeg ah ugu gudbin madaxdiisa ama boliiska, laamaha kale ee dowladda oo shaqada ku leh.

Qod. 274aad. Xccs, U heshiin ciidan inay galaan dembiyo qayaano qaran ah ama kuwa difaaca ka soo horjeeda:-

(1) haddii ciidan badan ay u heshiiyaan inay galaan dembiyada ah nafta, degganaanshada, xoriyada qaaska ah, xoriyada guud oo lagu xusay qod. 234 xccqs iyo qodobada kale 235-236-244-251 iyo 271 qof kasta oo dadkaas ka mida u heshiinta falkaas keliya waxay ku mutaysanayaan xarig aan ka yarayn 15 sano.

(2) la ciqaabi mayo askariga heshiiskaas ka baxa inta aan fal dembiyeedka lagu dhaqaaqin ama ka hortaga oo qabta ama soo dacweeya.

(3) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya haddii ciidamo badan ay ku heshiiyaan afgembi iyo degganaansho la'aan ama xoriyada qofka oo lagu tilmaamay qod. 64 xcc waqtiga nabadda.

Qod. 275aad. XCCQS, SOO SHEEGIS LA'AAN:-

(1) Askariga ogaada dembiga lagu soo tilmaamay qodobada hore oo aan soo sheegin ama kala daaha in uu u soo gudbiyo madaxdiisa, waxaa lagu ciqabayaa 6 bilood ilaa 2 sano xarig ah.

(2) haddii dembiiluhu sarkaal yahay ciqaabtu waa la kordhinayaa.

Qod. 276aad. Xccqs, Duulis sharci daro ah oo looga baxaayo hawada dalka:-

(1) Cid kasta oo fasax la'aan duulisa dayaarad ama qalab hawo oo ka baxda hawada soomaaliya, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 3 sano xarig ah.

(2) Ciqaabta waxaa lagu kordhinayaa 3/1 ama kala bar haddii duuliyuhu uu qaadan waayo amarka la siiyey inuu soo dego.

Qod. 277aad.xccqs, NOOCA DEMBIGA & CIQAABTIISA:-

(1) Cid kasta oo fasax la'aan hay'adaha awooda u leh ama iskudayda inay u faafiso dibada si toos ah ama si dadban sabab kasta & nooc kasta arimo la xiriira iqtiraac la soo saaray (qalab cusub) sida gantaal oo la xiriira difaaca ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

(2) isla ciqaabtaas waxaa la saarayaa cid kasta oo u fududeysa in dibada lagu faafiyo.

(3) cidkasta oo ka hor istaagi weyda dhanmaan awoodeeda inaan arintaasi dibada u bixin , waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xarig ah.

(4) haddii dembiiluhu uu arimaha kor ka xusan galay uu yahay midka danaynaya bixinta warka ciqaabtiisu kama yaraan karto 2 sano xarig ah.

(5) haddii warka bixintiisa ay u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa xabsi ciidan oo 3 sano ah.

Qod. 278aad. Xccqs, NOOCA DEMBIGA CIQAABTIISA:- waxaa lagu qiyaasaa xabsi ciidan oo dhan 2 sano haddii aan dembigu intaas ka cuskeyn, cid kasta oo dhowri wayda ama u hoggaansami wayda amar uu soo saaray iyo go'aan ka soo baxay hay'adaha ciidamada oo lagu dhawraayo difaaca ciidanka laguna habaynaayo si gaar ah goobaha dagaalka ciidanka.

(a) Joojinta ku socoshada marida joogsasiada ama istaagida:-

(b) Ka dhawrida calaamooyinka tusi kara diyaaradaha cadowga.

(c) senyaaleyn habeen iyo maalin.

(d) ka dhowrida qiiqa & saqrada.

(e) isticmaalka teleefoonada, fooniyaha, telgaraamka iyo qalabka kale diyaaradaha lagula hadlo.

(f) ugaarsashada ama kaluumaysi

Qod.279aad. Xccqs, KA TEGID TALIYE:-

(1) Taliyaha cudurdaar la'aan ka taga ama ka dhaqaaqa madaxtinimada marka dagaalku socdo ayadoo cadowguna joogo, taasoo keeni karta khatar ku timaada nabadgalyada ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka loogu fuliyo.

(2) haddii falkaas la galo marar kale oo khatari imaan kartay taliyaha waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 15 sano xabsi ciidan ah.

(3) waxaa ka baxsan arintaas haddii falku u dhaco oo ka duwan labada qaybood ee hore, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 2 sano xargi ciidan ah.

(4) Xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

(5) sharciga ciqaabta ciidamadu wuxuu u yaqaanaa dembigaan marka uu dhacayo waqtiga dagaalka socdo oo iska hor imaadyadu jiraan ama bilaaban rabaan.

Qod. 280aad. Xccqs, Dhawris la'aan amar ahaa in aan la weerarin cadowga:- taliyaha ayadoo aan wax baahiya aysan jirin weerara cadowga asagoo khilaafaya amarada madaxdiisa sare, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho xabadka ah.

Qod. 281aad. Xccqs, dhawris la'aan waajibaad gaar ah oo la xiriira taliyaha:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

(2) taliyaha ciidanka, qaybta, guutada, maraakiib badan ama hal markab hal dayaarad ama dayaarado badan.

(a) Asagoo aan haysan amarkii hore oo la siiyey mid ka duwan iyo sabab cad weerari waaya cadowga oo hakiya dagaalka ama aan gargaar u fidin ciidamada dhulka, maraakiibta iyo diyaaradaha cadowga dagaal kula jira ama la daba socda.

(b) sabab la'aan gaar ah haddii aysan ku qasbin ka joogsashada, dabagalka iyo ugaarsiga cadowga maraakiibta ciidanka iyo kuwa ganacsiga ama diyaaradaha ciidan oo cararaya.

(c) sabab la'aan ugu gargaari waaya maraakiib iyo dayuurado u baahan inuu gacansiiyo oo khatar ku jira ama diida markab kuwa ganacsiga ee qaranka ama dayuuradaha qaranku leeyahay ama kuwa isbahaysiga nala leh oo uu awoodo inuu gacansiiyo.

(d) ciqaabta waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 282aad. Xccqs, Gudasho la'aan waajibaadka difaaca ciidanka:-

(1) Taliyaha si kama ah ay ugu timaado in weerarka lagala hor maro, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 5 sano xarig ah.

(2) ciqaabta waxaa la raacinayaa sharaf ka qaadis.

Qod. 283aad. Xccqs, GUDASHO LA'AAN WAAJIBAADKA DIFAACA CIIDANKA:-

(1) Taliyaha si kama ah u gudan waaya una qaadan waaya talaabooyinka loo baahan yahay ee difaaca xerada barxada iyo goobta hawsha markab ama dayuuradaha oo asagu madaxda ka yahay ama ka gaabiya inay cadowga iska reebaan, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xabsi ciidan ah.

(2) ciqaabtu waxay noqoneysaa 1 ilaa 5 sano haddii xaaladaas khasaaro ciidan ka dhasho iyo mid shaqo.

(3) ciqaabta waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 284aad. Xccqs, ARRIMAHA DEMBIYADA CUSLEEYA:-

(1) Sida ku xusan 2da qodob ee hore, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ciidan.

(a) Xabsi dhan 2 ilaa 7 sano ah, haddii falkaas ka dhasho awood la'aan hawsha lagu fulin waayo goobta dagaalka ama cadowga weerarkiisa ama in ciidanka uu u adkeysan waayo is difaacida.

(b) xabsi dhan 15 ilaa 24 sano, haddii ay ka dhalato in la qabsado xerada, garoonka iyo goobta shaqada markab ama dayuurad. (2) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 285aad. Xccqs, Fulin La'aan Shaqo Loo Xil Saaray:-

(1) Taliyaha sabab la'aan shaqo loo xil saaray amar hawl ciidan ah oo loo xil saaray lagu aaminay, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho oo xabadka looga fulinaayo.

(2) haddii ay soo baxaan xaalado qaas ah oo masuuliyadiisa yareyn kara, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 5 sano.

(3) haddii amarka uu u fulin waayo sabab kama ah ciqaabtiisu waxay noqoneysaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

(4) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 286aad. Xccqs, dhawris la'aan tilmaan la siiyey:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 5 sano oo ciidan askariga loo xil saaray hawl ciidan ama mishin gaar ah oo aan dhowrin sabab la'aan tilmaamihii la siiyey haddii ay ka timaado fulin la'aan arimahaas.

(2) haddii xilkaas uu si xum u fuliyo arimo kama ah asagoo awooda, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 287aad. Xccqs, Xafidaad la'aan iyo ilaalin la'aan dukumiinti iyo waraaqo kaartooyinka dagaalka-

(1) Taliyaha marka la qabto ama uu is dhiibo aan si taxadir leh u baabi'inin ama u qarin dukumiintigaas si aan loo furan waqti iyo goob ay yaalaan maraakiib iyo dayuurado.

(2) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 285aad. Xccqs, Fulin la'aan shaqo loo xil saaray:-

(1) Taliyaha sabab la'aan fulin waaya amar hawl ciidan ah oo loo xil saaray laguna aaminay, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho oo xabadka looga fulinaayo.

(2) haddii ay soo baxaan xaalado qaas ah oo masuuliyadiisa yareyn kara, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 5 sano.

(3) haddii amarka uu u fulin waayo sabab kama ah ciqaabtiisu waxay noqonaysaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

(4) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 288aad. Xccqs, dhawwris la'aan tilmaan la siiyey:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 5 sano oo ciidan, askariga loo xil saaray hawl ciidanama mishin gaar ah oo aan dhawrin sabab la'aan tilmaamihii la siiyey haddii ay ka timaado fulin la'aan arimahaas.

(2) hadii xilkaas uu si xun u fuliyo arimo kama aawadood, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 3 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 289aad. xccqs, Xafidaad la'aan iyo ilaalin la'aan dukumiinti iyo waraaqo kaartooyinka dagaalka:-

(1) Taliyaha marka la qabto ama uu is dhiibo aan si taxadar leh u baabi'in ama u qarin dukumiintigaas si aan loo furan waqti iyo goob kuna dhaca gacanta cadowga una sahli kara inuu khasaareeyo awooda ciidanka ama difaaciisa adkaysiga, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sano ilaa 8 sano xarig ah.

Qod. 288aad. Xcqs, Is dhiibid, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka looga fuliyo, taliyaha dhiiba xarunta, garoonka, goobta diyaaradaha ama dejiya calanka markabka oo muujiya calaamado is dhiibid ah asagoo aan ku dhaqaaqin waxkasta oo is difaaciisa ah ama adkeysi ah asagoo aan dhawrin waajibaadkiisa iyo sharaftiisa.

QOD. 290AAD. XCCQS, ISHIIBID KAMA AH:-

(1) Taliyaha gudan waaya sabab kama ah darteed waxyaabihii loo baahnaa is difaaciisa la xiriiray ama iska caabinta cadowga oo is dhiiba, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi 15 sano ah.

(2) haddii aysan soo baxaan arimo gaar ah oo yareynaya masuuliyadiisa ciqaabta waa la dhimayaa.

Qod. 290:- is dhiibid ku timaada sabab kacdoon ama dembiyo kale:-haddii is dhiibidu ku timaado is maqal la'aan, kala amar qaadasho la'aan ama kacdoon taliyaha & saraakiisha kale oo aan samayn waxkasta oo is hortaagi kara arintaas oo aan ku qasbin ciidankooda inay fuliyaan waajibaadkooda, waxaa lagu ciqaabayaa arintaas keliya xabsi ilaa 3 sano ah iyadoo meel la iska dhigaayo xaaladaha ku xusan qodobka 122xcc waqtiga nabada.

QOD. 291AAD. XCCQS, IS DHIIBID XARO FURAN:

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka looga fuliyo taliyaha xaro furan ee ciidan ama urur is dhiiba asagoo aan samayn waajibaadkii saamaa ilaalinta shararftiisa.

(2) haddii ay soo baxaan xaalado qaas ah oo fududeeya masuuliyada ciqaabtu waxay noqoneysaa 2 sano ilaa 15 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 292aad. Xccqs, ku xadgub kelinimo marka la is dhiibo,taliyaha marka la is dhiibo ka dhex baxa ciidankiisa ama saraakiishiisa, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka looga fuliyo.

Qod. 293aad. Xccqs, Muujin Sharci Darro ah iyo Isdhiibid:- taliyaha ama askariga waqtiga dagaalka amarka madaxdiisa la'aanteed dejiyo calanka ama bixiya tilmaamo kale oo is dhiibid ah ama xabad joojin, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah xabadka looga fuliyo.

Qod. 294aad. Xccqs, ku dhiiri gelin is dhiibid, askariga waqtiga dagaalka amarka taliyihiisa la'aanteed ku dhiiri geliya in la is dhiibo, xabada la joojiyo, calanka la dejiyo iyo noockasta is dhiibid ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 10 sano.

QOD. 295AAD. XCCQS, XARAKEYN DOOONNIMO:-

(1) Askariga waqtiga dagaalka ama khatarta culus ay jirto muujiya calaamado wax u dhimi kara ama argagixin kara oo ku dhaliya ciidanka, is maqal la'aan meelkastoo ay ku sugan yihiin, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 6 bilood ilaa 5 sano.

(2) haddii argagaxa iyo is maqal la'aanta ay fuliyaan, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano ilaa 10 sano.

(3) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod, 296aad, xccqs, Arimaha dembiyada cusleeya, sida ku xusan 2dii qodob ee hore haddii arintaas ay ka dhalato awood yari dagaalka iyo adkeysiga difaaca dhulka iyo badda, ciqaabtu waxay noqonaysaa dil toogasho xabadka ah.

Qod. 297aad. Xccqs. Is urursasho sharci darro ah waqtiga dagaalka & googoyn:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka loogu fulinaayo askariga waqtiga dagaalka.

(a) Googooya,. Fogaada ama ku dhiiri geliya ciidanka inay fogaadaan.

(b) ka dhuunta dagaalka asagoo iska dhigay saqraan, curyaan ama waalan ama sameeya waxkastoo noocaas ah.

(c) tuura qoriga iyo risaasta.

(d) diida inuu u socdo cadowga ama fuliya hawlgal dagaal ama wax kastoo suuragal ah isku difaaci waayo oo isu dhiiba cadowga asagoo aan samayn wax adkeysi ah.

OD. 298AAD. XCCQS, FAL JAMAC AH:-

(1) Xaaladaha ku xusan qodobada hore haddii si jamac ah ay u galaan ciidan badan ciqaabtu waxay noqoneysaa dil toogasho ah, kuwa ka dambeeyay falkaas ururintiisa inta kale ciqaabtoodu waxay noqonaysaa xabsi 10 sano ah.

(2) kukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

od. 299aad.xccqs, ka hor istaagi la'aan qas iyo waxyeelo kale oo doqonimo ah:-

(1) Askariga cabsi daraadeed iyo sabab kale oo la qaadan karo darteed uga hor joogsan waaya inay dhacaan xaaladaha ku xusan qod.297 xccqs oo hortiisa lagu samaynaayo, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano oo xabsi ciidan ah.

od. 300aad. Xccqs, Is Curyaamin Iyo Isu Ekeysiin Jiis:-

(1) Marka laga soo tago arimaha ku xusan qod. 297aad xcc dembiyada is curyaaminta iyo jiisnimada oo la iskula kaco waqtiga dagaalka, waxaa loo raacayaa ciqaabta ku xusan qodobada 141-147 xcc waqtiga nabadda oo lagu kordhiyay kala bar ama 2 meel ciqaabta ku xusan qodobadaas.

(2) isla ciqaabtaas waxaa lagu qaadaa dadka la soo qoray, kuwa la ruqseeyay haday galaan dembiyada marka ay yihiin dhibowga ama ruqsadda inta aan loo yeerin.

(3) askarig si toos ah loo ruqseeyey oo gala xaaladahaan isla ciqaabtaas ayuu marayaa marka looga yeero hawsha ciidanka hadduu soo sameeyey falkaas intuu dibada jiray.

od. 301aad. Xccqs, Ka leexin shaqo gaar ah ama ciidamada dhaqdhaqaaqa:-

(1) Cidkasta oo si sharci darro ah ugu sameysa caddeyn ama wax kale oo keeni kara in laga joojiyo ama laga weeciyo qof hawl uu qaban karay oo la xiriirta culeysyada dagaalka si aan loogu qorin qaybaha ciidanka ama hay'adaha guurguura ee ciidanka uu ka tirsan yahay iyo farsamada gaarka ah ee uu yaqaan qofkaasi, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 5 sano xarig ah.

(2) ciqaabta.

(a) Xariga dhan 3 ilaa 5 sano haddii dembiiluhu yahay sarkaal guud, dhaqtar ka wax qala iyo qofkasta oo ka shaqeeya caafimaadka.

(b) xabsi dhan 5 ilaa 10 sano haddii dembiiluhu sarkaal. Yahay.

(3) Askariga hawshaas ku tilmaaman qaybta hore ee qodobkan ee aan lagu qorin shaqooyinkii ku waajibay ee fadhigiisa kuwa guur guura ee ciidankiisa iyo haddii shaqo gaar ah uu lahaa, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 ilaa 5 sano.

Qod. 302aad. Xccqs, Qayaano Uga Joojin Shaqada Ciidanka:-

(1) Cidkasta sabab xafiiskeeda ama awoodeeda uga joojisa shaqada ciidanka kuwa hawsha laga saaray oo loogu yeeray shaqada ciidanka samaysa si been abuur ah shaqo ka joojin, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 5 sano xarig ah.

(2) waxaa isla ciqaabtaas mutaysanaya cidkasta oo ku qasbanayd inay ka mid noqoto ciidanka oo loo sameeyey hawl ka joojintaas oo aan soo sheegin sida xaaladeedu tahay waqtiga loo qabtay.

(3) askariga ka faa'iideystay hawl ka joojintaas sharci darro ah, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano ilaa 5 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 303aad. Xccqs, Xadgudub Fuleynimo Iyo Waajib Gudasho La'aan:-

(1) Askariga cabsi daraadeed khatar naftiisa ah ugu xad gudba inuu gudan waayo waajibaadkiisa shaqo iyo asluubeed, waxaa lagu ciqaabayaa haddii arintu aysan keenayn dembi culus xabsi dhan 2 sano xarig ah.

Qod. 304aad. Xccqs, Ka Tegid Goob Shaqo Waqitga Dagaalka:-

(1) Askariga ka taga waqtiga dagaalka goobta, waxaa lagu ciqaabayaa dil togasho ah xabadka ah.

(2) haddii arintaas ay qayb ka noqdaan ciidamo badan, waxaa loo raacayaa ciqaabta uu qorayo qod. 298 xccqs.

Qod. 305aad. Xccqs, Taliyaha aan Xagsan Goobta Dagaalka:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah, taliyaha aan xagsan markabka, diyaarada iyo goobta dagaalku ka socdo ee uu ku magacaaban yahay.

(2) haddii falku u dhaco si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa 10 sano xarig ah.

Qod. 306aad. Xccqs, ka leexasho ciidan:-

(1) Taliyaha hoggaaminaya nooca ciidanka badda iyo kuwa cirka oo ka leexda ciidankiisa asagoo ku qasbanaaday si kama ah ama sababo macquul ah oo awoodi waaya inuu isu soo uriiyo ciidanka uu madaxda u yahyay waqtiga gaaban, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 5 sano xabsi ciidan ah.

(2) waxaa lagu ciqaabayaa dil xabadka loogu fulinaayo haddii falkaas dhaco iyadoo dagaal socdo ama cadow la horjoogo.

(3) haddii ay arintu u dhacdo si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa 6 sano xarig ah.

(4) isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya askari kasta oo sameeya falka ku xusan qaybaha hore ee qodobkaan.

Qod. 307aad. Xccqs, Ka Tegid Ciidan Guuraya Ama Wax Ilaalinaya:-

(1) Taliyaha wax ilaalinaya ama ciidan guuraya ee ka taga, waxaa lagu ciqaabayaa 7 ilaa 15 sano xabsi ciidan ah.

(2) sababtaas daraadeed, haddii ciidanku qayb ka mida ah ay u gacan gasho cadow, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah xabadka ah.

qod. 308aad. Xccqs, ka tegid shaqo khilaafid amar waardiye, eege ama dhegeyste:-

(1) Askarigii isagoo ilaaliye ah ama eege ah ama dhegeyste ah ka taga goobta asagoo khilaafaya amarkii la siiyey, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii falkaasi dhaco ayadoo cadowgu uu joogo ciqabtu kama yaraan karto 15 sano xarig ah, haddii ka dhalato arintaas khatar ku timaada goobta markabka, diyaaradaha ama ciidanku, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah.

(3) tilmaamaha ku xusan qaybaha hore ee qodobkaan, waxaa lagu ciqaabayaa oo kale.

(a) Askariga ama wakiilka xoogaga shacbiga oo deganaa goobta lagala xiriiro teleefoonka ama telagaraamka ama kuwa isgaarsiinta iyo kuwa gaadiidka oo la doonayo in ay dhawraan hawshaas.

(b) Ciidamada iskoortada, noockasta gaadiidka dhulka, badda iyo cirka oo amar ku qabay in ay meel gaarsiiyaan.

(4) Askariga isagoo ilaaliye ah, eege, dhegeyste ee iska hurda, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 309aad. Xccqs, ka tegid goob shaqo, ka leexasho amar shaqo ciidan, ilaaliye ama shaqeeyaha:-

(1) Marka laga tago qodobka hore arimaha ku xusan, askariga ka taga goobta uu shaqada ilaaliyaha ka leeyahay ama shaqo kale oo khilaafa amaradii la siiyay, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 7 sano.

(2) Haddii goobta dembiga lagu galay ay tahay meel uu cadow joogo ciqaabtu waxay noqonaysaa 7 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah, haddii ay wax u dhinto nabadgalyada goobta, marakabka, diyaaradaha ama ciidanka ciqabtiisu kama yaraan karto 15 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 310aad. Xccqs, Ka Baaqasho Gaarid Goobeed:-

(1) Askariga ka baaqsada sabab la'aan inuu gaaro goobtiisa marka uu dhaco alaarmi ama kulanka ciidanka ama goob dagaal, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah, haddii uu ka lumo goobta dagaalka waqti dagaal socdo, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho xabadka ah.

(2) marka laga soo tago xaaladaha ku xusan qaybtan hore, askariga ka baaqsada inuu gaaro sabab la'aan isu yeerida guud iyo alaarmiga xerada, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 3 sano xabsi ciidan ah, haddii goobta cadow joogo 3 ilaa 7 sano.

Qod. 311aad. Xccqs, Fakin maxaabiis dagaal sabab ilaaliyaha ka timid:-

(1) Askariga u xil saran kaxeynta, ilaalinta iyo heynta maxaabiista dagaalka oo u fududeeya ama u sahla baxsashadooda, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii baxsigu ku yimaado si kama ah askariga u xil saaran hawshaas, waxaa lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 2 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 312aad. Xccqs, KA TEGID MARKAB AMA DAYUURAD:-

(1) Wadaha ka taga markabka ciidanka ama maraakiib uu hoggaaminaayay ee uu ilaaliye ka ahaa oo ciidanka ku jahaysnaa oo asaga lagu aaminay, waxaa lagu ciqaabayaa 2 ilaa 7 sano xarig ciidan ah,

(2) haddii arintaas ay ka timaado khatar ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi dhan 5 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah, haddii goobtu ay tahay mid cadow joogo ciqaabtu waxay noqonaysaa xabsi daa'in.

(3) isla ciqaabtaas, waxaa lagu fulinayaa dadka ka hawl gala wadista dayuuradaha iyo maraakiibta iyo shaqo kasta oo ay ka qabtaan.

Qod. 313aad. Xccqs, Furasho, qaadasho, been abuurid, wax ka belid iyo geyn la'aan amaro boosto:-

(1) Askariga furta, qaata, been abuura ama aan geyn amaro qoraalo ah oo loo dhiibay noockasta oo ay ahaadaan asagoo u xil saaran inuu qaado oo geeyo, waxaa lagu ciqaabayaa hadddii aan dembi weyn ka dhicin 3 ilaa 10 sano xabsi ah.

(2) isla ciqaabtaas waxaa lagu fulinayaa askariga u xil saaran hawsha isgaarsiinta, telgaraamka, raadiyayaassha. Teleefonada & iwm. Sameeya si xun u been abuura amaradii ku qornaa qoraaladaas ama wax ka bedela dukumiintigaas hawshiisa la xiriirta.

(3) haddii falku u dhaco mid halis ah gelinaaya amaanka qaranka, kan ciidanka, dhulka, badda iyo hawada, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho xabadka ah.

od. 314aad. Xccqs, Baabi'in la'aan amaro qoraal ah iyo dukumiinti marka ay khatari ay timaado:-

(1) Askariga xaaladiisu khatar ay tahay inuu u gacan galocadowga ee ka baaqsada inuu baabi'yo amaro qoraal ah oo uu siday iyo dukumiinti asaga lagu ogaa inuu meel kale geeyo, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

od. 315aad. Xccqs, lumin kama ah amaro & boosto:-

(1) Askariga lumiya si kama ah amaro iyo boosto qoraal ah ama dukumiinti nooc kasta ah oo uu u xil saarnaa inuu geeyo, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

od. 316aad. Xccqs, Lumin Kama ah Amaro Boosto:-

) Askariga lumiya si kama ah amaro qoraal ah ama dukumiinti noockasta ah oo uu u xil saarnaa inuu ;eyo waxaa lagu ciqabaayaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

od. 317aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga fududeeya:-

(1) Sida ku xusan 2da qodob ee hore haddii ay soo gudboonaadaan amaro qaas ah oo fududeeyn kara masuuliyada dembiilaha ciqaabta waxaa la dhimayaa 3/1 ama 2 meelood meel.

od. 318AAD. XCCQS, Faafin wax ku qoran amaro iyo boosto:-

(1) Askariga u xil saaran shaqada isgaarsiinta teelagaraamyada, raadiyayaasha & teleefoonada oo faafiya amarada ku qoran oo la xiriira shaqada lagu aaminay inuu diro, qabto, gudbiyo, waxaa lagu ciqaabayaa hadddi aan dembi ka weyn ka imaan 1 ilaa 5 sano xabsi ciidan ah haddii dukumiintigu yahay mid sir ah oo shaqada la xiriira ciqaabtu waxay noqonaysaa 5 ilaa 10 sano xabsi ah.

od, 319:- Saqraanimo Shaqada looga dhuumanayo:-

1- Marka laga soo tago xaaladaha ku xusan xarafka (B) ee Qod.297 XCQS Askariga si uu shaqada uga dhuunto muujiya saqraanimo aqliga ka qaada lumisana awoodiisa wax qabasho waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah.

2- Haddii ay tahay meesha falku kla dhacay inuu cadow joogo xarigiisu kama yaraan karo 7 sano.

3- Haddii ruuxa dembiga galay uu yahay Taliyaha fadhiga ama madax Ilaaliyaha ciqaabta waa la kor dhinaya.

4- Xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

od. 320aad. Xccqs, Saqrad Shaqada Dhexdeeda Ah:-

(1) Askariga u xil saaran hawl noockasta oo ay ka muuqato saqrad ha ahaado kome oo keenta inuu aqligiisa lumiyo hawshiina gaba, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ciidan ah.

(2) Hadii goobta falku ka dhacay cadow uu joogo ciqaabtu kama yaraan karto 5 sano xabsi ciidan ah.

(3) Haddii cidda falka gashay tahay taliyaha fadhiga ama madaxa ilaaliyaasha ciqabtu waa la kordhinayaa.

(4) xukunka waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 321aad. Xccqs, Saqrad Shaqada Banaankeeda Ah:-

(1) Marka laga soo tago arimaha ku xusan 2 qodob ee hore askariga ku saqraama banaanka, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 322aad. Xccqs, Maandooriye isticmaal xashiishad:- sida ka muuqata qodobada hore saqradu waxay ka timaadaa dhimir rogmasho, iyadoo la isticmaalay waxyaabaha maanka dooriya sida xashiishada, qamriga ama waxkasta oo maanka dooriya oo la isticmaalo.

Qod. 323aad. Xccqs, Ku Xadgudub Amar:-

(1) Askariga ku xadgudba nooc kasta oo amar ah, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii falkaan lagu galo hub ama 3 qof wixii ka badan oo isu yimid ama ay ka timaado khasaaro culus ciqaabtu waa la kordhinayaa.

(3) haddii falkaas la galo waqtiga dagaalka ama cadowga oo jooga, ciqaabtu waxay noqonaysaa 5 ilaa 15 sano xabsi ciidan ah, hadddii amarku uu la xiriiray amaanka qayb ka mid ah ciidamada dhulka, badda iyo dayuuradaha ciidamo ku sugan meel loo cayimay, haddii ay keento gudasho waajib hawleed iyo hawlgal ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah.

Qod. 324aad. Xccqs, Hor Istaagid, Handadaad, Af Lagaadeyn Ilaaliye, Eege Iyo Dhegeyste:-

(1) Askariga aan u hoggaansamin tilmaamaha uu siiyo ilaaliyaha, eegaha iyo dhegeystaha ee fulinaaya amaro la siiyey, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 3 sano xabsi ciidan ah.

(2) ciqaabtu waxay noqonaysaa 2 ilaa 5 sano xabsi ciidan ah askariga hanhada ama aflagaadeeya ilaaliyaha, eegaha iyo dhegeystaha.

Qod. 325aad. Xccqs, Hujuumid ilaaliye, dhegeyste iyo eege:-

(1) Askariga hujuuma ilaaliyaha, dhegeystaha iyo eegaha, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii hajuunka loo isticmaalo hub ama dad badan oo isu yimid ciqaabtu waxay noqonaysaa 15 sano xabsi ah, hadddii arinta ay ka dhalato xaalad wax u dhimaysa nabadgalyada goobta, marakabka & dayaarada, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho xanad ah.

(3) sida ku xusan 2da qaybood ee hore haddii falku uu ka dhasho dembi ka culus ee sharciga ciqaabta guud uu xadeynaayo, waxaa lagu ciqaabayaa isla sharcigaas wuxuu qabo waana la kordhinayaa ciqaabta.

)od. 326aad. Afiagaadeyn qof shaqo gaar ah haya:-

(1) Sida ku xusan 3da qodob ee hore iyo qod. 127 xccqs, waqtiga nabadda oo ku saabsan is hortaagida ciidamada, waxaa loo raacayaa sida qodobadaas ay qabaan.

(a) Askariga ama wakiilka ciidanka nabadgalyada ee ku sugan goobaha telegaraamyada, fooniyaha, isgaarsiinta, gaadiidka lagu dhowraayo amaankooda.

(b) ciidamada iskoordada ah iyo gaadiidka dhulka, badda iyo cirka ee hawl gaar ah u socda

od. 327aqad. Xccqs, Is hortaag qof sida amaro ciidan:-

(1) Askariga hujuuma, qiyaaneeya, hakiya askari ama qof kale oo raaci lahaa dayaarad, gaadiid si uu u geeyo amaro loo dhiibay ama ka xada qalabkii uu waday ama hor istaaga in aan la dirin amaradaas, waxaa lagu ciqaabayaa 10 ilaa 20 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii xaaladaas ay ka dhalato arimo amaanka khatar gelin kara amaanka qaranka qayb ka mid ah, ciidamada dhulka, badda iyo circa, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho xabadka ah.

od.328aad. Xccqs, U Baxsasho Goob Cadow:-

(1) Askariga u baxsada cadowga si uu ula soo safto cadowga iskana taga kana fogaada ciidankiisa, marakab ama dayuurad, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyom derejo ka qaadis.

od. 329aad. Xccqs, Baxsasho Ayadoo Cadow Joogo:-

(1) Askriga ka tirsan ciidan ee ayadoo cadow joogo loo xil saaray hawl fulin cadowga lid ku ah oo iska taga asagoo madaxdiisda amar ka haysan kana fogaada goobta shaqada, waxaa loo aqoonsanayaa baxsi, waxaana lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah.

od. 330aad. Xccqs, Ka baxsasho soo xaadirid, soo noqosho la'aan fadhi iyo goobta shaqo ayadoo uu cadow joogo:-

(1) Qofka gala dembiga baxsadka ah, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah xabadka looga fuliyo.

(a) Asagoo ka mid ahaa fadhi cadow hor joogo tegi waaya sabab la'aan 2 maalmood gudahood waqtigii loo qabtay.

(b) asagoo ka tirsanaa fadhi cadow hor taagan yahay ee iska maqnaada oo aan ku soo laaban 2 maalmood oo is xigta gudahood mudadii loo qabtay.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya askariga loo xil saaray hawlgal ciidan meel cadow joogo oo aan tegin goobtii shaqada kana soo laaban sabab la'aan 2 maalmood oo is xigta waqtigii loo qabtay.

Qod. 331aad. Xccqs, Baxsasho goob aan cadow joogin:-

(1) Marka laga soo tago qodobada hore qofka gala dembiga baxsashada ah, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka yarayn 6 sano xabsi ciidan ah, ayadoo la tixgelinaayo mudada uu maqnaa.

(a) Asagoo shaqada ciidanka hayey ee ka fogaaday hawsha fasax la'aan maqnaadana hal maalin.

(b) asagoo hawsha ciidanka haya oo isaga taga si sharci darro ah oo aan shaqada dib ugu soo noqon 2 maalmood gudahood.

(2. Ciqaabta waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 332aad cccqs, Ku Noqosho Baxsi:-

(1) Ciqaabta ku xusan qodobada hore waa la kordhinayaa kala baroo bar, askariga mar 2aad waqtiga dagaalka baxsada.

(2) Waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho xabad looga fulinaayo. Askariga waqtiga dagaalka mar 3aad baxsada.

Qod. 333aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga cusleeya iyo cadow u gelid:-

(1) Haddii dembiiluhu ka dhuunto waajibaadkiisii shaqada ciidanka ee dibada tago waa la kordhinayaa ciqaabta ku xusan qod. 331 xccqs.

Qod. 334aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga cusleeya baxsasho lagu heshiiyey:-

(1) Ciqaabta ku xusan qod. 331, waxaa lagu kordhinayaa kala bar haddii ay baxsiga ay galaan 3 qof wixii ka badan ayagoo ku heshiiyey.

(2) waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka ah. Dadka ururiyey ama abaabulay baxsiga.

Qod. 335aad. Xccqs, Baxsi Degdeg Ah:-

(1) Ciqaabta ku xusan qodobada 331-332-333-334, waxaa lagu ciqaabayaa baxsiga degdeg ah sida ku xusan qod.133 xccqs ee waqtiga nabadda.

(2) sida ku xusan xarafka (e) ee qod. 133 xccqs waqtiga nabadda iyo ciqaabta ku xusan qaybta hore, waxaa lagu qaadayaa qofkii isku soo beddelay kan fakaday, balse ciqaabta waa la dhimi karaa.

QOD. 336AAD. XCCQS, XAALADAHA DEMBIYADA & CIQAABTA:-

(1) Marka uu jiro dhaqdhaqaaq ciidan waqtiga dagaalka, haddii la qoro dhibow ama loo yeero askari ka tagay shaqada oo sabab la'aan ku imaan waaya marka loo yeero ciidan ahaan 2 maalmood is xigta waqtigii loo qabtay, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 2 sano xabsi ciidan ah marwalba ayadoo oo la tixgelinaayo mudadii uu maqnaa.

(2) ciqaabta waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

OD. 337AAD. XCCQS, ARIMAHA DEMBIGA CUSLEEYA IYO U GUDBID DIBADDA:-

(1) Sida ku xusan qodobka hore, haddii dembiiluhu u baxsado dibada kana dhuunto shaqada, ciqaabta waxaa lagu kordhinayaa kala barrow bar ½.

Qod. 338aad. Xccqs, Qorid dhibow, ruqso loo yeeray:- isku bedelid qof kale, marka la qoro dhibow ama oo yeero qof shaqada laga ruqseeyey sida ku xusan qod. 336 xccqs oo aan soo xaadirin iskuna beddela of kale, waxaa loo aqoonsanayaa (maqane), waxaana lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku qoran qod.336 ccqs oo lagu kordhiyey ½ kala bar.

Qod. 339aad. Xccqs, Qofka isku beddelay qof dhibow ah ama loo yeeray:-

(1) Sida ku xusan qodobka hore qofka isku bedela qof hawsha ciidanka loogu yeeray ama dhibow ah si ay u qabtaan shaqo ciidan, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabta ku xusan qodobada 2da ah ee hore waana la dhimi karaa.

Qod. 340aad. Burburin, ka maqnaansho u yeeris uu ku dhawaaqay taliyuhu:-

(1) Sida ku xusan xaaladaha qodobada 330-331-336 xccqs taliyaha ciidanka wuxuu awood u leeyahay inuu askariga maqan ku cadeeyo baxsi ama maqane u yeeris 24 saac markuu maqan yahay.

Qod. 341aad. Xccqs, Xaaladaha dembiga fududeeya:-

(1) Sida ku xusan qaybaha hore ciqaabta ku qoran dembiyada baxsashada iyo maqnaanshaha u yeeris, waa la dhimi karaa ciqaabtooda, haddii dembiiluhu isa soo dhiibo 10 beri gudahood maqnaanshihiisa.

Od. 342aad. Xccqs, Burburin ama weerarid hawl ciidan ama qalab ciidan:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 15 sanoxabsi ciidan ah.

(a) Cid kasta oo goobaha dagaalka khasaareysa, burburisa oo ka dhigta waxaan waxba tarin kuligood ama qayb ka mid ah, xataa muddo kooban markab, diyaarad, gaadiid, jidad, warshado, kaydad, makiinado, qalabka dagaalka, fiilooyinka telegaraamyada, raadiyayaasha, teleefoonada iyo wax kasta hawsha difaaca ciidanka leeyahay. Sida derbiyada ku wareegsan xeryaha iyo siliga lagu xayndaabay sabab ciidan darteed.

(b) ka dhiga waxaan waxba anfacayn kuligeed ama qayb ka mid ah hubka iyo risaasta.

(2) Waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis., haddii xaaladahaas ay ka dhalato awood yari diyaar garowga iyo ama curyaamin qaran hawsha ciidanka.

Qod. 343aad. Xccqs, Siibid iyo burburin calamada ciidanka:-

(1) Cid kasta oo goobaha dagaalka burburisa, fujisa ka dhigta wax aan waxba anfacayn kuligood ama qayb ka mid ah, xataa waqti gaaban, seenyaalayaasha, karteelayaasha alaabadaha loo dhisay xaalado amaan, jidadka, dhulka, xeebaha, garooamada, isgaarsiinta iyo gaadiidka loogu talo galay guud ahaan hawsha dadweynaha, waxaa lagu ciqaabayaa 2 ilaa 10 sano xabsi ah.

Qod. 344aad. Xccqs, Dilid, khasaarcyn adeega yaal xoolo ah oo loo isticmaalo hawl ciidan dhinaca isgaarsiinta ah:-

(1) Cid kasta oo disha, khasaareysa, qooleyda safarka ah ama xayawaan kale oo qabta shaqo ciidanka dhinaca isgaarsiinta gaarsiiya dhibaato ama ka hor istaaga hawsha ciidanka ee isgaarsiinta ah senyaale ah oo ay waday, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.
(2) haddii falku u dhaco si kama ah, ciqaabtu waxay noqonaysaa ilaa 1 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 345. Xccqs, Burburinm khasaareyn, dib u dhigid maraakiibta & diyaaradaha shacabka:-

(1) Cid kasta oo burburisa oo ka dhigta waxaan waxba tarayn, kuligiis ama qayb ka mida xitaa waqti kooban, maraakiibta ganacsiga iyo dayaaradaha shacabka oo u qaybsanaa inay wax u qaadaan dadweynaha isgaarsiin ahaan dib u dhigga safarkooda, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka yarayn 1 sano, haddii falkaas ay ka timaado khatar nafeed, ciqaabtu kama yaraan karto ilaa 5 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii falku u dhaco si kama ah, ciqaabtu waxay noqonaysaa 1 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.
(3) Haddii falku ka dhaco mar uu safar ku yahay markabka ama dayuuradaha dibada dalka, ciqaabaadkaas waa la kordhinaa.

(4) haddii dembiiluhu yahay cabeeye ama kabtanka markabka ama qof kale oo saaran, ciqaabtu waxaa lagu kordhinayaa kala bar.

Qod. 346aad. Xccqs, Is Hortaag Qandaraas Ciidan:-

(1) Cid kasta oo gudan wayda waajibaadkii ka saamaa qandaraaska ciidanka oo ay qabtay ee ka baaqsata kuligeed ama qayb ka mid ah wixii ay u baahnayd hawsha ciidanka c.q.s. ee dowladda, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 6 ilaa 15 sano.

(2) haddii keenida alaabta ay xoogaa daahdo ciqaabtu waxay noqonaysaa 1 ilaa 7 sano xabsi ah.

(3) haddii falku u dhaco si kama ah, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ciidan ah.

(4) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya kuwa haysta qandaraaslayaasha hoose, dulaalada, wakiilada qandaraaslaha haddii ay gudan waayaan waajibaadkii ka saarnaa qandaraaska.

od. 347aad. Xccqs, Xumeyn Qandaraas Ciidan:-

(1) Cid kasta oo gasha inay xumayso noocooda waxyaabihii lagu heshiiyey, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 16 sano.
(2) haddii waxyaabaha xunxun ay dhaliyaan khatar caafimaad ciidankii dagaalamaayey ama u keenaan dhib hawsha ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in, haddii ay sugnaadaan xaalado kahatar ah oo gaara ciidamada, waxaa lagu ciqaabayaa dil & derejo ka qaadis.

od. 348aad. Xccqs, Isticmaalid dharka ciidanka iyo calaamooyinkiisa:-

(1) Cid kasta oo si sharci darro ah dadka dhexdiisa ugu lebisata dharka ciidanka iyo calaamooyinka garaadaha ciidamada q.s. ee soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 sano xabsi ah.
(2) haddii dembiiluhu noqdo ciidan, waxaa lagu ciqabayaa 6 bilood ilaa 2 sano xabsi ah.

QODOBKA 349AAD. XCCQS, AWAAMIIRTA TALIYAHA GUUD IYO ISDHAAFSIGOODA FADHIYADA:-

(1) Dembiyada ku xusan capo ii iyo capo iii marka uu u galo qof ah soomaali ah cadowga, waa loo ciqaabayaa dembiyada ayadoo la raacayo tilmaamaha uu bixiyo taliyaha guud waa marka cadowgu uu ogolaado sharci ahaanta qofkaas soomaaliga ah.

Qod. 350aad. Xccqs, Fulinta xukunada lidka ku ah ciidamada:-

(1) Fulinta xukunada ay ku dhawaaqdo maxkamadda ciidamada dagaalka oo lidka ku ah ciidamada cadowga iyo qof kasta oo cadowga u shaqeeya xukunadaas ku dhacay xaataa dadka degan dhulka soomaalida ee cadowgu qabsaday ama dhul ciidamada soomaalidu cadowga ka qabsadeen, waxaa la dhowrayaa waxa uu qabo xeerka ccqs waqtiga nabadda, kuwa ciidamada ahna waxaa loogu bedelayaa xabsi ciidan xeerka guud sida uu qabo.

QOD. 351AAD. XCCQS, DAGAAL AY SAMEEYEEN DAD KA DUWAN KUWII SHARCIGU AHAA:-

(1) Cidkasta oo ku samaysa dagaal ciidamada soomaalida, gaarsiisana khasaare dad iyo qalab ayagoo aan u haysanin sharci, waxaa lagu ciqaabayaa hadii aan dembi ka weyn ka dhalan ama aan loo hayn xeer gaar ah, ciqaabteedu waa dil xabadka ah.

(2) haddii ay soo baxaan xaalado gaar ah oo fududeeya khasaaraha iyo masuuliyada dembiilaha ciqaabta waxay noqonaysaa mid aan ka yarayn ilaa 5 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 352aad. Xccqs, Dheereyn sharci darro ah ee dagaal:-

(1) Taliyaha iyadoo aan baahi jirin ama sabab lagama maarmaan ah sii wada dagaalka, kaddib marka uu helo wargelinta rasmiga ah ee joojinta dagaalka ama hakinta ama heshiis nabadeed oo la gaaray, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 10 sano xabsi ciidan ah.

(2) Qod.353aad. Xccqs, fulin la'aan joojinta dagaalka:-

(1) Taliyaha hela ogeysiin rasmi ah, joojinta dagaalka iyo weerarka, ayadoo nabad la gaaray si kama ahna u amra sii wadista dagaalka, falkaas oo keliya, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 354aad. Xccqs, <u>Ku xadgudb joojinta dagaalka</u>:-

(1) Taliyaha ayadoo aan loo baahnayn ficil ka hortag sabab la'aan xabad joojinta u jebiya, xaalad dagaalna bilaaba ayadoo heshiis la isla gaaray, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 10 sano.

(2) toogasho xabadka looga fulinaayo haddii weerarkii uu qaaday weerar celin iyo dagaal ka dhasho.

Qod. 355aad. Xccqs, <u>Ka gudbid xadka la kala joogo</u>:-

(1) Cid kasta oo ka gudubta xadka la kala qortay fasax la'aan, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano ilaa 5 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 356aad. Xccqs, <u>Colaad gelin dowlad dhexdhexaad ama isbahaysi</u>:-

(1) Taliyaha fasax la'aan dowladiisa ayadoo aan baahi jirin sameeya ficil abuuri kara colaad dowladeed dhexdhexaada ama isbahaysi aan leenahay, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

(2) haddii ficiladaasu ay dhaliyaan in ay wax ka soo gaaraan dowladda soomaaliyeed ama muwaadiniinteeda degan dhulkaas oo haysan jirin ilaalinta dowladahaas ugana timaada khasaare ka aarsi ah, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 12 sano xabsi ciidan.

(3) Haddii falkaas uu dhaliyo in la kala goosto xiriirkii diblomaasiga ah iyo ka aargudasho, ciqaabtu waxay noqonaysaa 7 ilaa 15 sano xabsi ciidan ah.

(4) haddii falkaas uu keeno dagaal lagala hor yimaado dowladda soomaaliyeed, ciqaabtu waxay noqonaysaa mid aan ka yarayn 12 sano xabsi ciidan ah.

(5) haddii falkaas dagaal oogista ah uu dagaal ka dhasho keenana gubasho, burbur, dhimasho qof ama wixii ka badan, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah.

(6) ciqaabta waxaa raacaya sharaf ka qaadis.

Qod. 357aad. Xccqs, Arrin Kama ah:-

(1) Sida ku tilmaaman qodobada 352-354-56, taliyaha falkaas kama ahaan uga dhaco xadgudub awoodiisa intii ka baxsanayd, ciqaabta dilka ah waxaa loogu beddelayaa 5 sano oo xabsi ah, arrimaha kale ciqaabaadkooda, waxaa laga dhimayaa 3/2 meel.

(2) waxaa la joojinayaa sharaf ka qaadistii ku dhici lahayd.

Qod.358aad. Xccqs, Taliyaha amra in la isticmaalo hub macnuuc ah:-

(1) Taliyaha ciidan ee inuu burburiyo darteed amra in la isticmaalo hub ka macbuuc ah xeerarka caalamiga ah oo aysan ogoleyn sharaf dhacna u keeni kara magaca ciidanka, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xabsi ah. Haddii aan sharcigu u qorin qanuun gaar ah.

(2) haddii falkaasi keeno baaba ciqaabtiisu kama yaraan karto 10 sano xabsi ah.

Qod. 359aad. Xccqs, Qof ka duwan taliyaha oo isticmaala hub mamnuuc ah:-

(1) Ciqaabta ku xusan qodobka hore, waxaa mutaysanaya qofkasta oo isticmaala waxyaabaha ah mabnuuca oo sharcigu diidayo iyo xeerarka caalamiga ah oo sharaf dhacna u keeni kara ciidamada.

(2) hase yeeshee ciqaabta waa la dhimayaa.

Qod.360aad. Xccqs, Isticmaal awood xad dhaaf ah:-

(1) Taliyaha waqtiga dagaalka amra in la isku difaaco ama lagu weerartamo awood aan loo baahanayn oo aan joojin dagaalada marka uu helo amar rasmi ah ayadoo kuwa ka soo horjeeda ay qaateen tilmaantaas, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 361aad. Xccqs, Hujuumid dad is dhiibay:-

(1) Qofkasta oo ku xad gudba sharciga iyo xeerarka caalamig ah oo hujuuma qof is dhiibay oo cadow ah, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 15 sano xabsi ah,haddii dhaawac ka yimaado xabsi daa'in, haddii geeri ka timaado dil.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofka dhibaateeya maxbuus cadow oo xiran.

QoOd. 362aad. Xccqs, Taliyaha ka gaabiya digniinta goobaha la garaacayo:-

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya, haddii falkaas lagu fuliyo kan cadowga u dhashay oo deganaa meel ka mid ah dhulka soomaaliyeed ama sharci ahaan u ahaa muwadin dalkaas ah.

Qod. 367aad. Xccqs, Reebanaanshaha qaarijinta degdega ah basaasiinta iyo dembiyada sharci dhaafka ah ee dagaalka:-

(1) Taliyaha ayadoo aanay jirin khatar taagan oo wax u dhimaysa nabadgalyada difaaca ciidanka amra asagoo aan maxkamad yar saarin is dhaafiya qof lagu qabtay asagoo faraha kula jira basaasnimo ama dembi lid ku ah sharciga dagaalka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan ilaa 1 sano.

Qod. 368aad. Xccqs, Ku xadgudub wax yaalaha dhowrsan iyo aqlaaqda wanaagsan:-

(1) Qof kasta oo sabab la'aan u hajuuma dadka dhowrsan ama aqlaaqda wanaagsan oo ku sugan goobaha dhowrsan, waxaa lagu ciqabaayaa xabsi dhan 3 sano.
(2) sharciga ciqaabta ciidamadu wuxuu u yaqaanaa meelaha dhowrsan meelaha la ilaaliyo.

Qod. 369aad. Xccqs, Ku xadgudub ciidan dad shacab ah oo degan goobaha la qabsaday ee dagaalka:-

(1) Askariga sabab la'aan arimo ka baxsan dagaalka dhibateeya dad shacab ah oo degan dhulka la qabsaday ayadoo oo aanay ka mid ahayn cadowga lala dagaalamayo, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 2 sano xabsi ah.

(2) haddii hujuumkaas uu ka dhasho dil, iskuday dil ama dhaawac culus, waxaa loo raacayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta hore, hase yeeshee xariga waa la dhimayaa.

(3) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya kuwa degan dhulka cadowga oo ciidamada qabsadeen oo ayaguna weerara dad kale oo iyaga ka mid ah.

Qod. 370aad. Xccqs, Bililiqo iyo jabsi, cid kasta oo ku kacda si toos ah bililiqo iyo jabsi ama ku dhiiri gelisa dadka kale inay wax boobaan, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

Qod. 371aad. Xccqs, Gubid burburin iyo khasaareyn weyn dhulka cadowga:-

(1) Cid kasta oo dhulka cadowga ayadoo aan ku qasbanaan baahi ka timid hawlgalka ciidanka gubta guri ama warshad ama noockasta oo burburin ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 15 sano.
(2) haddii falkaas uu ka dhasho dhimasho qof ama ka badan, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

(3) isla ciqaabtaas waxaa lagu fulinayaa qofkii guba ama burburiya ama khasaaro weyn gaarsiiya taalooyinka taariikhiga ah, goobaha hidaha & dhaqanka, meelaha sayniska, meelaha lagu cibaadeysto iyo goobaha samafalka xitaa haddii cadowgu leeyahay.

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah., taliyaha ciidanka weerarka ah oo ayadoo aan loo baahnayn hawlgal ciidan fuliya asagoo aan wax ogeysiin ah bixin kuna xadgudba sharciga iyo xeerka caalamig ah.

od. 363aad. Xccqs, Taliyaha ka gaabiya inuu difaaco goobaha warshadaha la doonayay in la dhowro nabadooda:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah, taliyaha ciidanka goobta qabtay oo talaabo ku haboon ka qaadin dhowristooda kuna xadgudba sharciga iyo xeerka caalamiga ah,

(a) Isbitaalada, warshadaha, goobaha xanaanada, daawada iyo goobaha gargaarka ah ee caafimaadka, kuwa socda iyo kuwa meelaha ku yaala, maraakiibta isbitaalada ah, diyaaradaha caafimaadka iyo wershadaha sayniska ama hay'adaha samafalka iyo meelaha lagu cibaadeysto una isticmaala ciidan ahaan.

(b) goobaha dowladaha dhexdhexaadka ahi, xarumaha dublamaasiyiinta haddii aan loo isticmaalin goob ciidan oo ay ka taagan yihiin calaamado la arki karo.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya taliyaha aan calaamayn goobaha sare lagu soo sheegay ee galay goobtaas kuna xadgudbay sharciga iyo xeerka caalamiga ah.

od. 364aad. Xccqs, Isticmaal sharci darro ah calamo badbaado:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 7 sano.

(a) Cidkasta oo isticmaasha calaamadaha iyo calamada la badbaadiyo sida isbitaalada iyo goobaha wershadaha oo lagu soo sheegay qodobka hore.

(b) calaamadaha icrc, bisha cas, hay'daha gargaarka maraakiibta, isbitaalada iyo diyaaradaha caafimaadka.

(c) calaamadaha badbaadada caalamiga ah.

(d) calanka baarlamaanka.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofkii si sharci darro ah u qaata calan iyo dhar ciidan oo ka duwan midka qaranka.

od. 365aad. Xccqs, Aflagaadeyn calaamadaha caalamiga ah:-

(1) Cidkasta oo aflagaadeysa calaamadaha caalamiga ah iyo badbaadintooda, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah.

od. 366aad. Xccqs, Ku qasbid maxbuus cadow inuu la hawlgalo ciidanka:-

(1) Askariga qabsaday goob cadow oo ciidamadu qabteen ama meel kale oo qof cadow ah la hayo ku qasba inuuu dagaal la galo dalkiisa ama uu gacan ka siiyo noockastoo hawlgal ah, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah.

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah., taliyaha ciidanka weerarka ah oo ayadoo aan loo baahnayn hawlgal ciidan fuliya asagoo aan wax ogeysiin ah bixin kuna xadgudba sharciga iyo xeerka caalamig ah.

od. 363aad. Xccqs, Taliyaha ka gaabiya inuu difaaco goobaha warshadaha la doonayay in la dhowro nabadooda:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah, taliyaha ciidanka goobta qabtay oo talaabo ku haboon ka qaadin dhowristooda kuna xadgudba sharciga iyo xeerka caalamiga ah,

(a) Isbitaalada, warshadaha, goobaha xanaanada, daawada iyo goobaha gargaarka ah ee caafimaadka, kuwa socda iyo kuwa meelaha ku yaala, maraakiibta isbitaalada ah, diyaaradaha caafimaadka iyo wershadaha sayniska ama hay'adaha samafalka iyo meelaha lagu cibaadeysto una isticmaala ciidan ahaan.

(b) goobaha dowladaha dhexdhexaadka ahi, xarumaha dublamaasiyiinta haddii aan loo isticmaalin goob ciidan oo ay ka taagan yihiin calaamado la arki karo.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya taliyaha aan calaamayn goobaha sare lagu soo sheegay ee galay goobtaas kuna xadgudbay sharciga iyo xeerka caalamiga ah.

od. 364aad. Xccqs, Isticmaal sharci darro ah calamo badbaado:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 7 sano.

(a) Cidkasta oo isticmaasha calaamadaha iyo calamada la badbaadiyo sida isbitaalada iyo goobaha wershadaha oo lagu soo sheegay qodobka hore.

(b) calaamadaha icrc, bisha cas, hay'daha gargaarka maraakiibta, isbitaalada iyo diyaaradaha caafimaadka.

(c) calaamadaha badbaadada caalamiga ah.

(d) calanka baarlamaanka.

(2) Isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya qofkii si sharci darro ah u qaata calan iyo dhar ciidan oo ka duwan midka qaranka.

od. 365aad. Xccqs, Aflagaadeyn calaamadaha caalamiga ah:-

(1) Cidkasta oo aflagaadeysa calaamadaha caalamiga ah iyo badbaadintooda, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah.

od. 366aad. Xccqs, Ku qasbid maxbuus cadow inuu la hawlgalo ciidanka:-

(1) Askariga qabsaday goob cadow oo ciidamadu qabteen ama meel kale oo qof cadow ah la hayo ku qasba inuuu dagaal la galo dalkiisa ama uu gacan ka siiyo noockastoo hawlgal ah, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ah.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya, haddii falkaas lagu fuliyo kan cadowga u dhashay oo deganaa meel ka mid ah dhulka soomaaliyeed ama sharci ahaan u ahaa muwadin dalkaas ah.

Qod. 367aad. Xccqs, Reebanaanshaha qaarijinta degdega ah basaasiinta iyo dembiyada sharci dhaafka ah ee dagaalka:-

(1) Taliyaha ayadoo aanay jirin khatar taagan oo wax u dhimaysa nabadgalyada difaaca ciidanka amra asagoo aan maxkamad yar saarin is dhaafiya qof lagu qabtay asagoo faraha kula jira basaasnimo ama dembi lid ku ah sharciga dagaalka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan ilaa 1 sano.

Qod. 368aad. Xccqs, Ku xadgudub wax yaalaha dhowrsan iyo aqlaaqda wanaagsan:-

(1) Qof kasta oo sabab la'aan u hajuuma dadka dhowrsan ama aqlaaqda wanaagsan oo ku sugan goobaha dhowrsan, waxaa lagu ciqabaayaa xabsi dhan 3 sano.
(2) sharciga ciqaabta ciidamadu wuxuu u yaqaanaa meelaha dhowrsan meelaha la ilaaliyo.

Qod. 369aad. Xccqs, Ku xadgudub ciidan dad shacab ah oo degan goobaha la qabsaday ee dagaalka:-

(1) Askariga sabab la'aan arimo ka baxsan dagaalka dhibateeya dad shacab ah oo degan dhulka la qabsaday ayadoo oo aanay ka mid ahayn cadowga lala dagaalamayo, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 2 sano xabsi ah.

(2) haddii hujuumkaas uu ka dhasho dil, iskuday dil ama dhaawac culus, waxaa loo raacayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta hore, hase yeeshee xariga waa la dhimayaa.

(3) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya kuwa degan dhulka cadowga oo ciidamada qabsadeen oo ayaguna weerara dad kale oo iyaga ka mid ah.

Qod. 370aad. Xccqs, Bililiqo iyo jabsi, cid kasta oo ku kacda si toos ah bililiqo iyo jabsi ama ku dhiiri gelisa dadka kale inay wax boobaan, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

Qod. 371aad. Xccqs, Gubid burburin iyo khasaareyn weyn dhulka cadowga:-

(1) Cid kasta oo dhulka cadowga ayadoo aan ku qasbanaan baahi ka timid hawlgalka ciidanka gubta guri ama warshad ama noockasta oo burburin ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 15 sano.
(2) haddii falkaas uu ka dhasho dhimasho qof ama ka badan, waxaa lagu ciqaabayaa dil toogasho ah iyo derejo ka qaadis.

(3) isla ciqaabtaas waxaa lagu fulinayaa qofkii guba ama burburiya ama khasaaro weyn gaarsiiya taalooyinka taariikhiga ah, goobaha hidaha & dhaqanka, meelaha sayniska, meelaha lagu cibaadeysto iyo goobaha samafalka xitaa haddii cadowgu leeyahay.

Qod. 372aad. Xccqs, ARUURSASHO HANTI.-

(1) Askarig ama qof kale u shaqeeya ciidamada qalabka sida oo arursada ayadoo aan baahi jirin ama aan fasax u haysan cunto, qalab, dhar iyo wax kale oo lagu aaminay, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano xabsi ah.

(2) haddii falkaas ay galaan 2 qof iyo wixii ka badan ciqaabta kala bar ayaa loo kordhinayaa.

(3) haddii loo isticmaalo hujuum ciqaabtu 1 ilaa 8 sano xabsi ah.

Qod. 373aad. Xccqs, Ka Hor Istaagid La'aan Urursasho:-

(1) Sarkaalka iyo s/xigeenka aan wax kasta ku hor istaagin inuu joojiyo xaaladaha lagu soo sheegay qod. Hore waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 1 sano xabsi ah.

Qod. 374aad, xccqs, Gudasho la'aan ciidan dhaawac ah, hafasho iyo burburka:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah., askariga u qaybsan hawsha caafimaadka oo waqti dagaal ku socdo ama kadib u gargaari waaya ciidanka ama dad kale oo la socda ciidamada q.s. oo ku wax yeelooba kuna dhaawacma ama ku hafta goob cadowgu joogo.
(2) haddii xaladahaas kor lagu soo sheegay ay u dhaacaan si kama ah ciqaabtu waxay noqonaysaa 7 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 375aad. Xccqs,U isticmaalid hub ambalaas isbitaalada maraakiibta iyo dayuuradaha ucaafimaadka, dadka shaqada kuleh caafimaadka:-

(1) Cidkasta oo u isticmaasha ambalaaska isbitaalada iyo kooxaha guur guura ee caafimaadka iyo maraakiibta caafimaad, diyaaradaha caafimaadka. Goobaha dadka buka, kuwa dhaawac ah iyo dadka ka shaqeeya goobaha caafimaadka sida sharigu qabo iyo heshiisyada caalamiga ah waa qasab in la dhowro lana ilaaliyo, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan falkaas keenin dembi culus xabsi dhan 10 sano.

Qod. 376aad. Xccqs, Dhaqaalo xumeyn dadka dhaawac ah, kuwa burburka ah iyo kuwa haftay:-

(1) Qofkasta oo dhaqaalo xumeeya curyaamiinta, dhaawaca iyo kuwa haftay, ayadoo cadow joogo, waxaa lagu ciqabayaa absi dhan 5 sano.

(2) dhaqaalo xumeyntaasi haddii ay noqoto mid culus oo keenta dhaawac, ciqaabtu kama yaraan karto 10 sano, hasddii falkaas uu galo qofka gaadiidka wada ama kaaliyihiisa dadka curyaanka ah iyo kuwa dhaawaca ah ama kuwa haftay u geysto, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in.

(3) waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis, haddii ay arintaas ka dhalato dhimasho gaarta dadka kor lagu soo sheegay.

Qod. 377aad. Xccqs, Qaawin curyaamiinta iyo kuwa haftay:-

(1) Cid kasta oo qaawisa curyaamiinta, dhawaaca iyo kuwa haftay, xataa haddii ay cadow yihiin ama ka xada lacag iyo alaabo kale, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 5 sano ilaa 10 sano.

(2) haddii falkaas lagu galay hajuum loo isticmaalay qofka, ciqaabtu kama yaraan karto ilaa 10 sano xabsi ah.

(3) Haddii dembiiluhu uu yahay kan gaadiidka wada ama kaalkaaliye caafimaad ee u gargaaraha curyaanka, dhaawaca iyo haftaha, waxaa lagu ciqaabayaa:-

(a) Xabsi aan ka yarayn 15 sano sida ku xusan qaybta hore ee qodobka.

(b) xabsi daa'in sida ku xusan qaybta 2aad ee qodobkaan.

(4) Waxaa lagu ciqaabayaa dil iyo derejo ka qaadis, haddii falkaas uu ka dhasho dhimasho ku timaada curyaanka, dhaawaca iyo haftaha.

Qod. 378aad. Xccqs, Hujuumid dadka u qaybsan hawlaha caafimaadka iyo madaxda <u>meelaha lagu cibaadesto</u>:-

(1) Marka laga soo tago qod. 375 xccqs, cidkasta oo hajuunta dadka sida qaanuuniga ah u qaabilsan hawlaha caafimaadka sharci ahaan iyo xeerarka caalamiga, waa waajib in la karaameeyo lana dhawro, waxaa lagu ciqaabayaa 5 ilaa 10 sano xabsi ah.

(2) isla ciqaabtaas waxaa mutaysanaya, haddii loola tago falkaas dadka qaabilsan arrimaha cibaadeysiga ee ciidamada qalabka sida la socda.

(3) Haddii hujuunkaas ay ka dhalato geeri ama iskuday dil ama dil kasdhaaf ah ama dhaawac aad u culus, waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo x. C.guud xabsigase waa la dhimayaa.

Qod. 379aad. Xccqs, <u>Siideyn la'aan dadka qaabilsan hawlaha caafimaadka meelaha barakeysan</u>:-

(1) Cidkasta oo ku xadgudubta sharci ahaan heshiisyada caalamiga ah oo aan siin ama ku wareejin ama haysta dadka lagu soo sheegay qodobka hore, marka ay ogaadaan hawlahooda isbitaalada ambalaasyada iyo goobahooda shaqada, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 6 sano xabsi ah.

Qod. 380aad. Xccqs, <u>Qurmin aflagaadeyn xadid mayd:-</u>

(1) Cidkasta oo qurmisa mayd 1 askari oo dagaalka ku dhintay ama maydkaas dushiisa aflagaado ku tiraahda tilmaan xun iyo wax ceeb ah ama qarisa maydka dhamaan ama qayb ka mid ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 10 sano.

Qod. 381aad. Xccqs, <u>Qaawin mayd, xadid lacag iyo qalab kale</u>:-

(1) Cidkasta oo goobta dagaalka ama dagaalka kadib ka faa'iideysata qaawisa mayd dushiisana ka xada lacag ama alaab kale oo qiimo leh, waxaa lagu ciqaabayaa 1 ilaa 15 sano xabsi ah.

(2) hadii falkaas ay dad badan wada galaan ciqaabtu waa la kordhinayaa.

Qod. 382aad. Xccqs. Shari darro loo isticmaalo dadka dhibaateysan ee la qabto:-

(1) Taliyaha u isticmaala si qaab daran cadowga gacantiisa soo galay oo curyaan ah, dhaawac ah iyo kuwa haftay oo aan siin dhaqaaleyntii sharciga ahayd iyo heshiisyada caalamiga ah dhibaato weyna gaarsiiya dadkaas ama u isticmaala inuu iska xijiyo cadowga, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yarayn 3 sano, haddii aan dembi ka weyn ka dhalan.

Qod. 383aad. Xccqs, AMARDIIDO:-

(1) Maxbuuska dagaalka derejo kasta hala haadee oo diida amar uu siiyey qof ciidanka dowladda ka mid ah xataa yuusan derejo lahayn, kaasoo u xil saarnaa soo kaxaynta ilaalinta iyo kormeerida maxaabiista, waxaa lagu ciqaabayaa 1 sano xabsi ah.

(2) waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano, haddii goobtu ay tahay meel khatar ah.

Qod. 384aad. Xccqs Hajuumid iyo handadaad ciidanka dowladda:-

(1) Maxbuuska dagaalka oo hajuuma ama handada qof ka mida ciidamada soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xabsi ah., haddii uu yahay askarigu mid u xil saarnaa kaxeynta, kormeerka iyo ilaalinta maxbuuska, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 7 sano xabsi ah.
(2) haddii hujuumka uu ka dhasho dil, iskuday dil iyo dil kas dhaaf ah ama dhaawac culus ama mid aad u culus, waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta soomaaliyeed, balse ciqaabta waa la kordhinayaa.
(3) haddii ay falkaas ka qayb qaateen seddax qof iyo wixii ka badan ciqaabtu waa la kordhinayaa.

Qod. 385aad. Xccqs, Maqal la'aan iyo cay maxbuus dagaal uu u geysto maxbuus kale:-

(1) Sida ku xusan qodabada hore, waxaa loo raacayaa cibaadka ku qoran qodobadaas hadduu falkaas geysto maxbuus dagaal isla maxbuus kale oo xiran oo gacanta dowladda ku jira oo xiran, marka la kulminayo maxaabiista uu ka mid yahay ruuxa dembiga galay.

Qod. 386aad. Xccqs, Kacdoon wadajir ah:-

(1) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 10 ilaa 20 sano maxbiista dagaalka oo tiradoodu ka badan tahay 6 maxbuus.
(a) Hadday hub qaataan oo diidaan daahiyaan inay maqlaan amarka uu siiyay qofka sare.
(b) hadday ka tagaan deganaanshaha kuna dhaqaaqaan haajuun diidmo ama daahiyaan digniinta loo jeediyay oo ah inay kala tagaan kuna xaroodaan goobahooda taasoo uu bixiyay nin madax ah.
(2) Ciqaabtiisu waxay noqonaysaa dil xabadka looga fulinaayo kuwa abaabula dhaqdhaqaajiya kacdoonkaas.

Qod. 387aad. Xccqs, Asluub Xumo Wadajir Ah:-

(1) Marka laga soo tago qodobka hore, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 ilaa 10 sano, maxabiista dagaalka oo isku arursada 6 qof wax ka badan.

(a) Diida, daahiye, iska dhega mariya amar uu siiyay qof madax ah.

(b) u soo dhaqaaqi waaya cod ama qoraal ayaga ku saabsan.

(2) Waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 10 ilaa 20 sano., kuwa hormuud ka noqda, abaabula xaaladaas kacdoonka ah.

(3) haddii falkaasi uu keenayo dhib culus tirada maxaabiista oo badan awaadeed iyo sababo keeni kara khatar markab ama diyaarad dushood, ciqaabtu waa la kordhinayaa.

(4) haddii dembiilayaashu digniinta hore wax ku qaataan ciqaabtu waxay noqonaysaa 6 bilood ilaa 3 sano, hase yeeshee kuwa xaaladda abuuray ama abaabulay, waxaa lagu ciqaabayaa 2 ilaa 7 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 388aad. Xccqs, kicin:-

(1) Xaaladaha ku xusan qodobada hore haddii ay ka dhashaan gef uu sameeyey qofka madaxda ah oo hajuum ah, handadaad ama aflagaado falkuna dhaco markaas kadib caro darteed ciqaabta dilka ahayd waxaa loogu bedelayaa 15 sano oo xabsi ah., ciqaabaadka kale waa la dhimayaa.

Qod. 389aad. Xccqs, waxaa loo yaqaano qof sare sida ku xusan seddaxda qodob ee hore:- waxaa iska leh magaca qof sare askari kasta oo ciidanka soomaalida ah xataa yuu derejo lahaane ee u xil saaran kaxeynta, kormeerida iyo haynta maxaabiista dagaalka iyo maxbuus dagaal oo dowladda soomaaliyeed ay amartay inuu kulmiyo rigeeyo maxaabiista kale ee dagaalka oo lagu hayo goobaha maxaabiista dagaalka.

Qod. 390aad. XCCQS, U heshiin kacdoon ama asluub xumo wadajir ah oo laga laabtay:-

(1) Marka 6 qof iyo wax ka badan maxaabiista dagaalka ay ku heshiiyaan dembiyada lagu tilmaamay qod. 386-387 kuwa ka qayb galay heshiiskaas waxaa lagu ciqaabayaa haddii dembigu uusan dhicin ciqaabta ku qoran qodobada sare oo laga dhimay kala bar.

(2) la ciqaabi maayo maxbuuska oo ka haray heshiiskaas inta aan la soo dhex gelin ama aan la isu qaban ama aan laysku dacweyn.

Qod. 391aad. XCCQS, Is Urursi Iyo Banaanbax:-

(1) Maxbuuska dagaalka oo maxaabiis fara badan oo dagaal ku kiciya madaxda ciidamada soomaaliyeed ee haysa si ay xabsiga dhexdiisa dhib uga abuuraan, waxaa lagu ciqaabayaa 2 sxano xabsi ciidan ah.

Qod. 392aad. Xccqs, Balan ka bax iyo dib isu hubayn:- maxbuuska dagaalka oo lagu siidaayey hawl sharafeed ah in uusan dalka soomaaliyeed dib dambe ula dagaalamayn oo hub soo qaata dagaalna ku

soo qaada dowladda soomaaliyeed iyo is bahaysigeeda, waxaa lau ciqaabayaa dil toogasho ah oo xabadka looga fulinaayo.

Qod. 393aad. Xccqs, Ku Xadgudub Iyo Dhaqaalo Xumeyn:-

(1) Askariga u xil saaran kaxeynta maxaabiista ilaalintooda, hayntooda oo asagoo u awood sheeganaya kula kaca noockasta oo xadgudub ah ama dhaqaalo xumo loo geysto maxbuus dagaal, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan dembi ka weyn ka dhalan falkaas xabsi dhan 2 ilaa 10 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 394aad, xccqs, Sharaf dilid:

Askariga sharafta ka dila maxbuus dagaal asagoo hor taagan ama qofnimadiisa, waxa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 395aad. Xccqs, Hujuumid, Handadaad Iyo Caayid:-

(1) Marka laga soo tago 2da qodob ee hore, askariga kula dhaqma hujuun, handadaad iyo cay qof maxaabuus dagaal ah, waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabta sare xataa haddii askarigaas qof ka hooseeya uu falkaas u gesyto.

(2) isla ciqabtaas waxaa mutaysanaya maxbuuska dagaalka oo mid kale oo dowladda soomaaliyeed u xil saartay inuu nidaamiyo maxbuusta kale, fayliyaana markuu kula kaco falka ku xusan qodobada sare.

Qod. 396aad. Xccqs, Ku qasbid warbixino iyo ku qabasho shaqo mabnuuc ah:-

(1) Waxaa lagu ciqabayaa 2 ilaa 7 sano xabsi ah, qofkasta oo hujuuma ama handada maxbuus dagaal ama kuwo ka badan.

(a) Inuu ku qasbo inuu siiyo warbixin lid ku ah qarankiisa ama ciidamada uu ka tirsanaa.

(b) inuuk u dirqiyo hawlo la xiriira hawlgalka dagaalka oo ay ka reebayso sharciga iyo heshiisyada caalamiga ah.

(2) Haddii hujuumkaas uu ka dhasho dil, iskuday dil ama dil kas dhaaf ah dhaawac culus ama mid aad u culus, waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo xcs, balse ciqaabta waa la kordhinayaa.

Qod. 397aad. Xccqs, hor istaagid xoriyada diinta iyo caabudida:-

(1) Marka laga soo tago xeerarka ciidan ee ka yaala qofkii si sharci darro ah ugu diida ama ka hor joogsada xoriyada diinta ama wax uu caabudo maxbuuska dagaalka, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 1 sano.

Qod. 398aad. Xccqs, ka hoos bixin lacag ama alaab:-

(1) Askariga ka faa'iideysta kana qaata lacag ama alaab kale maxbuus dagaal, waxaa lagu ciqaabayaa 6 sano xabsi ah., haddii askarigaasi uu yahay kii u xil saarnaa kaxeynta, ilaalinta ama haynta maxbuuska, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 7 sano xabsi ah.

Qod. 399aad. Xccqs, Dhaqan gelinta xeerka ciqaabta ciidamada waqtiga dagaalka oo lagu kordhiyay dunuubta lidka ku ah madaxda sare-

(1) Askariga soomaaliga ah marka uu maxbuus dagaal yahay, haddii ay galaan dembiga ku tilmaaman sharciga ciqaabta ciidam\mada soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo xeerka ciqaabta waqtiga dagaalka.

(2) haddii falkaasi uu yahay is maqal la'aan, aflagaado, handadaad iyo hujuumid loo geystay qof ka derejo sareeya oo ka mid ah ciidamada dowladda soomaaliyeed, isla markaana ah maxbuus ciqaabta xariga ah, waxaa lagu kordhinayaa 6/1 maalood ama 3/1 meel.

Qod. 400aad. Xccqs, Warbixin siin cadowga (information):-

(1) Maxbuuska dagaalka ee soomaalida ah ee u dabca, una fududeeya ama warbixin ka siiya cadowga, xaaladaha ciidankiisa, goobaha ay ku sugan yihiin iyo dhismahooda, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 10 sano xabsi ah, haddii falkaas uusan keenayn dembi ka culus.

Qod. 401aad. Xccqs, Bixin balan qaad maxbuus dagaal oo loogu beddelay xoriyadiisa:-

(1) Maxbuuska dagaalka ee soomaalida oo balan sharafeed la gala cadowga inuu dib dambe ula dagaalami doonin oo ka hela cadowga xoriyadiisa, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 5 sano xabsi ah.

Qod. 402aad. Xccqs, U imaansho la'aan madaxda:-

(1) Askariga laga soo daayo xabsi cadow ee aan soo xaadirin sabab la'aan madaxda ciidanka soomaalida hortooda 3 maalmood gudahooda marka uu soo galo dalka soomaalida ama goob ay haystaan ciidamada soomaalida, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano xabsi ah.

Qod. 403aad. Xccqs, Kala bedelasho la haystayaasha iyo maxaabiista dagaalka:-

(1) Sida sharciga ciqaabta ciidamada qorayo la haystuhu wuxuu u dhigmaa maxbuus dagaal.

Qod. 404aad. Xccqs, Dafid, qarin, burburin wax qiimo leh:-

(1) Qof kasta oo asagoo amarka raacaya hasyta amar aan sharci ahayn oo lagu cabsi geliyay la wareega, qariya wax anfac lahaa, waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano xabsi ah, haddii uu baabi'iyay ama uu tirtiray xabsigu wuxuu noqonayaa 3 ilaa 10 sano.

Qod. 405aad. Xccqs, Horjoogsi amar ciidan inay wax u qabtaan:-

(1) Cidkata xataa haday joogto dhul cadow diida, daahisa sabab la'aan inay gudato waajib sharci ah oo ay siisay madaxda ciidanka oo ah inay badbaadiso qalabka guurguura ama mid aan la rari karin oo hawsha ciidanka qaranka looga baahan yahay, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi dhan 3 sano.

Qod. 406aad. Xccqs, Dhawris la'aan codsi gacansiin shaqsi:-_ cidkasta xataa haddii ay joogto dhul cadow oo daahisa ama diida sabab la'aan inay gacan ku siiso camal u gaar ah ama shaqada ay qof ahaan u taqaano oo ay ka codsadeen madaxda ciidamada oo la xiriirta shaqo loo diray ciidamada q.s. waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano xabsi ciidan ah.

Qod. 407aad. Xccqs, Daahin iyo diidid hawl xafiis:-

(1) Sarkaalka guud iyo qofka u xil saaran hawlaha dadweynaha oo ku sugan dalka gudihiisa ama dal cadow oo si sharci ah loo waydiisto daahiya, diida hawl ku saabsan xafiiskiisa ama shaqadiisa oo wax tar u leh taliska ciidamada gacana ka siinaysa dagaalka, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano xabsi ah.

Qod. 408aad. Xccqs, Gacansiin sharci darro ah:-

(1) Askariga ku sugan dalka ama dhul cadow fasax la'aan iyo baahi la'aan ku xadgudba wuxuu sharcigu qabo ama xeerka caalamiga ah oo dhawrista iyo is dhiibida iyo gacansiinta dagaalka ama xilkiisa ka taga markii la faray, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano xabsi ah.

(2) haddii falkaas loo galo sabab dhaqaale ama hujuun, handadaad ciqabtiisu waxay noqonaysaa xabsi aan ka yarayn 5 sano.

(3) haddii hujuumka iyo handadaada ay soo raacaan dhaqaale ciqaabtu waxay noqonaysaa dil iyo derejo ka qaadis.

Qod. 409aad. Xccqs, Gacansiin gadaale marka heshiis la gaaray kadib:-

(1) Ciqaabta ku xusan qodobka hore xataa waxaa lagu fulinayaa taliyaha kadib markuu helo ogeysiinta in heshiis la gaaray kiciya dagaal dalka guduhiisa, kaasoo nabadda joojinaya ayadoo uu dhaqaale ka faa'iidaayo si dantiisa ugu raali geliyo.

Qod. 410aad. Xccqs, U awood sheegasho hantida ama guriga ciidanka:-

(1) Askariga asagoo ka faa'iideysanaya hantida iyo guryaha ciidanka ku dhaqaaqa handadaad iyo hujuun kuna qasba qofka haystay inuu siiyo wax ka badan wixii sharcigu ahaa ama ka qaata qofkii hayay ama ka faa'iideysta, waxaa lagu ciqaabayaa, haddii aan dembi ka wayn ka dhalan xabsi dhan 1 ilaa 5 sano.

Qod. 4011aad. XCCQS, Qaadasho magdaha laga sameeyo:-